Ellen G. White Estate

# Steps to Christ



ELLEN G. WHITE

# Tallaabooyinka Xagga Masiixa

Ellen G. White

Copyright © 2021
Ellen G. White Estate, Inc.

# Information about this Book

## Overview

This eBook is provided by the Ellen G. White Estate. It is included in the larger free Online Books collection on the Ellen G. White Estate Web site.

## About the Author

Ellen G. White (1827-1915) is considered the most widely translated American author, her works having been published in more than 160 languages. She wrote more than 100,000 pages on a wide variety of spiritual and practical topics. Guided by the Holy Spirit, she exalted Jesus and pointed to the Scriptures as the basis of one's faith.

## Further Links

A Brief Biography of Ellen G. White
About the Ellen G. White Estate

## End User License Agreement

The viewing, printing or downloading of this book grants you only a limited, nonexclusive and nontransferable license for use solely by you for your own personal use. This license does not permit republication, distribution, assignment, sublicense, sale, preparation of derivative works, or other use. Any unauthorized use of this book terminates the license granted hereby. (See EGW Writings End User License Agreement.)

## Further Information

For more information about the author, publishers, or how you can support this service, please contact the Ellen G. White Estate

at mail@whiteestate.org. We are thankful for your interest and feedback and wish you God's blessing as you read.

# Contents

Information about this Book . . . . . i
1—Ilaah Wuxuu jacayl u yahay Aadanaha . . . . . 4
2—Dembiiluhu siduu ugu baahanyahay Masiixa . . . . . 10
3—Toobadkeenid . . . . . 15
4—Qirasho . . . . . 26
5—Allabari . . . . . 30
6—Rumaysad iyo Aqbalid . . . . . 35
7—Tijaabada Xernimada . . . . . 41
8—Koridda Xagga Masiixa . . . . . 49
9—Shaqada Iyo Nolosha . . . . . 57
10—Aqoonta Ilaah . . . . . 63
11—Faa'idooyinka Tukashada . . . . . 69
12—Sida shakiga looga bixi karo . . . . . 79
13—Farxadda xagga Rabbiga . . . . . 86

# 1—Ilaah Wuxuu jacayl u yahay Aadanaha

Dabiiciyadda iyo Muujinta ayaa isku si uga markhaatifurayaan jacaylka Ilaah. Aabaheenna jannada waa isha keliya ee nolosha, iyo xigmadda, iyo farxadda. Eeg waxyaabaha la yaabka leh ee dabiiciyadda. Ka fikir siday ula qabsadaan waxyaabaha ay u baahanyihiin iyo farxadooda, Aadanaha keliya ma aha laakiin noolaha oo dhan. Iftiinka qorraxda iyo roobka, dhulka fidnaantiisa iyo udgoonkiisa, kuraha iyo badaha, iyo meelaha bannaanka ah, waxay dhammaantood inagala hadlaan jacaylka abuuraha. Waa Ilaah kan irsaaqa abuurkiisa oo dhan. Daa'uud wuxuu yidhi,

“Wax kasta indhahoodu adigay wax kaa sugayaan, oo quudkoodana waad siisaa xilligiisa. Gacantaadaad furtaa, oo waxaad dherjisaa wax kasta oo nool.” Sabuurradii 145:15, 16.

Ilaah wuxuu Aadanaha abuuray isagoo ah mid farxsan oo quduus ah oo dhamaystiran; Dhulka wanaagsanna markuu Ilaah abuuray, wuxuu ahaa mid aan lahayn qudhun iyo habaar toona. Waa markii lagu xadgudbay sharcigii Ilaah, sharciga ah jacaylka, markay dunidu timid belaayo iyo dhimasho. Laakiin weli iyadoo ay jirto silic iyo dhibaatooyin ka yimid xagga dembiga, Ilaah jacaylkiisa waa muuqdaa. Waxaa qoran in Ilaah dhulka u habaaray dembiga Aadanaha awgiis. Billowgii 3:17. Qodxanta iyo yamaarugga, dhibaatooyinka iyo tijaaboyinka noloshii Aadan ka dhigayey mid dhibtooda, waxaa dhamaan loo fasaxay inay qeyb ka ahaadaan wanaag oo uu Ilaah ugu talagalay inay ku tababaraan qorshaha Ilaah ee uu isaga kaga dul qaadayay burburka iyo dhibaatooyinka uu dembiga u keenay. Dunida in kastoo ay mid dembi leh tahay, haddana ma wada aha mid murugo iyo dhibaato ka buuxda. Dabiiciyadda qudheeda ayaa waxay inoo sheegaysaa farriimo rajo iyo qalbiqaboojis leh. Ubaxyada ayaa ku dul yaallaan yamaarugga dushiisa, qodxaantana waxaa daboolay wax indhaha u roon.

[5] “Ilaah waa jacayl” ayaa ku dul qoran dhir kasta iyo caws kasta. Shimbiraha codkooda hawada oo dhan ku qaadaya, ubaxyada quruxda badan ee carfinaya hawada, geedaha waaweyn ee duurka ee

dhulka caagaarinaya, waxay ka wada marag furayaan dabacsanaanta iyo sida taxaddarka leh ee uu Ilaah u doonayo inuu carruurtiisa kaga farxiyo.

Ereyga Ilaah wuxuu muujinayaa waxa uu Ilaah yahay. Isaga qudhiisa ayaa ka hadlay jacaylkiisa iyo naxariistiisa aan la qiyaasi Karin. Markuu Muuse ku tukkaday, "Waan ku baryaayey ammaantaada I tus." Rabbigu wuxuu ugu jawaabay, "Wanaaggayga oo dhan ayaan hortaada soo marin." Baxniintii 33:18, 19. Tani waa amaantiisa. Rabbigu wuxuu soo maray Muuse hortiisa, markaasuu yidhi, "Waxaan ahay Rabbiga, Rabbiga oo Ilaah raxmad iyo roonaan badan, oo cadho u gaabiya, oo naxariis iyo run badan, oo kumaankun u naxariista, oo xumaanta iyo xadgudubka iyo dembiga dhaafa." Baxniintii 34:6, 7. Isagu waa "Mid aan si fudud ku cadhoon, oo naxariis badan leh," "Waayo, wuxuu ku farxaa naxariista." Yoonis 4:2; Miikaah 7:18.

Ilaah wuxuu qalbiyadeenna ku calaamadeeyay astaamo aan lagu tirin Karin samada iyo dhulka. Xagga waxyaabaha dabiiciyadda, iyo dabacsanaanta ugu hooseysa dhulka ee qalbiyada Aadanaha garan karaan, wuxuu doonay inuu isu keen muujiyo. Waxyaabahaas oo dhan iyadoo ay jiraan, jacaylkiisa siduu yahay uma muujinno. In kastoo caddeymo badan jiraan, kan ah cadowga wanaagga wuxuu indho tiray dadka, si ay Ilaah ugu eegaan cabsi; waxay isaga ka malaystaan mid ciqaabtiisu aad u daran tahay oo aan dembiyada cafiyin. Shaydaanku wuxuu dadka ka dhigay inay aaminaan in Ilaah tilmaantiisa ugu weyn ay tahay cadaalad, oo yahay Xaakin ciqaab adag, iyo mid aad u kulul. Wuxuu dadka Ilaah ugu sawiray inuu yahay mid iyaga ku eegaya Il masayrsan si uu u kala saaro khaladaadka Aadanaha, oo uu diyaar ula yahay xukun iyo ciqaab. Sababtii ugu weynayd ee uu Ciise dunida u yimidna waxay ahayd, inuu gudcurkan qaado oo uu dadka u muujiyo jacaylka dhabta ah ee Ilaah ee aan la qiyaasi Karin.

Wiilka Ilaah wuxuu samada uga yimid inuu Aabaha muujiyo. "Ninna ma arkin Ilaah marnaba, Wiilka keliya oo laabta Aabaha ku jira kaasaa inoo sheegay." 1:18. "Oo ninna Aabaha garan maayo Wiilka maahee iyo kii Wiilku doonayo inuu u muujiyo." Matayos 11:27. Mar mid ka mid ahaa xertii uu codsaday isagoo leh, "Aabaha na tus," Ciise wuxuu ugu jawaabay, "Ma intaas badan baan idinla [6]

joogay, oo aanad I garanaynin, Filibosow? Kii I arkay wuxuu arkay Aabaha. Sidee baad u leedahay, Aabaha na tus." 14:8, 9.

Mar uu tilmaan ka bixinayey shuqulkii uu u yimid dhulka, Ciise wuxuu yidhi, "Ruuxii Rabbiga ayaa I dul jooga, waayo, wuxuu ii subkay inaan war wanaagsan masaakiinta ku wacdiyo, wuxuuna ii soo diray inaan kuwa xidhan furriinimada ogeeysiiyo iyo kuwa indhaha la' soo celinta araggooda iyo inaan kuwa nabaraysan soo furfuro." Luukos 4:18 Tan ayay ahayd shaqadiisa. Wuxuu keliya oo samayn jiray wanaag iyo inuu bogsiiyo kuwa shaydaanka uu addoonsaday. Waxaa markii dambe la arakayey tuulooyin dhan oo aan laga helayn hal qof oo xanuunsan, waayo Ciise ayaa soo dhex maray tuuladaas oo wada bogsiiyey kuwii dhammaan bukay. Shuqulladiisa waxay ka markhaatifurayeen subkiddiisa xagga Rabbiga. Jacayl, naxariis, iyo kalgacayl ayaa ka dhex muuqanaysay shuqul kastoo uu sameeyo; qalbigiisu wuxuu aad ugu dabacsanaa carruurta Aadanaha. Wuxuu u qaatay dabiiciyadda Aadanaha inuu wada gaadho doonista dadka oo dhan. Kuwa ugu masaakiinsanaa oo ugu hooseeyay kama aysan xishoon jirin inay isaga hor istaagaan. Xataa ilmaha yaryar ayaa isaga u iman jiray Waxay jeclaan jireen inay dhabtiisa ku fadhiistaan oo eegaan wejigiisa naxariista iyo jacaylka ka buuxaan.

Ciise ma uusan qarin hal hadal oo run ahaa, laakiin wuxuu dadka runta ugu wada sheegi jiray si jacayl ku jira. Wuxuu isticmaali jiray fikir iyo qaab iyo naxariis badan markuu dadka la hadlayo. Weligiis ma uusan ahayn mid dadka si xun ula hadlo, erey aan loo baahnayna kuma uu hadli jirin. mana uusan xanuujin jirin naf aan xanuun doonayn; mana uusan ka hadli jirin ceebaha dadka. Wuxuu had iyo goorba ku hadli jiray runta, laakiin jacayl ayuu kula hadli jiray. Wuxuu diidi jiray munaafaqnimo, rumaysad la'aan, iyo dembiga; wuxuu ku dul ilmeeyay Yeerusalem, oo ahayd magaaladii uu jeclaa, oo diidday inay isaga qaadato, kan ah, jidka, runta iyo nolosha. Inuu badbaadiye yahay wey diideen isaga, laakiin wuxuu iyaga ula dhaqmay si naxariis leh. Noloshiisa waxay ahayd mid aan wax kasta isaga isla jeclayn, oo dadka kale ka fikiro. Naf kastaa waxay indhihiisa hortooda ka ahayd mid qaali ah. Maadaamoo uu isagu ka soo tegay amaantiisii Ilaahnimada, wuxuu ku kastaa oo reerka
[7] Ilaah ka tirsan ula dhaqmay dabacsanaan. Dadka oo dhan waxaa isaga uga dhex muuqday kuwa dembi leh, kuwaas oo ahaa kuwii uu u yimid inuu badbaadiyo.

Taas ayaa ah dhaqanka Masiixa siday noloshiisuba muujisay. Waana taas dhaqanka Ilaah. Waa xagga qalbiga Aabaha meesha ay durdurka jacaylka ku muuqanayaan Masiixa, iyagoo u sii dhoweynaya Aadanaha xagga dadka Ilaah. Ciise, Badbaadiyihii dabacsanaanta iyo naxariista badnaa wuxuu ahaa Ilaah "Ku muuqday jidh ahaan." 1 Timoteyos 3:16.

Waxay ahayd inuu kafaarogud inoo noqdo sababtii uu Ciise u noolaa, oo u silcay oo u dhintay. Wuxuu noqday "Mid murugo badan," si aan innaga qeyb uga qaadanno farxadda weligeed ah. Ilaah wuxuu oggolaaday in Wiilkiisi uu aadka u jeclaa, oo nimcada iyo runta ka buuxday, ka soo tago meeshii amaanta badan lahayd, oo uu yimaado aduunyadan dembiga badan, oo la madoobaatay hooska dhimashada iyo habaarka. Wuxuu kaloo oggolaaday inuu ka soo tago, aasaaskii jacaylkiisa, ammaantii malaa'igaha, oo u adkeysto ceeb, cay, is-hooseysiin, cuqdad, iyo dhimasho. "Edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaacisiina waynu ku bogsannay." Ishacyaah 53:5. Bal eeg, goortuu joogay lamadegaanka, iyo beertii Geedsamane, iyo markuu isku-talaabta saarnaa! Wiilkii Ilaah oo aan iin lahayn wuxuu qaaday culayskii dembiga. Kii Ilaah midka la ahaa, kan naftiisa ka dareemay kala fogaanshaha uu dembiga u keenay Ilaah iyo Aadanaha. Ereyadan waxay ka soo baxeen faruurahiisa markuu ku qaylinayey, "Ilaahayow, Ilaahayow, maxaad ii dayrisey?" Matayos 27:46. Wuxuu ahaa culayskii dembiga, iyo dareenka xanuunkiisa, iyo ka fogaanshaha nafta ee xagga Ilaah, taas ayay ahayd wixii jebiyey qalbigii Wiilka Ilaah.

Laakiin qurbaankan weyn looma sameyn in qalbiga Aabaha lagu abuuro jacayl xagga Aadanaha ah, oo laga dhigo inuu doono inuu dadka bad baadiyo. Maya, maya! "Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay." Yooxanaa 3:16. Aabaha wuu na jecelyahay, sababtu ma aha qurbaankii weynaa awgii, laakiin qurbaankaas wuxuu inoo siiyey jacayl uu inoo qabo awgiis. Masiixa ayaa noqday dhexdhexaadiyaha uu dunida dembiga leh jacaylkiisa ku soo gaadhsiin karay. "Ilaah duniduu Masiix kula heshiiyey." 2 Korintos 5:19.

Ilaah wuxuu la dhibtooday Wiilkiisa. Xanuunkii beertii Geed- [8]
samane, dhimashadii dhakada, qalbi ka yimid xagga jacaylka aan la qiyaasi Karin ayaa dhiibay/bixiyey qiimihii kafaaragudkeenna.

Ciise wuxuu yidhi, “Sidaas daraadeed Aabuhu waa I jecelyahay, waayo, naftaydaan bixiyaa inaan mar kale qaato.” Yooxanaa 10:17.

Taas micnaheedu waxaa weeye, “Aabahay wuxuu idiin jecel yahay siduu aniga ii jecelyahay markuu naftayda u bixiyey inuu idinka kafaarogud idiinka dhigo. Anigoo noqday beddelkiinna iyo hubaashiinna, iyo nolosheydii aan dhiibay, iyo qaadashadaydii khaladaadkiinna iyo xadgudubyadiinna, waxaan ahay mid Aabihiis aad u jecel yahay; waayo, xagga qurbaankaygii, Ilaah wuxuu noqonayaa mid caadil iyo xaq ah, oo xaq buuna ka dhigayaa ku kastaa oo Ciise rumaystaa.”

Ma jirin mid kale oo aan ka ahayn Wiilka Ilaah oo kafaarogud inoo noqon karay; waayo, kii keliya ee ku jiray laabtii Aabaha ayaa sheegi karay. Kii keliya ee garanayey waxa dhabta ee uu jacaylka Ilaah yahay ayaa muujin karay Wax ka hooseeyay qurbaankii aan la qiyaasi Karin ee uu Masiixu u sameeyay dembigii Aadanaha awgood oo dunida luntay u soo bandhigi karay jacaylka Ilaah ma jirin.

“Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay.” Uma uusan bixin oo keliya inuu dadka ku dhex noolaado, laakiin wuxuu kaloo u yimid inuu dembiyada dadka qaado, oo qurbaan ahaan u noqda. Ilaah wuxuu Wiilkiisa u bixiyey inuu dunida dembaabtay kafaarogud u noqda. Masiixu waxay ahayd inuu isla aqoonsado danaha gaar ahaanayd ee Aadanaha. Kii Ilaah midka la ahaa wuxuu xidhiidh kula yeeshay dadka ku aan weligiis jebin doonin. Ciise, “Kama xishoonaya inuu iyaga ugu yeedho walaalladiis” (Cib 2:11); Waa qurbaankeenna, iyo dhexdhexaadiyaheenna, iyo walaalkeen, isagoo qaatay sawirkeenna Aadanaha xagga Aabaha, weligiisna wuu ahaanayaa sidaas kuwa uu furtay awgood. Wuxuu waxaas oo dhan u sameeyay in uu dadka ka qaado dhibaatada iyo dullinimada uu dembigu keenay, oo ay u arkaan jacaylka Ilaah oo dadka kale ula qeybsadaan farxadda ka timaada quduusnimada.

Qiimihii loo bixiyey madaxfurashadeenna awgeed, iyo sidii Aabaha u huray Wiilkiisii inuu u dhinto dembiyadeenna, waa inay qiimo dheeraad ah iyo fikir wanaagsan inaga siiyaan waxa aan Masi-
[9] ixa ka malaysanayno. Markii loo waxyooday Rasuul oo uu arkay dherarka iyo hoosudheeridda iyo ballaadhka jacaylka Aabaha uu u qaba dadka, waxaa ka buuxsantay ammaan iyo sharaf xagga Ilaah

ah; isagoo garan waayey luuqad uu ku tilmaamo jacaylkan baaxadda weyn leh, wuxuu aduunyada ugu yeedhay inay dhawrto.

"Bal ogaada siduu yahay jacaylka Aabuhu ina siiyey, taasoo ah in laynoogu yeedho carruurta Ilaah." 1 Yooxanaa 3:1.

Qiimo intee la'eg ayay tan Aadanaha u yeelaysaa? Markay dembaabeen Aadanaha waxay noqdeen carruurta shaydaanka. Xagga rumaysadka qurbaankii uu Masiixu u sameeyay Wiilasha Aadanaha waxay noqon karaan carruurta Ilaah. Masiixu markuu qaatay suuradda Aadanaha wuxuu sare u qaaday sharafta Aadanaha. Dadkii dembaabay waxay gaadhayaan meel haddii ay Masiixa ku xidhiidhsanaadaan ay hubaal noqon karaan kuwa mudan in loogu yeedho magaca ah "Wiilasha Ilaah."

Jacaylkaas wax lala barbardhigi karo ma jiro. Carruurta boqorka janada! Ballanqaadka qaaliga ah! Waxay ku soo bandhigayaan cibaado aan la qiyaasi Karin! Iyo jacaylka Ilaah xagga aduunyada aan isaga jeclaan! Fikirkaas wuxuu xakameynayaa nafta, qalbigana wuxuu ka dhigayaa mid u hogaansan doonista Ilaah. Markaan Ilaah sii fahmayno sida uu yahay innagoo ku eegayno xagga isku-talaabta, waaye intaan sii arkayno naxariis, dabacsanaan, iyo dembidhaaf ku dhex laban isla mid ahaansho iyo cadaalad, goortaas ayaan si cad u sii garanaynaa jacaylka aan la qiyaasi Karin iyo naxariis badan oo ka sii badan tan ay hooyadu u qabto carruurteeda.

## [10] 2—Dembiiluhu siduu ugu baahanyahay Masiixa

Aadanuhu waxaa markii hore loogu talagalay inuu ahaado mid xoog iyo caqli badan leh. Wuxuuna ahaa mid ku dhamaystiran sida uu ahaa oo Ilaahna adeecayey. Fikirradiisu waxay ahaayeen kuwa daahirsan, ujeedooyinkiisana waxay ahaayeen kuwa quduus ah. Laakiin markuu dembaabay xooggiisii waa laga qaaday, oo meeshii jacaylkana waxaa soo galay isaga oo keligiis is jeclaaday. Dabiiciyaddiisii way daciifday markuu xadgudubka sameeyay, ilaa uu gadhay heer ay u suurta geli weyday inuu xooggiisa iyo awoodiisa xumaanta iskaga celiyo. Waxaa addoon ka dhigtay shaydaan, sidaas ayuuna weligiis addoon shaydaanka ugu ahaan lahaa hadduusan Ilaah ka soo gaadhi lahayn. Kii Aadan jirrabayey waxay ujeeddadiisu ahayd inuu kharribo qorshihii Ilaah ee abuurkii Aadan, oo dhulka ka buuxiyo belaayo iyo baaba'. Xumaantaas oo dhanna wuxuu doonayey inuu dusha ka saaro Ilaah xagga abuurkiisii Aadan.

Markuu dembi la'aanta ahaa Aadan wuxuu la lahaa xidhiidh gaar ahaanayd kan "Isaga waxaa ku wada qarsoon waxyaalaha qaaliga ah oo dhan oo ah xigmadda iyo aqoonta." Kolosay 2:3. Laakiin markuu xadgudbay ka dib, farxad kama uusan heli Karin quduusnimada, wuxuuna doonay inuu ka cararo Ilaah iyo meeshuu joogay. Xaaladdaas oo kale ayuu ku suganyahay qalbiga aan weli dib loo cusboonaysiin. Ilaah ma waafaqsano, mana ku farxo inuu Ilaah waafaqsanaado. Dembiiluhu kuma farxi karo Ilaah; wuuna ka cararayaa la joogga kuwa quduusiinta ah. Haddii janno la geliyo farxad uma lahaanayso. In dadka oo dhan loo jeclaado si aad ah, iyo goortuu arko qalbiyo badan oo Ilaah jacaylkiisa dooranaya naftiisu ma farxayso. Kuwa qabiyadooda u oggolaanaya Ruuxa Ilaah isaga fikirkiisa, garashadiisa iyo damaciisaba waxay ku ahaanayaan wax aan la garanyn. Mana la heesi karayo kuwa jannada ku heesi doona. Isagu jannadu waxay ugu muuqanaysaa meel laysku ciqaabo; wuxuuna aad u doonayaa in laga qariyo kan ah iftiinka jannada, iyo bartamaha farxaddeeda. Ilaah ma uusan doonin isaga ahaantiisa inuu kuwa sharka leh jannada ka hor joogsado; laakiin waxa iyaga jan-

nada ka hor joogsaday shuqulladooda iyo rumaysaddarradooda. Ammaanta Ilaah waxay iyaga ku noqonaysaa dab wax gubaya. Waxay ku faraxsanaanayaan burbur, si ay uga qarsoonaadaan wejiga kan u dhintay inuu iyaga furto. [11]

Innaga qudheenna suurta gal inooma aha inaan xooggeenna iyo awoodeenna kaga baxsanno dembiga aan hoosta ugu dhacnay. Qalbiyadeenna waa kuwa shar leh, mana karno inaan beddelno. "Bal yaa wax wasakh ah wax nadiif ah ka soo bixin kara? Xataa mid qudha oo saas yeeli karaa ma jiro." "Maxaa yeelay, jidhka ka fikiriddiisu waa la col Ilaah, waayo, ma hoos gasho sharciga Ilaah, mana hoos geli karto." Ayuub 14:4; Rooma 8:7. Wax barasho, dhaqan, iyo doonista caqliga iyo damiirka, wax tarka dadka, dhammaan waxaa weeye wax dadka u wanaagsan, laakiin halkan wax awood ah kuma laha. Waxaa laga yaabaa inay xagga sare dadka dhaqan ahaan toosiyaan, laakiin qalbiga ma beddeli karaan; mana karaan inay nadiifiyaan durdurka nolosha. Waa inuu jiro xoog ka shaqeynayo gudaha qofka, iyo nolol cusub oo ka timaada xagga sare, intaanay dadku beddelmin xagga dembiga oo u beddelmin xagga quduusnimada. Xooggaas waa Masiixa. Nimcadiisa keliya ayaa nafta dadka u dedejin kartaa inay noqdaan kuwa Ilaah jecel, iyo quduusnimo.

Badbaadiyuhu wuxuu yidhi, "Haddaannu qofka xagga sare ka dhalan," haddaannu qofku helin qalbi cusub, iyo ujeedooyin cusub, iyo jacayl cusub, iyo fikir cusub, oo kuwada hogaaminayaan nolol cusub, "Boqortooyadii Ilaah arki kari maayo." 3:3. fikirka ah in la horumariyo dhinaca wanaagsan ee qofka keliya, waa khiyaano meel aan jirin. "Ninka nafta raacaa ma aqbalo waxyaalaha Ruuxa Ilaah, waayo, nacasnimo bay u yihiin, mana garan karo, maxaa yeelay, ruuxa ayaa lagu imtixaamaa." "Ha la yaabin haddaan ku leeyahay, waa inaad mar kale dhalataan." 1 Korintos 2:14; 3:7. Masiixa waxaa laga qoray, "Isagu waxaa ku jirtay nolol, noloshuna waxay ahayd nuurka dadka." "Ma jiro magac kale samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyey oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno." 1:4; Falimaha Rasuullada 4:12.

Kama dhergeyno inaan eegno jacaylka naxariista leh ee Ilaah, iyo soo dhoweynta dabacsanaantiisa iyo dabeecaddiisa. Lagama dhergayo inaan fahanno xigmadda iyo cadaaladda sharcigiisa, oo aan ogaanno in sharciyadaas lagu dhisay qaynuunka ah jacayl. Bawlos Rasuulkii wuu wada ogaa waxyaabahan markuu yidhi, "De

[12] markaas waxaan gartay in sharcigu wanaagsanyahay.” “Haddabase sharcigu waa quduus, amarkuna waa quduus, waana xaq, wuuna wanaagsanyahay.” Laakiin mar uu naftiisa qadhaadhkeeda iyo dembigeeda uu ka hadlayey wuxuu raaciyey, “Laakiin anigu waxaan ahay mid jidhka raaca oo lagu iibiyey dembiga hoostiisa.” Rooma 7:16, 12, 14. Wuxuu aad u doondooni jiray daahirsanaanta, iyo xaqnimada, oo isaga ahaantiisa u gaadhi kari waayey, markaasuu ku qayliyey, “Nin belaysan baan ahay. Yaa iga furan doona jidhkan dhimashada leh?” Rooma 7:24. Taas oo kale ayay oohintii ka soo bixi jirtay xagga qalbiyada culayska saarnaa meel kastaa iyo waqti kastaaba. Dhamaantood waxaa u ahaatay hal jawaab, “Bal eega, Wanka Ilaah ee dembiga dunida qaadaya.” Yooxanaa 1:29.

Kuwa badan ayaa ka mid ah kuwa uu ruuxa Ilaah runtan u soo bandhigay, oo uu u caddeeyay nafaha doonaya inay ka xoroobaan culaabta dembiga. Markuu Yacquub u gafay walaakiis Ceesow, oo uu ka cararay reerkii aabihiis, waxaa isaga culaab ku noqotay xukunka dembigii uu geystay. Isagoo noqday mid cidloobay oo la buriyey, oo ka fogaaday waxyaabihii ay naftiisa jeclayd oo dhan, wixii ugu weynaa ee naftiisa culayska weyn ku ahaa, waxay ahayd in dembigiisu ka fogeeyay Ilaah, oo dayro ka noqday jannada. Isagoo aad u naxsan ayuu dhulka cidlada ahaa seexday, hareerahiisana waxaa ahaa oo keliya kuro, korkiisana wuxuu arkay oo keliya cirka iyo nuurka xiddigaha. Intuu jiifay ayuu arkay iftiin weyn; markaasuu wuxuu arkay meeshii uu jiifay jaranjar ka baxayso oo gaadhaysa albaabada samada, jaran jarooyinkaasna waxaa hor iyo gadaal ugu socday malaa’igaha Ilaah; xagga amaanta sarena wuxuu maqlay codka Rabbiga oo kula hadlaya isaga qalbiqaboojis iyo rajo. Waxaa waxaas oo dhan Yacquub loogu sameeyay, Ilaah wuxuu arkay siday qalbigiisa iyo naftiisa u doondoonayeen badbaadiye. Farxad ayuu wuxuu ku arkay jidka isagoo dembiile ahaa uu Ilaah ugu noqon karo si uu xidhiidh ula yeesho. Riyadiisa jaranjarradii uu ku arkay waxay matalaysay sida Ciise u yahay dhexdhexaadiyaha keliya ee Ilaah iyo Aadanaha. Muuqaalkaas oo kale ayuu kii uu Ciise isku muujiyey markuu la hadlayey Nataana’eel, oo ahayd goortuu yidhi, “Waxaad arki doontaan samadoo furan iyo malaa’igaha Ilaah oo kor u kacaya oo ku soo degaya Wiilka Aadanaha.” Yooxanaa 1:51. Markuu Aadanuhu ka riddoobeen Ilaah, waxay noqdeen sida kuwa aan Ilaah garan Karin; dhulkana samada waa laga gooyay. Mudnaan-

tiisa awgeed Masiixu wuxuu buundo ka dhisay gacankii uu demigu keenay, si malaa'igaha ay xidhiidh ula yeelan karaan Aadanaha. Masiixu wuxuu dadka dembaabay, oo daciifsan, oo gargaarka u baahan isha xoogga weyn laga heli karayo. [13]

Haddii ay dadka diidaan isha keliya ee rajada iyo gargaarka dembiileyaasha, riyooyinkooda horumar raadinta ah iyo dadaalkooda ay ugu jiraan inay Aadanaha ku horumariyaan wuxuu noqonayaa hal bacaad lagu lisay. "Hadiyad kasta oo wanaagsan iyo hadiyad kasta oo kaamilan" (Yacquub 1:17) waxay ka ahaadaan xagga Ilaah. Ma jiro dhaqan wanaagsan oo dhamaystiran isaga la'aantiis. Jidka keliya ee Ilaah lagu gaadhi karano waa Masiixa. Wuxuuna yidhi, "Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabaha uma yimaado xaggayguu ku yimaado maahee." Yooxanaa 14:6.

Qalbiga Ilaah wuxuu carruurtiisa dhulka ku doonayaa jacayl ka weyn dhimashada. Markuu Wiilkiisa ina siiyey wuxuu jannada oo dhammu inagu siiyey hal hadiyad ahaan. Noloshii badbaadiyaha iyo dhimashadiisii iyo dhexdhexaadiyenimadiisii, malaa'igihii shulkoodii, calaacalkii ruuxa, aabaha oo kor iyo hoos iyo xaggooda oo dhan kawada shaqeyanayey, xisiihii aan dhamaanayn ee kuwii samooyinka ku noolaa, waxaa dhamaan loo wada diyaariyey furashada Aadanaha.

Hadaaba aan mahad iyo ammaan ka dhiibno qurbaankii la yaabka lahaa ee laynoo sameeyay! Aan mahadnaq ka dhiibno hawsha iyo xoogga ay samada gelisay inay ku soo celiso kuwa lumay, oo ay ugu soo celiso guriga aabaha. Fikirrada oo la xoojiya, iyo wakiillada oo awooda badan loo yeela, weligood lama hawl gelin Karin; abaalgudka kuwa wanaagga fala, raaxada jannada, bulshada malaa'igaha, wada jirka Ilaah iyo jacaylka Wiilkiisa, iyo sare u qaadidda xooggeenna ee weligiis ahaanayo kuwan miyaanay ahayn kuwa innagu dhiirragelinaya inaan qalbiyadeenna ugu adeegno Abuuraheenna iyo Badbaadiyaheenna?

Dhinaca kalena, xukunka ayaa lagu dul yidhi dembiyadeenna, abaal marin aan laga baxsan Karin, iyo dhaqammadeenna oo la hooseysiin doona, iyo burburka ugu dambeeya ayaa waxaa lagu wada caddeeyay ereyada Ilaah, si ay inooga digaan inaan u adeegno shaydaanka.

Miyaanay ahayn inaan aqoonsanno naxariista Ilaah? Maxaa intaas ka badan oo inuu samayn lahaa? Aan xidhiidh toosan la

[14] lahaanno kii innagu jeclaaday jacaylkiisa aan la qiyaasi Karin. Aan diyaar u ahaanno inaan gudddoonno waxyaabaha uu diyaarka inoola yahay si aan muuqaalkiisa u lahaanno, oo aan xidhiidh ula yeelanno malaa'igaha isaga u adeega, oo aan ula heshiinno oo ula wadaagno wadajoog Ilaaha Aabaha ah iyo Wiilkiisa.

## 3—Toobadkeenid [15]

Sidee buu qofku Ilaah hortiisa xaq ugu noqon karaa? Sidee baa dembiilaha xaq looga dhigi karaa waa xagga Masiixa keliya sida aan Ilaah ula heshiin karno, innagoo ah kuwa quduusiin ah; laakiin sidee baan Ma-siixa ugu iman karnaa? Kuwa badan waxay is weydiinayaan su'aashii ay dadkii badnaa is weydiinayeen maalintii Bentekoste, markay dembiyadooda aqoonsadeen, waxay ku qayliyeen, "Maxaan sameynaa?" Butros jawaabtiisii koowaadna waxay ahayd, "Toobadkeena." Falimaha Rasuullada 2:37, 38. Mudo gaaban kadibna wuxuu iyaga ku yidhi, "Haddaba toobadkeena oo soo noqda, si dembiyadiinna loo tirtiro." Falimaha Rasuullada 3:19.

Toobadkeenidda waxay ka koobantahay in dembiyada laga qoomameeya oo isla markaana laga soo laabto. Waa inaan dembiga ka soo laaban inaan dembi ahaantiisa aragno maahee; inaan qalbiga ka soo noqonna maahee, nolosha ma beddelmi karto.

Kuwa badan oo waxaa jiraan aan fahmi Karin toobadkeenidda saxda ah. Makhluuqyo badan ayaa murugoodaan oo xataa dhaqan ahaan beddelmaan sababtoo ah waxay ka cabsanayaan in xumaatooyinkooda u keenaan dhibaatooyin iyo silic. Laakiin tan toobadkeenidda oo Kitaabka Quduuska ah ka hadlay. Waxay ka cabsadaan dhibaatooyinka ka imanaya dembiyadooda laakiin kama qoomameeyaan oo kama cabsadaan dembiyadooda. Sidaas oo kale waxaa sameeyay Ceesow, markuu ogaaday in xuquuqdii dhalasha isaga dhaafeen. Balcaam markuu arkay malaa'igtii waranka hortiisa la taagneyd wuu gariiray ma ahayn dembiyadiisa awgood, laakiin wuxuu ka cabsaday in ay Malaa'igtu disho oo noloshiisa waayo; laakiin labadooduba si dhab ah ugama ayan toobadkeenin dembiyadooda, si ujeedo lehna uma ayan soo noqon, xumaantana ma ayan nicin. Yuudas Iskaariyod markuu Rabbigiisi gacangeliyey ka dib, ayuu yidhi, "Waan dembaabay markaan gacangeliyey dhiig eed la.'" Matayos 27:4.

Qirashadaas waxaa ku qasabtay naftiisa iyo isagoo ka cabsanayey eed iyo inuu xukun ku yimaado. Natiijooyinkii ka imanayey [16]

falimahiisa ayaa argagax ku furay isaga, laakiin qudhiisa ma jirin qoomameen dhab ah ee dembigiisa, oo ahaa inuu gacangeliyey Wiilkii Ilaah ee aan iinta lahayn, oo uu beeniyey kii Quduuska ahaa ee Reer binu-israa'iil. Fircoon markay ciqaabtii Ilaah isaga u timid ayuu aqoonsaday dembiyadiisa isagoo ka cabsanayey inay ciqaab kale ku timaado, laakiin markuu belaayooyinkii laga qaaday wuxuu dib ugu noqday dembiyaadiisi. Kuwan aan soo sheegnay oo dhan waxay ka qoomameeyeen wixii ku yimid dembiyadii ay faleen laakiin kama ayan qoomamayn dembiyadooda qudhooda.

Laakiin marka qalbiga loo dhiibo Ruuxa Ilaah, damiirka wuu jilcayaa, qofka dembiilaha ahna wuxuu kala garanayaa sida uu dembigiisa u xun yahay iyo sharciga Ilaah ee Quduuska ah, iyo aasaaska dowladda Ilaah ee samada iyo dhulka. Kan ahaa, "Nuurka runta ah oo iftiimaya nin walba oo dunida yimaada." Wuxuu furayaa meelaha qarsoon ee nafta, waxyaabihii gudcurka ku qarsoonaana waa la muujinayaa. Yooxanaa 1:9. Aqoonsi xagga dembiga la aqoonsanaya ayaa qalbiga iyo maanka oo dhan degayaa. Dembiiluhu wuxuu dareemayaa xaqnimada Ilaah markaasuu ka cabsanayaa inuu hor tago Ilaah isagoo ah dembiile oo ah mid aan daahirsanayn. Wuxuu arkayaa jacaylka Ilaah, quruxda quduusnimada, farxadda daahirsanaanta; wuxuu aad u doondoonayaa in la daahiriyo oo dib loogu soo celiyo jannadi ay Aadan iyo Xaawo hore u joogi jireen.

Baryadii Daa'uud markuu dembaabay ka dib waxay ina tusaysaa ka toobadkeenidda dhabta ee dembiga. Toobadkeeniddiisu waxay ahayd mid qota dheer oo daacad ah. Ma uusan samayn wax dadaal ah oo uu kaga baxsanayo dembiilenimadiisa; mana jeclayn inuu ka cararo ciqaabta uu Ilaah ugu goodiyey kuwa sharka leh, baryadiisa oo dhan ahayd mid daacad ah. Daa'uud wuxuu arkay sida ay qaab daranyihiin xadgudubyadiisa; wuxuuna arkay naftiisu siday u qudhuntay; dembigiisiina aad ayuu uga xumaaday. Uma uusan baryootamin oo keliya in dembiyadiisa laga cafiyo, laakiin xataa wuxuu Ilaah ka baryay in qalbigiisa la daahiriyo. Wuxuu aad u doondoonay farxadda ka timaada quduusnimada, iyo in uu Ilaah mar labaad la lahaado xidhiidh. Naftiisu waxay ku hadashay sidatan:

[17] "Waxaa barakaysan kii xadgudubkiisa la cafiyey,
oo dembigiisa loo daboolay.

Waxaa barakaysan Ninkii aanu Rabbiga denbi ku tirin,
oo ruuxiisa aanay khiyaano ku jirin."
Sabuurradii 32:1, 2.

"Ilaahow, iigu naxariiso sida raxmaddaadu tahay,
oo xadgudubyadaydana igaga tirtir sida naxariistaada badnaanteedu tahay
Waayo, anigu waan ogahay xadgudubyadayda,
oo dembigayduna hortayduu yaallaa had iyo goorba
Haddab geed husoob ah igu daahiri, oo anna nadiif baan ahaan doonaa:
I maydh, oo anna baraf cad waan ka sii caddaan doonaa
Ilaahow, igu dhex abuur qalbi nadiif ah,
Oo igu dhex cusboonaysii ruux qumman.
Hortaada ha iga xoorin, oo Ruuxaaga quduuska ah ha iga qaadin.

Farxaddii badbaadadaada ii soo celi,
Oo ruux raalli ah igu tiri
Ilaahow, Ilaaha badbaadadaydow,
dhiiggelidda iga samatabbixi:
markaasaa carrabkaygu wuxuu aad uga gabyi doonaa xaqnimadaada."
Sabuurradii 51:1-14.

Toobadkeennida noocan ah, kuma heli karno xooggenna oo keliya; waxaa keliya oo laga heli karaa xagga Masiixa, kaas oo samada aaday dadkana hadiyado siiyey.

Halkan waxaa ah qodob ay kuwa badan ku khaldoomaan, markaasay waayaan gargaarka uu Masiixa diyaarka ula yahay iyaga. Waxay u malaynayaan inayan Masiixa u iman Karin inay marka hore toobadkeenaan maahee, oo toobadkeenidda ay iyaga u diyaarinayso cafinta dembiyadooda. Waa run in toobadkeeniddu ay ka horreynaysa cafinta dembiyada; waayo qalbiga ogaada qudhunka ka buuxa oo keliya ayaa u baahnaanayaa Badbaadiye. Laakiin ma in dembiiluhu u sugaa intuu ka toobadkeenayo, intaanu Masiixa u iman ka hor? Toobadkeeniddu ma inay ahaataa wax dhex taagan dembiilaha iyo Badbaadiyaha?

Kitaabka Quduuska ah ma barayo in dembiiluhu marka hore
[18] toobadkeena, intaanu oggolaan u yedhidda Masiixa ka hor, "Ii kaalaya kulligiin kuwiinna hawshaysan oo culaabaysanow, oo anigu waan idin nasin doonaa." Matayos 11:27. Waa wanaagga ka imanaya xagga Masiixa, kan inoo hogaaminaya inaan toobadkeenna. Butros wuu caddeeyay taas markuu la hadlayey Reer Binu-Israa'iil oo uu yidhi, "Ilaah baa isaga gacantiisa midigeed sare ugu qaaday inuu ahaado Amiir iyo Badbaadiye si uu Israa'iil toobad iyo dembidhaaf u siiyo." Fal 5:31. Ma toobadkeeni karno in Ruuxa Masiixa qalbiyadeenna ku abuuro marka horeba inayan badbaado jirin Masiixa la'aantiis maahee.

Masiixa ayaa ah isha wax walba oo wanaag oo aan samayno. Waa isaga kan keliya oo qalbiyadeenna ku abuuro karayo inaan dembiga cadow la noqonno. Jacayl kastaa oo aan jeclaanno runta iyo daahirsanaanta, iyo dareen kasta oo aan dareenno dembiilenimadeenna, waxay caddeynayaan in Ruuxa Masiixa uu qalbiyadeenna ku dhex jiro oo daqaajinayo qalbiyadeenna.

Ciise wuxuu yidhi, "Aniguna haddii kor layga qaado dhulka, dhammaan xaggaygaan u soo jiidi doonaa." Yooxanaa 12:32. Waa in marka hore dembiiluhu u muuqdo Masiixa oo u dhimmanayo Badbaadiyaha dembiyada aduunka; markaan eegno Wankii Ilaah oo saaran isku-talaabtii dhakada, waxyaabihii innaga qarsoonaa eek u saabsanaa qorshihii badbaadada ayaa qalbiyadeenna u furmayaan markaasaa wanaagga Ilaah wuxuu inagu hogaaminayaa toobadkeenid. Markuu Masiixu u dhintay dembiileyaasha, wuxuu muujiyey jacayl aan la qiyaasi Karin; goortuu dembiiluhu arko jacaylkaas qalbigiisa ayaa jilcayaa, maankiisana wuu ammakaagayaa, naftiisuna way dhaqaaqeysaa.

Waxaa dhab ah in dadka mararka qaar ay ka xishoodaan wadooyinka dembiga leh oo ay ku socdaan, oo ay ka tagaan dembiyada ay ku jiraan qaarkood, iyagoo aan dareensanayn in Masiixa iyaga soo dumayo. Laakiin mar kasta oo ay dadka sameeyaan dadaal ah inay xumaantooda wanaag ku beddelaan, waa Awooda Masiixa tan iyaga soo dumaysa. Saameyn ayan iyaga garanyn ayaa qalbiyadooda dhaqaajinaysaa, damiirkoodana wax buu dareemayaa, noloshoodana dhaqan ahaan ayay u beddelmaysaa. Masiixu markuu iyaga ku soo dhoweeya inay eegaan isku-talaabtiisa, oo ay eegaan kii dembiyadooda awgood loo wareemay, sharka noloshooda, iyo dem-

biga naftooda ka buuxa ayaa iyaga u muuqanayaa. Waxay wax ka ogaanayaan xaqnimada Masiixa, markaasay odhanayaan, "Muxuu [19] yahay dembiga oo mutaystay in qurbaan loo sameeya, si loo furto kan dembiga leh? Jacaylkan oo dhammu, dhibaatadan dhamaanteed, is-hooseeysiintan oo dhan ma wax loo sameeyay baa inaanan lumin laakiinse aan lahaanno nolosha weligeed ah?"

Qofka dembiga leh, wuu diidi karaa jacaylkan, wuuna diidi karaa inuu Masiixa u dhowaado; laakiin hadduusan diidin wuxuu u dhowaanayaa Ciise; aqoon xagga qorshihii badbaadada ayaa wuxuu ku hogaaminayaa inuu u dhowaado isku-talaabta Masiixa oo uu dembiyadiisa ka toobadkeena, dembiyadaas oo ku kallifay Wiilka Ilaah inuu dhibtooda. Maanka ka shaqeynaya waxyaabaha Rabbiga ee dabiiciyadda ah ayaa wuxuu la hadlayaa isagoo ku abuuraya inay u dhowaadaan wax ayan fahansanayn oo ayan garanayn. Waxyaabaha dunida ma qancin karayaan naftooda. Ruuxa Ilaah ayaa wuxuu iyaga weydiisanayaa oo ka codsanayaa inay doondoonaan waxyaabaha xaggooda ay ka heli karayaan nabad iyo nasasho, iyo nimcada Ilaah, iyo farxadda quduusnimada. Siyaabo iyo waxyaabo aanan garanayn iyo kuwa aan arkayna ayuu Badbaadiyuhu uga dhex shaqeynayaa qalbiyada dadka inay kaga soo noqdaan waxyaabaha dunida ee dembiga leh, oo u soo laabtaan barakada ay isaga ku lahaan karaan. Nafaha dhammaan doonaya inay ka cabbaan waxyaabaha dunidan waxaa lagu odhanayaa, "Oo kii harraadsanuna ha yimaado. Oo kii doonayaaba biyaha nolosha hadiyad ahaan ha u qaato." Muujintii 22:17. Kaaga qalbigiisu doonayow wax ka wanaagsan waxyaabaha dunidan ay bixin karayso, aqoonsa oo garo in taasu ka imanayso codka Ilaah ee noloshaada la hadlayo. Isaga weydiiso inuu ku siiyo toobadkeenid, oo kuu muujiyo jacalka Masiixa ee aan la qiyaasi karayn, isagoo ku jira daahirsanaanta kaamilan. Nolosha Masiixa qaynuunnada sharciga Ilaah, ee ah jacaylka Ilaah iyo Aadanaha, si cad ayay uga muuqdeen. Deeqsinimo, iyo jacayl aan keligiisa wax isla doonayn ayay noloshiisa ku dhisnayd. Waa markaan isaga eegno, oo nuurka Badbaadiyaheenna inagu soo degayo, markaan si cad u sii arkayno dembiyada qalbiyadeenna.

Waxaa laga yaabaa inaan u malayno sidii Nikodemos, in nolosheennu toosantahay, oo dhaqankeenna xagga sharciga sax yahay, oo aan u baahnayn in qalbiyadeenna Ilaah hortiisa ku hooseysiinno, sida kuwa kale ee dembiga leh: laakiin marka nuurka Masiixa

[20] nafteenna ka dhex dhalaalo, waxaan arki doonna sida aan u nahay kuwa aan nadiif ahayn; waxaan garan doonna sida aan xagga fikirka uga nahay kuwa wax kastaa iyaga isla jecel, iyo cadaawadda aan Ilaah u qabno, taas oo qudhmisay nolosheenna oo dhan. Markaas ayaan waxaan garan doonnaa in xaqnimadeennu tahay sida wasakh qudhuntay, iyo in dhiigga Masiixa keliya ayaa inaga nadiifin karaa qudhunka dembiyadeenna, oo qalbiyadeenna u cusboonaysiin karaa inaan isaga ekaantiisa lahaanno.

Hal iftiin oo ka yimaada ammaanta Ilaah, iyo dhibic ka mid ah daahirsanaanta Masiixa, oo nolosheenna soo dhex gelaysa, waxay qudhunkeenna u muujinayaan si cad, waxayna dembiyada Aadanaha keenayaan bannaan cad. Waxay bannaanka soo dhigayaan waxyaabaha aan jecelnahay ee aan quduuska ahayn, iyo kufrinimada qalbiga, iyo faruuraheenna sida ay qudhun u noqdeen. Sida dembiiluhu ugu xadgudbayo sharciyada Ilaah waxay imanayaan hortiisa, ruuxiisuna isagoo noqonaya mid dhibbaysan wuxuu doondoonayaa Ruuxa Ilaah. Aad ayuu isu liidayaa markuu eego daahirsanaanta iyo iin la'aanta Masiixa.

Markuu Nebi Daanyeel eegay ammaanta ku wareegsanayd Malaa'igtii isaga loo soo diray, wuxuu si dhab ah u arkay daciifnimadiisa iyo qudhunkiisa. Mar uu tilmaamayey waxyaabihii uu arkay, wuxuu yidhi, "Oo xoogna iguma hadhin, quruxdaydiina waxay u rogmatay qudhun, markaasaan xoog iska waayay." Daanyeel 10:8. Nolosha uu Ilaah taabto way nici is jacaylka ay iyada isu qabto, iyo inay iyada keligeed wax kastaa isla jeclaato, oo waxay xagga xaqnimada Masiixa ku doondooni doontaa daahirsanaata qalbiga oo mid la ah sharciga Ilaah iyo dhaqanka Masiixa. Bawlos wuxuu yidhi, "Xagga xaqnimada sharciga ku jirtaana waxaan ahaa" marka laga hadlayo xagga jidhka, "eedlaawe" (Filiboy 3:6); Laakiin sharciga marka xagga ruuxa laga eegay wuxuu isaga isu arkay mid dembiile ah. Sharciga haddii wax lagu xukumo jidh ahaan, wuxuu ahaa mid dembi iska dhawray; laakiin markuu eegay hoosudheeridda quduusnimada qaynuunnadiisa, oo uu isaga isugu muuqday siduu Ilaah u arko, wuu is-hooseysiiyey wuuna qirtay dembiyadiisa. Wuxuu yidhi, "Waa baan noolaa sharciga la'aantiis, laakiin markii amarku yimid, dembigu waa soo noolaaday, anigun waan dhintay." Rooma 7:9. Markuu eegay dhinaca Ruuxa ee sharciga, dembigu wuxuu isaga ugu muuqday sida saxda oo uu yahay, qabkiisii iyo wanaagguu

isaga isu qabayna way dhamaatay. Ilaah dembiyada oo dhan isku [21]
mid uma aha; qiyaastiisa way ku kala duwanyihiin dembiyada, iyo qiyaasta Aadanaha xataa; laakiin si kastaba ha ahaatee siday dembiyada qaar Aadanaha hortooda ugu yaryihiin, Ilaah hortiisa ma jiro dembi yar. Sida ay dadka wax u xukumaan waa mid aan buuxin oo aan dhamaystirnayn; laakiin Ilaah wuxuu wax walba ku qiyaasaa sida ay yihiin. Kan sakhraama wuxuu Ilaah sheegay in dembigiisu ka hor joogasanayo gelidda jannada; laakiin bakheelnimada, kibirka iyo damaca xun dadku iskama reebaan. Laakiin dembiyadan ayaa ah kuwa Ilaah ka cadhaysiinaya; waayo, waxay lid ku yihiin wanaagga iyo sharafta dhaqammadiisa, waxay kaloo lid ku yihiin jacaylkii Ilaah ee ah kan jannada iyo samooyika ka taliya. Ku kastaa oo si xun u dembaabo, waxaa laga yaabaa inuu dareemo dembiyadiisa iyo siduu ugu baahanyahay nimcada Masiixa; laakiin kibirku wax inuu u baahanyanhay ma dareemo, sidaas ayuuna qalbiga uga daboolayaa Masiixa iyo barakooyinka uu u yimid inuu bixiyo.

Kii cashuurqaadaha ahaa ee ku tukaday, "Ilaahow, ii naxariiso, anigoo ah dembiile" (Luukos 18:13), wuxuu isaga iska soo qaaday mid aad u shar badan, kuwa kalena waxay isaga u arkeen inuu ahaa mid shar badan lahaa; laakiin wuu dareemay wuxuu u baahnaa, isagoo la culaabaysan dembigiisa iyo xumaantiisa ayuuna Ilaah hor yimid, isagoo naxariis weydiisanayey. Qalbigiisa wuxuu u furnaa Ruuxa Ilaah inuu shaqadiisa qabsado oo ka xoreeya awooda dembiga. Kii Faarisiga ahaa oo sida kibirka iyo faanka badan u tukadayna, oo isla ahaa mid xaq ah, waxay tukashadiisii caddayn u noqotay inuu qalbigiisa ka daboolay Ruuxa Ilaah. Ka fogaanshihiisa Ilaah ayaa wuxuu ka dhigay inuusan darayn u yeelan dembigiisa, dembigaas oo lid ku ah quduusnimada Rabbiga. Wax inuu u baahanyahay ma uusan dareemin, waxbana ma uusan helin.

Haddii aad dareentid oo aad aqoonsatid dembiilenimadaada, ha sugin inaad adiga isa saxdid. Immisaa qof ayaa maleynayaan inayan wanaag badan lahayn oo ayan Masiixa u iman Karin. Ma waxaad u malaynaysaa inaad dadaalkaaga ku wanaagsanaan kartid? "Miyaa Xabashi midabkiisa beddeli karaa, shabeelse miyuu barahiisa beddeli karaa? Markaas idinka xumaanta u bartayba wanaag baad samayn kari doontaan." Yeremyaah 13:23. Gargaar waxaan ka heli karnaa oo keliya Ilaah. Waa inaanan sugin inaan wax sii
fahanno, iyo fursada sii fiican inaan sii helno, iyo quduusnimo inaan [22]

sii gaadhno. Innaga ahaanteenna waxba isuma samayn karayno. Waa inaan Masiixa ugu nimaadnaa sida aan nahay.

Laakiin waa inaanan iska dhaadhacsiin fikirka ah, in Ilaah uu iskaga cafiyi doona kuwa nimcadiisa diida. Heerka ay sharnimada dembigu gaadhsiisantahay waxaa keliya oo si cad loogu arki karaa marka lagu eego iftiinka isku-talaabta. Markay dadka ku doodaan Ilaah waa mid wanaagga ka batay oo iska cafiyi kara dembiilaha, ha eegaan dhakada. Ma jirin si kale oo suurta gelinaysay in Aadanaha ay uga baxsadaan qudhunka dembiga, iyo sabab kale oo Aadanaha ay ku badbaadi kareen, oo dadka dib ugu soo noqon kareen inay ka mid noqdaan kuwa quduuska ah, oo aan ka ahayn qurbaankii uu Ciise isku-talaabta dusheeda ku sameeyay, sababahaas awgood ayay ahaayeen sababihii Masiixu u qaatay dembiyadii kuwa xadgudbay oo uu u silcay beddelkoodii. Jacaylkii Silicii, iyo dhimashadii Masiixa ee Wiilka Ilaah waxay ka wada markhaatifurayaan sida uu dembigu u xun yahay waxayna inoo sheegayaan inayan jirin si kale oo awoodiisa looga fakan karo, oo ayan jirin rajo xagga nolosha samada ah, aan ka ahayn in nafta loo hogaamiyo Masiix.

Kuwa aan doonayn inay dembiyadooda aqoonsadaan waxay yidhaahdaan markay doonayaan inay dembiyadooda daboolaan, “Waxaan u wanaagsanahay sida ay Masiixiyiintaas u wanaagsanyihiin. Ma ihi kuwa iyaga ka liita, is-hooseysiin ahaan, mana ihi kuwa iyaga ka dhaqan xun, waxay jecelyihiin inay baashaalaan sidayda oo kale.” Waxay khaladaadka kuwa kale ka dhigtaan gabbasho iyagoo og inay sameyn waayeen waxyaabihii uu Ilaah ka doonayey iyaga. Laakiin qof kale dembigiisu uma ahaan karo wax uu ku kale dembiyadiisa kaga fakado, waayo Ilaah inaan kuwa kale dembiyadooda ku dayanno inagama uusan dhigin. Ilaah wuxuu tusaale ahaan inoo siiyey Wiilkiisa iin la’aanta ah, kuwa ka dooda oo ka xumaada dembiyada kuwa kale oo Masiixiyiinta sheeganayo ayaa ah kuwa laga doonaya inay dadka tusaale wanaagsan u noqdaan. Haddii ay garanayaan waxyaabaha Masiixiga laga doonayo, miyaanay iyaga arkayn dembigooda heerka uu gaadhsiisanyahay? Way garanayaan wanaagga, mana doonayaan inay ku dhaqmaan.

Ka digtoonaada inaad isu malaysaan kuwa wanaagsan. Ha ka tegina inaad dembiyadiinna ka fogaataan, oo aad doondoontaan daahirsanaanta qalbiga xagga Masiixa. Waa xaaladdan sida ay ku-
[23] mannaan ku lumeen. Ma doonayo inaan ku noolaado hubaal la’aanta

nolosha; laakiin waxaa jirtaa khatar ay kuwa badan dareensanayn, haddii aan ka daahno inaan isu dhiibno codka Ruuxa Quduuska ee Ilaah, oo aan dooranno dembi; waayo, daahitaankaasu waa sidaas. Dembigu si kastoo oo inoola yaryahay qiyaas ahaan, waxaan si dhab ah u dareemi doonnaa markaan wayno nolosha weligeed ah. Wixii aan ka adkaan kari weyno, wuu inaga doonaa wuxuuna inagu noqon doonaa burburkeenna.

Aadan iyo Xaawo waxay u maleeyeen maadaamoo ay tahay wax yar haddii ay cunaan midhii laga reebay, inayan cidhibdambeedeedu noqonayn siduu Ilaah u sheegay. Laakiin waxaa ay yaraysteen wuxuu ahaa xadgudub ay ku sameeyeen sharcigii Ilaah ee aan beddelmayn, wuxuuna xadgudubkoodii keenay inay dadka ay Ilaah ka go'aan dunida ku furmaan albaabbada dhimashada iyo belaayooyin aan la sheegi Karin. Sanadba sanadkuu ka dambeeyay aduunyadeennu way wada barooratay, aduunyada waxay la ooyeysaa dembigii oo dadka geystay awgood. Samada xataa waxaa laga dareemay siduu Aadan Ilaah ugu caasiyey. Dhakada waxay weligeed u taagnaanaysaa inay xusuus u ahaato qurbaankii weynaa ee loo sameeyay in lagu kafaaroguda sharcigii lagu xadgudbay. Waa inaan dem-biga ka soo qaadin mid aan waxba ahayn oo yar.

Xadgudub kastaa oo la sameeyo, iyo diidmo kastaa oo la diido nimcada Masiixa, waxay innagu soo noqonaysaa isla innaga; waxay sii adkaysaa qalbiga, doonistana way sii daciifisaa, fahankeennana way dabooshaa, ugu dambeyntana waxay innaga dhigaan inaan kari wayno inaan Ilaah isu dhiibno iyo Ruuxa Quduuska ah.

Kuwa badan ayaa aamusinayaan damiirkooda dhibbaysan iyagoo maleynaya inay beddelmi karaan markay iyaga doonayaan oo doortaan; waxay u maleeyaan inay ku jeesjeesi karaan naxariista Ilaah, oo ay arki doonaan wax ay la sii yaabaan. Waxay u maleeyaan ka dib markay yaray-steen ruuxa Ilaah, oo ay la safteen shaydaan, markay dhibaato weyn ku timaado inay beddelmi doonaan. Laakiin beddelkaas wax si fudud lagu samayn karo ma aha. Waxay dadka aad u qiimeeyaan wax barashada, waayaaragnimada, nolosha, kuwa badanna maba doonaan inay helaan muuqaalka Masiixa.

Hal dhaqan oo xumaan ah, iyo hal damac oo xumaan ah, oo mudo badan la sameeyo, waxay marka dambe inaga digtaa inaan daciifsanno awooda injiilka. Dembi kasta wuxuu naftaa ka dhigaa [24]
inay Ilaah ka sii fogaato. Qofka ku adkaysto kufrinimadiisa, oo

diida inuu runta Rabbiga ku dhaqmo, wuxuu guran doonaa midhihii uu gacmihiisa ku beertay. Kitaabka Quduuska ah wuxuu si cabsi leh uga digay dembiga la caadaysto, mar uu Nebi Sulaymaan ka hadlayey taas wuxuu yidhi, "Kan sharka leh waxaa qabsan doontaa xumaantiisa." Maah 5:22.

Masiixa wuxuu diyaar u yahay inuu dembiyadeenna innaga xoreeya, laakiin doonista ma qasbo; haddii aan xadgudubyadeenna ku sii soconno, oo qalbiga aan u jilcinno sharka, oo aan jeclaan wayno in xor laynaga dhigo, haddii aan aqbali kari wayno nimcadiisa, maxaa intaas ka badan buu inoo samayn karaa? Waxaan innaga qudheenna isku kharribnay go'aankeenna ah inaan diidnay jacaylkiisa. "Bal eeg, hadda waa wakhtigii la aqbalay; bal eeg, hadda waa maalintii badbaadinta." "Maanta haddaad codkiisa maqashaan, Qalbiyadiinna ha adkaynina." 2 Korintos 6:2; Cibraaniyada 3:7, 8.

"Dadku waxay fiiriyaan muuqashada dusha, Rabbiguse qalbiguu fiiriyaa." Qalbiga dadka, oo ay ka buuxaan farxadda iyo murugada; gadgaddoonka qalbiga ee ah kan xumaanta oo dhan ka timaado. Samuu'eel koowaad 16:7. Ilaah wuxuu garanayaa wax kastaa oo qalbigu doonayo, iyo ujeedooyinkiisa. Isaga ula tag naftaada qudhuntay oo dhan. Sidii Daa'uud naftaada oo dhan ku tuur kan ay ishiisu wax kastaa aragto adigoo leh, "Ilaahow, I baadh, oo qalbigayga garo, I tijaabi, oo fikirradayda ogow, Oo bal fiiri inuu jid xumaan ahu igu jiro iyo in kale, oo igu hoggaami jidka weligiis ah." Sabuurradii 139: 23, 34.

Kuwa badan ayaa waxay diinta u aqbalaan caqliyan ahaan, oo wanaag badanna sameeyaan, iyagoo qalbiyadoodu aan daahir ahayn. Baryadaadu ha ahaato, "Ilaahow, igu dhex abuur qalbi nadiif ah, oo igu dhex cusboonaysii ruux qumman." Sabuurradii 51:10. Naftaada si dhab ah u baadh. Waxaad u taxaddartaa sidaad u taxaddari lahayd haddii naftaada loo iman lahaa in la dilo. Arriintan waa arriin aad ku doonaysa inaad ku xallisid adiga iyo Ilaah, taas oo weligeed ahaanayso. Haddii aad rajo uun iska lahaatid, oo Aadan dadaal kale samayn waxay kuu geyn doontaa burburkaada.

Ilaah ereygiisa u baro si tukasho leh. Ereygaas hortaada dhigaya sharciyada Ilaah iyo noloshii Masiixa, iyo qaynuunnada quduus-
[25] nimada, oo la'aantiisna "aan ninna arki doonin Ilaah." Cib 12:14. Wuxuu ina dareensiiyaa dembiyadeenna; wuxuuna si cad inoogu

muujiyaa jidka badbaadada. U dhegayso codka Ilaah ahaan oo naftaada la hadlayo.

Markaad dembiga sida uu yahay aad aragtid, oo kuu muuqato waxa dhabta oo aad tahay, ha rajo dhigin. Masiixu wuxuu u yimid inuu badbaadiyo waa dembiileyaasha. Weligeen lama aan heshiin lahayn Ilaah, hadduusan ahaan lahayn jacaylkii! Ilaah oo Masiixa ku dhex jira ayaa, "Ilaah duniduu Masiix kula heshiiyey." 2 Korintos 5:19. Wuxuu jacaylkiisa ku dhiirragelinayaa qalbiyada carruurtiisa dembiga leh. Ma jiro waalid dhulka jooga oo ugu dulqAadan karo carruurtooda khaladaadka ay galaan siduu Ilaah kuwa uu badbaadinayo u doondoona. Ma na jiro qof xadgudbay qof ugu dul qAadan karo siduu Ilaah ugu dul-qaato. Siduu Ilaah dadka ula hadlona ma jiro qof ula hadli karo. Ballamadiisa, iyo digniinahiisa oo dhan waxay inoo wada muujinayaan jacaylkiisa aan la qiyaasi Karin.

Markuu shaydaanku ku dareensiiyo inaad dembiile weyn tahay, Badbaadiyahaaga kor u eeg, oo shaydaanka u sheeg waxyaabihii uu Ma-siixu kuu sameeyay. Waxa keliya ee kuu gargaari karo waa markaad eegtid iftiinkiisa. Aqoonso dembigaaga laakiin shaydaanka waxaad u sheegtaa in "Ciise Masiix dunida u yimid inuu badbaadiyo dembiileyaasha" Oo aad ku baadbaadi kartid jacaylkiisa. 1 Timoteyos 1:15. Ciise ayaa wuxuu Siimoon weydiiyey labo nin oo ammaah lagu lahaa. Mid wuxuu sayidkiisu ku lahaa lacag yar, kii kalena waxaa lagu lahaa lacag badan; laakiin labadoodiiba wuu u cafiyey deentoodii, markaasuu Masiixu su'aal dib u weydiiyey Siimoon oo ku yidhi, kee baa Sayidkiisa si aad ah u jeclaanayaa. Siimoon wuxuu ku jawaabay, "Kan uu wax badan u dhaafay." Luukos 7:43. Waxaan ahaan jirnay dembiileyaal waaweyn, laakiin Masiixa ayaa u dhintay inuu inoo dembidhaafo. Qurbaankiisa ayaa ah kan uu Aabaha hortiisa inagu geynayo. Kuwii uu dembiyada badan oo cafiyey ayaa ahaanaya kuwa isaga aadka u jeclaanaya, waxayna joogsan doonaan carshigiisa agtiisa si ay uga mahad celiyaan oo u amaanaan jacaylkiisa iyo qurbaankiisa. Waa markaan jacaylka Ilaah buuxnaantiisa ku eegno, markaan dembiga sida uu dhab ahaanta u yahay u garanayno. Markaan eegno dherarka xadhiggii awgeen loo dhigay, oo aan wax ka fahanno qurbaankii uu Masiixa awgeen u sameeyay, qalbigeennu wuxuu la dhalaalayaa jacayl iyo dabacsanaan iyo qoomamo.

[26]

# 4—Qirasho

"Kii xadgudubyadiisa qariyaa ma liibaani doono, laakiinse kii qirta oo haddana ka tagaa, naxariis buu heli doonaa." Maahmaahyadii 28:13. Shuruudaha lagu heli karayo naxariista Ilaah waa kuwa fudud oo cadaalad ah oo macquulgal ah. Rabbiga inagama doonayo inaan samayno waxyaaba la yaab leh si dembiyadeenna uu noogu cafiyo. Laynaga dooni maayo inaan wado dheer qaadno, ama waxyaaba xanuun badan aan samayno, si nolosheenna aan ugu dhiibno Ilaaha samooyinka ama dembiyadeenna uu tirtiro; laakiin kii ka tagaa oo qirtaa dembiyadiisa ayaa naxariis heli doonaa.

Rasuul Yacquub wuxuu leeyahay, "Midkiinba midka kale dembiyadiisa ha u qirto oo ha u duceeyo si aad u bogsataan." Yacquub 5:16. Dembiyadaada Ilaah hortiisa ku qiro, kaas oo ah kan keliya ee dembiyadaada cafiyi karayo, khaladaadkiinnana isku hor qirta. Haddii aad ku khaldantay walaalkaa ama deriskaaga, waa inaad aqoonsataa khaladaadkaaga, isagu waxaa markaas korkiisa ahaatay inuu ku cafiyo. Markaas ka dib waxaa doondoontaa cafinta Rabbiga, waayo, walaalka aad ku khal-dantay Ilaah ayaa isaga leh, markaad isaga dhaawacdayna waxaad ku dembaabtay kii isaga abuuray oo ah Badbaadiyihiisa. Dembiga waxaa la hor keenayaa dhexdhexaadiyaha keliya, oo ah wadaadkeenna sare, kaas oo ah, "Mid si walba loo jirrabay sideenna oo kale, oo aan weliba dembi lahayn," kaas oo ah, "Mid ka naxa ittaaldarradeenna oo dhan," oo awood u leh inuu inaga nadiifiyo qudhunka dembi kastaa. Cibraaniyada 4:15. Kuwa aan Ilaah hortiisa isku hooseysiinin iyagoo dembiyadooda qiranayo, weli ma ayan fulin shuruudda koowaad ee oggolaanshaha. Haddii aanan arkin waxa marka horeba ay tahay inaan ka toobadkeenna, oo innagoo nafteenna hooseysiinayna oo ruuxeenna jilcinayna aan dembiyadeenna qiranin, oo xadgudubyadeenna aan ka tagin, run ahaantii dhab uma aan doondoonin dembidhaafka dembiyada; haddii aan weligeen doonina maba aan helin nabadda Ilaah. Sababta
[27] keliya ee aan u heli Karin in dembiyadeenni hore aan la cafin waa inaan qalbiyadeenna hooseysiin wayno oo aan shuruudaha ereyga

Ilaah ee xaqa ah aan fulin wayno. Ilaah ammarro cadcad ayuu ka dhiibay arriimahan. Qirashada dembiyada haddii ay tahay mid si bannaan ah loo sameeyay iyo haddii kaleba, waa in qalbiga laga dareemaa oo si xor ah loogu dhawaaqaa. Dembiilaha waa inaan lagu khasbin inuu dembiyadiisa qirto. Waana inaan loo samayn si aan taxaddar lahayn, ama la khasbo kuwa aanba garanayn xumaanta uu dembigu leeyahay. Qirashada ka yimaada nafta si buuxda wuxuu gaadhaa Ilaaha leh naxariista aan la qiyaasi Karin. Daa'uud wuxuu leeyahay, "Rabbiga waa u dhowyahay kuwa dembigooda ka caloolaysan, oo kuwa ruuxoodu qoomamaysan yahayna wuu badbaadiyaa." Sabuurradii 34:18. Qirashada dhabta waxay keliya oo leedahay hal tilmaan, wayna aqoonsataa dembiyada gaarka ah. Waxaa laga yaabaa in dembiyada qaar u baahanyihiin oo keliya in Ilaah keliya la horkeeno; waxay kaloo noqon karaan dembiyo u baahan in lagu qirto shakhsiyaadki aan dhaawacyada gaarsiinnay; ama waxay kaloo noqon karaan kuwa u baahan in dad badan hortood lagu qirto, waana in markaas dembiyada u baahan in dad badan hortood lagu qirto aan u qirannaa sida laynaga doonayo. Laakiin qirasho kastaa waa in loo sameeyo si sax ah, adigoo aqoonsanayo dembiyadii aad garanayso inay dembiile kaa dhigeen.

Maalmihii Samuu'eel reer Binu-Israa'iil waxay ka dheeraadeen Ilaah. Waxayna mutaysteen ciqaabtii ka timid xagga dembiyadoodii; sababtoo ah waxay rumaysan kari waayeen Ilaah, waxayna waayeen awoodii ahayd inay ugu taliyaan qarankoodii, wayna ku kalsoonaan waayeen in Ilaah uu iyaga difaaci karayo oo maamuuli karo. Waxay ka jeesteen Ilaaha maamula dunida oo dhan, waxayna dooneen inay isu maamulaan sida quruumaha kale oo iyaga deriska la ahaa. Intaanay nabad buuxa helin waxay sameeyeen qirashadan: "Dembiyadii oo dhan waxaan ku darsannay sharkan, markaannu boqor weydiisannay." Samuu'eel Kowaad 12:19. Isla dembigii ay ogaadeen inay galeen ayaa ahaa inay qirtaan. Mahadnaq la'aantooda ayaa naftooda cabburiyey oo Ilaah ka fageeyay.

Qirshada dembiga keligeed Ilaah ma aqbalayo in si daacad ah loo toobadkeena oo loo beddelmo maahee. Waa in nolosha go'aan ay ku gaarto inay wax beddesho; wax walba oo Ilaah ka cadhaysiinaya waa in layska fogeeyaa. Tan waxay ahaanaysaa natiijada ka qoomameenta dembiga ee saxda ah. Waxa innaga laynaga doonayo [28]
way caddahay: "Maydha, oo isnadiifiya, oo falimihiinna sharkooda,

indhahayga hortooda ka fogeeya, oo sharka aad samaysaan daaya. Inaad wax wanaagsan samaysaan barta, oo caddaalad doondoona, oo kuwa la dulmay u gargaara, agoonta gartooda u qaada, oo carmalada u muddaca." Ishacyaah 1:;16, 17. "Iyo hadduu sharrowgu rahaamaddii celiyo, uu wixii uu dhacay celiyo, oo qaynuunnada nolosha ku socdo, isagoo aan innaba xumaan samaynin, markaas hubaal wuu noolaan doonaa, mana dhiman doono." Yexesqeel 33:15. Bawlos mar uu ka hadlayey hawsha toobadkeenidda, wuxuu yihdi, "Bal ogaada, waxan aad ka calool xumaateen sida Ilaah doonayey wuxuu dhexdinna ka soo saaray dadaal, iyo iscaddayn, iyo cadho, iyo cabsi, iyo xiiso, iyo qiiro, iyo ciqaabid waaweyn. Wax walba waad isku caddeyseen inaad xaalka ku eedla'dihiin." 1 Korintos 7:11.

Markuu dembigu diloodo damiirka wax garashadeenna, kan sharka lahu ma kala garanayo xumaanta naftiisa iyo sharka uu sameeyay inta uu la'eg yahay; ilamaa uu xoogga Ruuxa Quduuska ah isku dhiibana dembiyadiisa ayuu ku indha la'aanayaa. Qirashooyinkiisa ma ahaanayaan kuwa daacad oo wanaag doonaya. Markuu dembiyadiisa aqoon doonayaba wuxuu is tusiyaa sababta uu dembigaas u sameeyay, isagoo isku odhanayaa haddii ayan sababtaas ahayn ma uusan samayn lahayn waxaas uu sameeyay. Ka dib markay Aadan iyo Xaawo ay ka cuneen geedkii laga mamnuucay, waxaa ka buuxsantay ceeb iyo cabsi. Marka hore waxa keliya oo ay ku fikirayeen waxay ahayd siday dembigaas sabab ugu heli lahaayeen oo uga baxsan lahaayeen xukunkii dhimashada. Markuu Ilaah wax ka weydiiyey dembigii ay faleen, Aadan wuxuu ku jawaabay isagoo dembigiisa dusha ka saarayey Ilaah iyo Naagtiisii Xaawo ahayd: "Naagtii aad I siisay inay ila joogto ayaa geedkii wax iga siisay." Naagtiina waxay eeddii dusha ka saartay abeesadii waxayna tihdi, "Abeesadaa I khiyaanaysay oo anna waan cunay." Billowgii 3:12, 13.

Maxaad marka horeba Abeesada u samaysay? Maxaad u keentay inay beerta dhex timaado? Su'aalahaas ayay ahaayeen waxay sabab uga dhigtay dembigeedii Naagta, iyadoo Ilaah dusha ka saartay dembigeedii. Ruuxa ah xaq iska dhigidda, waxay ka soo bilaabatay Aabaha beenta, waxayna ka wada muuqataa Wiilasha iyo gabdhihii Aadan uu dhalay. Qirashada noocaas kama timaado Ruuxa Quduuska ah,
[29] uska ah, Ilaahna ma aqbalayo. Toobad keenidda saxda ah waxay dembiilaha ka dhigaysaa inuu dusha u ritto, oo u aqoonsado isagoo

ayan wax munaafaqnimo ah ku jirin. Sidii Cashuurqadihii isagoo aan indhaha kor u qaadaynin, wuxuu ku qaylinayaa, "Ilaa-how, ii naxariiso anigoo dembiile ah," kuwa dembiyadooda u aqoonsada si dhab ahna xaq ayaa laga dhigi doonaa, waayo, Ciise dhiggiisa ayuu ku muujin doonaa naftooda toobadkeentay awgeed.

Tilmaanta uu ereyga Ilaah ka bixiyey toobadkeenidda saxda ah iyo is-hooseeysiinta waxay muujinayaan ruux qirasho leh oo aan wax sabab ah dembiyadiisa ka bixinaynin. Bawlos isaga daah iskuma uusan xidhin; wuxuu dembigiisa ka soo qaaday inuu yahay mid aad gudcur u ah, isagoo aan yaraynin dembiyadiisa. Wuxuuna leeyahay, "Weliba waxaan xabsi ku xidhay kuwo badan oo quduusiin ah, anigoo amar ka wata Wadaaddada sare, oo kolkii la dilayayba waan ku raacsanaa." Oo marar badan ayaan iyaga ku ciqaabay sunagoogyada oo dhan, oo waxaan qasbay inay caytamaan; oo intaan aad iyo aad ugu cadhooday, ayaan iyaga ku silciyey tan iyo xataa magaalooyin ajanabi." Falimaha Rasuullada 26:10, 11. Mana uusan ka hakan inuu sheego in "Ciise Masiix dunida u yimid inuu badbaadiyo dembiileyaasha; anoo ah kan ugu daran." 1 Timoteyos 1:15. Kuwa hooseeya oo qalbiyadoodu jeban yihiin, oo ay ka xoog badatay inay si dhab ah u toobadkeenaan, waxay Ilaah uga mahadcelinayaan jacaylkiisa iyo isku-talaabta; sida uu Wiilku Aabihiis ugu qirto, sidaas oo kale ayuu kan sida saxda ah dembiyadiisa Ilaah hortiisa ugu qiranayaa. Sida qoran, "Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu waa aamin iyo caaddil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan." 1 Yooxanaa 1:9.

[30]

# 5—Allabari

Ilaah ballankiisu waa, "Oo waad I doondooni doontaan, waanad I heli doontaan markaad qalbigiinna oo dhan igu doondoontaan." Yeremyaah 29:13.

Qalbiga oo dhan waa in Ilaah loo dhiibo, haddii kalese beddelka ah inaan sidiisa oo kale noqonna ma heli doonno. Dhab ahaan ayaan Ilaah ugu noqonnay kuwa isaga ka carara. Ruuxa Quduuska ahi wuxuu xaaladdeenna ku tilmaamaa sidatan : "Idinku waxaad ku dhimateen xadgudubyadiinna iyo dembiyadiinna." "Madaxa oo dhammu waa bukaa, oo qalbiga oo dhammuna waa taag daran yahay;" Madaxa iyo minjaha inta ka dhex leh innaba caafimaad ma leh." Waxaa iyagu qabsaday dabinka Ibliiska, "Iyagoo lagu qabtay si ay muraadkiisa u yeelaan." Efesos 2:1; Ishacyaah 1:5, 6; 2 Timoteyos 2:26. Ilaah wuxuu jecelyahay inuu ina bogsiiyo, oo xor inaga dhigo. Laakiin maadaamoo tan u baahantahay is beddel dhamaystiran, iyo dabiiciyaddeenna oo la cusboonaysiiyo, waa inaan isaga si buuxda isigu dhiibnaa.

Dowladda Ilaah ma aha sida shaydaanku uu doonayo inuu dadka ugu muujiyo mid aasaaskeedu yahay hogaansan indha la'aan ah, iyo xukun aan macquul gal ahayn. Waxay la hadlaysaa caqliga iyo damiirka. "Haatan kaalaya oo aynu u wada fariisannee," ereyadaas cassuumaadda mid kastaa oo abuurkiisa ka mid ah. Ishacyaah 1:18. Ilaah ma khasbo doonista abuurkiisa. Mana aqbali karo imaansho aan doonista iyo caqliga ka iman marka horeba. Khasabka oo keliya wuxuu hor joogsanayaa horumarka maanka iyo dhaqanka; dadkuna wuxuu ka dhigayaa kuwa sida mashiimaha ama rumuud kantaroolka la maamulo. Taas ma aha ujeeddada Ilaah. Wuxuu jecelyahay Aadanaha oo ah kan abuurkiisa ugu sarreeya, inay gaadhaan horumarka ugu sarreeya. Wuxuu horteenna dhigaa barakadiisa kuwaas oo uu doonayo inuu innagu soo gaadhsiiyo xagga nimcadiisa. Wuxuu inaga doonayaa inaan isaga oo keliya isa siinno, si uu doonistiisa inooga dhex shaqeeya. Waa hawl innaga inoo taalla

inaan kala dooranno inaan ka xorowno dembiga, oo aan Wiilasha Ilaah ammaanta la qaybsanayno iyo in kale.

Markaan Ilaah isa siinayno, waa inaan wax kastaa oo isaga inaga fogeynaya ka tagno. Sababtaas daraadeed ayuu Badbaadiyuhu u yidhi, "Sidaa darteed midkiin walba oo aan ka tegin wuxuu leeyahay oo dhan, xer iima noqon karo." Luukos 14:33. Wax kastaa oo qalbiyadeenna Ilaah ka dheeraynaya waa inaan ka tagnaa. Aduunyo ayay kuwa badan sanam ay caabudaan ka dhigteen. Jacaylka lacagta, iyo jacaylka hantida ayaa ah waxa iyaga shaydaanka ku haya. Sumcadda iyo sharafta adduunka ayay kuwa kalena caabudaan. Kuwa qaarna waxay sanam ka dhigtaan inay iyaga isjeclaadaan oo ayan wax masuuliyad isa saarin. Laakiin waxyaabahaas oo dhan waa inaan ka tagnaa. Ma raaci karno qeybna Rabbiga, qeybna aduunyada. Ilaah carruurtiisa ma noqon karno inaan si buuxda isaga keliya u raacno maahee. [31]

Waxaa jiraan kuwa sheeganaya inay Ilaah u adeegayaan, iyagoo aaminaya inay kartidooda sharciyada Ilaah ku dhawraan, oo ay nolol wanaagsan u lahaadaan si ay badbaado iyaga ugu sugnaato. Qalbiyadooda ma dhaqaajiyaan wax dareenka jacaylka Masiixa ah, laakiin waxay waxyaabaha Ilaah Masiixiga ka doonayo u sameeyaan inay janno helaan. Diinta noocaas ah mid wax tar leh ma aha. Markuu Masiixu ku dhex noolaado qalbiga, nafta waxaa ka buuxsamayaa jacaylkiisa, iyo farxadda ah inay isaga la lahaadaan xidhiidh, naftuna waxay ku dhigaysaa isaga oo keliya; jacyalka ay isaga u qabaan ayaan illowsiinaya inay iyaga isjeclaadaan. Jacaylka Masiixa ayuu shuqulladooda oo dhan ku salaysnaanayaan. Kuwa leh jacaylka Masiixa ma weydiistaan in wax la siiyo oo ay amarrada Ilaah ku fuliyaan; mana weydiistaan qiyaasta ugu hooseysa, laakiin waxay doondoonaan si dhamaystiran inay u helaan doonista Badbaadiyahooda. Iyagoo si aad ah u jecel ayay qalbiyadooda oo dhan iyo naftooda ugu dhiibaan kan ay doonayaan. Sheegashada Masiixa adigoo aan lahayn jacayl aad u qota dheer waa iska hadal, sheegasho qallalan, iyo culaab aan waxba tarayn.

Ma waxaad u malaynaysaa in ay tahay hawl aad u culus in adiga oo dhan aad Masiixa isku dhiibtid? Is weydi su'aasha ah, "Muxuu Masiixu u bixiyey aniga aawadey?" Wiilka Ilaah wuxuu bixiyey dhammaan, noloshiisa, iyo jacaylkiisa, iyo dhibaatoo dhan badbaadadinteenna awgeed. Miyaan markaas noqonaynaa kuweennaan

leh qalbi liita, oo aan wax qiimo ah lahayn, oo aan jacayl lahayn,
[32] inaan qalbiyadeenna isaga u dhiibno miyaan isaga ka celinnaa? Saacad walba ee nolosheenna waxaan kala qayb qAadanaynay barakada nimcadiisa, sababtaas aawgeedna ma fahmi karno dhibaatadii iyo belaayadii laynaga badbaadiyey. Ma eegi karnaa kii dembiyadeenna awgood loo wareemay, oo welina doonayey inuu inoo sameeya jacaylkiisa iyo doonistiisa qurbaanka oo dhan? Markaan eegno is-hooseysiinta aan la qiyaasi Karin ee Rabbiga ammaanta, ma inaan gunuunacnaa maadaamo aan ogaannay inaan nolosha weligeed ah ku heli karno oo keliya dhib iyo is-hooseysiin?

Kuwa badan waxay is weydiinayaan, "Maxaan uga baahanahay inaan isu-hooseysiiyo, intaanan helin hubaasha aqbalkayga xagga Ilaah ka hor?" Anugu waxaan kuu tilmaamayaa Masiixa. Wuxuu ahaa mid aan dembi lahayn, taas waxaana sii dheerayd wuxuu ahaa Amiirka samada; laakiin innaga awgeen ayuu dembi u noqday. "Waxaana lagu tiriyey kuwa xadgudbay, weliba wuxuu xambaartay kuwa badan dembigood, wuuna u duceeyay kuwa xadgudbay." Ishacyaah 53:12.

Laakiin maxaan ka tagaynaa, markaan wax walba siinno? Qalbi uu dembi qudhmiyey, inuu Ciise nadiifiyo, inuu dhiiggiisa ku maydho, oo uu ku badbaadiyo jacaylkiisa aan qiyaasta lahayn. Laakiin kuwa badan waxay u maleeyaan inay adag tahay in wax kastaa isaga awgii looga tago! Waan ka xishoonayaa inaan maqlo iyadoo laga hadlayo, waana ka xishoonayaa inaan qora.

Ilaah inagama doonayo inaan wax walbaa oo aan haysanno ka tagno haddii ay yihiin wax wanaageenna ku jiro. Wax kastoo uu isagu sameeyo, wuxuu u sameeyaa oo keliya wannaagga Carruurtiisa. Haddii ay kuwa aan Masiixa rumaysnayn dhammaantood ogaan lahaayeen inuu ula laaban yahay wax ka wanaagsan waxyaabaha ay iyaga isla doonayaan, way fiicnaan lahayd. Dadku iyaga ayaa isku sameynaya dhaawacyada iyo caddaalad darrada ugu weyn ee naftooda markay ku fikiraan wax lid ku ah doonista Ilaah. Farxad laga heli karo ma laha jidka uu mamnuucay kan garanaya wanaagga wax kastaa oo u qorsheeyay wax walba wanaagga abuurkiisa awgood. Jidka xadgudubka waa jidka belaayada iyo burburka. Waa khalad in la aamino in Ilaah uu ku farxo markuu arko Carruurtiisa oo dhibtoonayaan. Jannada oo dhan waxaa laga doonayaa farxadda Aadanaha. Aabaheenna Jannada ku jira kama xidho jidadka farxadda

abuurkiisa mid ka mid ah. Qaynuunnada Rabbiga ayaa inoo sheegayaan inaan ka fogaanno wax kasta oo dhib inoo keenayo, kuwaas [33]
oo inaga xidhaya albaabbada jannada. Badbaaiyaha Aduunyada wuxuu dadka ku aqbalaa sida ay yihiin, iyagoo wata dooniistooda oo dhan, qudhunkooda, iyo daciifnimadooda; ma doonayo oo keliya inuu dhiiggiisa dembiyada kaga nadiifiyo oo ku badbaadiyo, laakiin wuxuu xataa qancin doonaa qalbiyada wada doonayo inay harqoodkiisa qaataan, oo ay culaabtiisa u adkaystaan. Ujeeddadiisu waxaa weeye inuu nabad iyo nasiino siin doona inuu isaga u aqbalo inuu yahay kibista dhabta ah ee nolosha. Waxaa keliya oo uu innaga doonayaa inaan samayno amarradiisa kuwaas oo innagu hagayo tallaabooyinka farxadda taas oo ayan kuwa aan adeecin heli karayn. Farxadda dhabta ee nolosha waa inay hesho Masiixa oo ah rajada ammaanta.

Kuwa badan ayaa waxay is weydiinayaan “sidee baan Masiixa isugu dhiibi karaa?” haddii aad doonaysid inaad isaga isu dhiibtid, laakiin damiirkaada oo hooseeya, oo addoon u tahay shakiga, ay noloshaadu u taliyaan dhaqamada dembiga. Xalkaagu iyo ballamadaadu waa sida hal bacaad lagu lisay. Waad u talin kari la’dahay fikirradaada, dareemahaada, iyo waxyaabaha aad jeceshahay. Ballamadii iyo axdiyadii kuu rumoobi kari waayey ayaa sii daciifinayaan daacadnimadaada, markaasay waxay kaa dhigayaan inaad u malaysid in Ilaah uusan ku aqbalayn; laakiin ma aha inaad rajo dhigtid. Waxa lagaa doonayo inaad fahantid waa xoogga dhabta ah ee doonista. Taas ayaa ah awooda ka talisa jidhka Aadanaha oo dhan, waana awooda aad wax ku go’aansan kartid ama aad ku dooran kartid. Wax kastaa waxay ku xidhanyihiin falimaha doonista. Xoogga doorka Ilaah wuu siiyey dadka; iyaga ayaana laga doonayaa inay ka shaqeysiiyaan. Qalbigaaga ma beddeli kartid, qalbigaaga doonistiisana kama dhigi kartid mid doondoona waxyaabaha Ilaah uu jecelyahay; laakiin waad dooran kartaa inaad Ilaah u adeegtid. Waad siin kartaa doonistaada iyo doorkaaga; markaas ayuu isaga kaga shaqeysiinayaa inuu doonistiisa sameeyo oo wanaag falo. Markaas dabeecaddaada o dhan waxay hoos imanaysaa talada Ruuxa Quduuska ah; waxyaabaha aad jeclaanaysidna waxay ahaanyaan waxyaabaha uu isaag jecelyahay, fikirradaaduna waxay mid la noqonayaan kuwiisa.

Jacaylka waxa wanaagsan iyo xaqa waa sax haddii ay u fulayaan sidaad u jeclaatay; laakiin haddaad dhexda ku joojisid waxba ma
[34] noqonayaan. Kuwa badan ayaa lumi doonaan iyagoo weligood rajaynayaan inay Masiixiyiin noqdaan. Weligood ma gaadhaan meel ay doonistooda iyo damiirkooda Ilaah u dhiibaan. Hadda ma dooranayaan inay Masiixiyiin noqdaan.

Haddii aad si wanaagsan doonista uga shaqaysid, waxaa laga yaabaa noloshaada oo dhan inay beddelmatto. Markaad Masiixa doonistaada oo dhan u dhiibtid, waxaad la safanaysaa awooda ah tan ka sarreysa awooda kasta iyo xoog kasta. Waxaad heli doontaa xoog xagga sare ka yimid oo ku xajiyo, isu dhiibiddaada Ilaah maalin walbana waxaad karay - saa inaad ku noolaatid nolosha cusub, xataa inaad ku noolaatid nolosha rumaysadka.

## 6—Rumaysad iyo Aqbalid [35]

Markuu ruuxaagu dhex galay Ruuxa Quduuska ah, waxaad wax ka argtay wax ka mid ah xumaanta uu dembigu leeyahay, iyo xooggiis, iyo xukunkiisa, iyo belaayooyinkiisa; markaasaad waxaad billaabaysaa inaad isaga qudhiisa karaahaysatid. Waxaad dareemaysaa in dembigu Ilaah kaa foogeeyay, oo aad addoon u noqotay xoogga sharka. Intaad sii doonaysid inaad ka baxsatid, ayaa ah intaad sii ogaanaysid gargaar la'aantaada. Fikirradaadu waxay noqonayaan kuwa aan daahir ahayn; qalbigaaguna mid aan daahir ahayn. Waxaad dareemaysaa in noloshaadu ay ka buuxsantay bakheelnimo iyo dembi. Waxaad doondoonaysaa in laguu dembidhaafo, oo xor lagaa dhigo. Inaad Ilaah xidhiidh la yeelatid, oo ekaantiisa lahaatid sideed ku gaadhi kartaa?

Waxa aad u baahantahay waa nabad, xagga samada oo lagaa cafiyo, iyo nabad iyo jacayl oo naftaada ka buuxsamo. Lacag ma iibin karto jacaylkaas iyo nabaddaas, caqligana laguma gaadhi karo, xigmaddana ma keeni karto; weligaana ma rajayn doontid inaad dadaalkaaga ku gaadhtid. Laakiin Ilaah ayaa diyaar kuula ah inuu kuu siiyo hadiyad ahaan, "Lacagla'aan iyo iibla'aan ku qaata." Ishacyaah 55:1. Adiga ayaa lahaanaya haddii aad gacantaada u fidisid inaad qabsatid. Wuxuu Rabbigu leeyahay, "Inkastoo ay dembiyadiinnu guduudan yihiin, sida baraf cad oo kalay u caddaan doonaan, oo inkastoo ay cascas yihiin, sida suuf oo kalay ahaan doonaan." Ishacyaah 1:18. "Oo weliba waxaan idin siin doonaa qalbi cusub, oo ruux cusubna waan idin gelin doonaa." Yexesqeel 36:26.

Dembiyadaadi waad qiratay, qalbi ahaanna waad iskaga fogeysay. Waxaadna go'aansatay inaad si buuxda Ilaah isu siisid. Haddaba isaga u tag, oo weydiiso inuu dembiyadaada maydho oo qalbi cusub ku siiyo. Markaas waxaad aamintaa in waxyaabahaas uu u sameeyay waayo, wuu ballanqaaday. Casharkan ayuu ahaa kii uu Ciise dadka baray intuu dunida joogay, hadiyadda Ilaah inaga ballanqaaday, markaan aaminno ayaan helaynaa markaasna innaga ayaa leh. Ciise wuxuu dadka cudurradooda ka bogsiiyey markay

[36] rumaysteen xooggiisa; wuxuu ka caawiyey waxyaaba ay arki kareen, kuwaas oo uu iyaga ku dhiirrageliyey inay hubsadaan waxyaabaha ayan arkin, taas oo ku hogaamisay inay xooggiisa aaminaan inuu dembiga ka cafiyi karayo. Tan wuxuu caddeeyay markuu bogsiiyey ninkii curyaanka ahaa: "Laakiin si aad ku garataan in Wiilka Aadanahu ku leeyahay amar uu dembiyada ku cafiyo (markaasuu kii curyaanka ahaa ku yidhi), kac oo sariirtaada qaado oo gurigaaga tag." Matayos 9:6.

Sidaas oo kale ayuu Yooxanihii wacdiyaha ahaa yidhi, markuu ka hadlayey calaamooyinkii Masiixa, "Laakiin waxyaalahan waxaa loo qoray inaad rumaysataan inuu Ciise yahay Masiixa, Wiilka Ilaah, iyo inaad no-losha ku lahaatataan magaciisa idinkoo rumaysanaya." Yooxanaa 20:31.

Markaan ka eegno xagga Kitaabka Quduuska ah siduu u bogsiiyey kuwii bukay, waxaan wax ka baranaynaa sida loo rumaysto inuu xoog u leeya-hay inuu dembiyadeenna cafiyi karayo. Bal haddaba, aan eegno sheekadii ninkii curyaanka ahaa ee wartii Beytsayda lagu bogsiiyey. Kii bukay wuxuu ahaa mid aad gargaar ugu baahan; addimadiisiina ma uusan isticmaalin mudo soddon iyo siddeed sanadood ahayd. Laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, "Kac, oo sariirtaada qaado oo gurigaaga tag." Ninkii curyaanka ahaa wuxuu odhan karay, "Rabbiyow, haddii aad doonaysid I bogsii, markaas ayaan ereygaaga rumaysan doonaaye." Laakiin sidaas ma uusan u hadlin, wuxuu rumaystay ereyga Masiixa, wuxuuna aaminay in sidaas laguba bogsiiyey, wuxuuna isla markiiba yeelay sidii la yidhi yeel; wuxuu doonay inuu socda, wuuna socday. Wuxuu ku camal falay ereygii Ma-siixa, Ilaahna wuxuu siiyey xoog. Wuuna ka bogsaday curyaannimadiisii. Sidaas oo kale waxaad adiguna tahay dembiile. Kafaarogudna kama dhiibi kartid dembiyadaadii hore; qalbigaagana ma beddeli kartid oo quduus iskama dhigi kartid. Laakiin Ilaah ayuu wuxuu kaa ballanqaadayaa inuu waxyaabahaas oo dhan kuugu samayn doona Masiixa xaggiisa. Rumayso ballanqaadkaas. Dembiyadaada qiro, oo Ilaah isa sii. Go'aanso inaad isaga u adeegtid. Markaad sidaas samaysid, runtii Ilaah ereygiisana wuu fulin doonaa. Haddii aad rumaysatid ballanka, waxaad kaloo rumaysataa in dembiyadaada la cafiyey oo lagu daahiriyey, Ilaah wuxuu bixiyaa xaqiiqada; waxaa lagaa dhigayaa mid kaamilan sidii Masiixuba uu ninkii curyaanka ahaa xoog u siiyey uu ku socda,

markuu curyaankii rumaystay in la bogsiiyey. Sidaas oo kale ayay kuu ahaanaysaa haddaad rumaysatid. Ha sugin inaad aragtid in lagu [37]
kaamilayo, laakiinse waxaad tidhaahdaa, "Waan rumaystay; waana sidaas aan u rumaystay, sababtu ma aha inaan arkay, ama dareemay, laakiin waayo, Ilaah ayaa ballanqaaday.'"

Ciise wuxuu leeyahay, "Wax kasta oo aad tukasho ku baridaan, rumaysta inaad hesheen oo way idiin ahaan doontaa." Markos 11:24. Ballankan wuxuu leeyahay shardi, waana inaan doonista Ilaah ku tukanno. Laakiin waa doonista Ilaah tan inaga nadiifinayso dembiyada, oo innaga dhigayso inaan noqonno carruurta Ilaah, oo ina karansiinayso inaan ku noolaanno nolol quduus ah. Sidaas daraadeed waxaan Ilaah weydiisan karnaa barakooyinkan, oo aan rumaysanno inaan helnay, oo Ilaah uga mahadcelinno inaan helnay. Waxaan leennahay fursad aan Ciise ugu tagno oo uu inagu nadiifin karo, oo aan ku hor joogsan karno sharciga innagoo ceeb iyo iin la'aan ah. "Sidaas daraadeed, kuwa Ciise Masiix ku dhex jiraa, haataan xukun ma laha." Rooma 8:1.

Markaas laga billaabo keligiin ma ahaanaysaan; waxaa laydinku soo iibsaday qiimo weyn. "Laydinkaga soo furan waxyaalaha baaba'aya oo ah sida lacagta iyo dahabka;....laakiinse waxaa laydinku soo furtay dhiiggii qaaliga ahaa oo Masiix oo ah sidii wan yar oo aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn." 1 Butros 1:18, 19. Qaabkaas fudud ee aad Ilaah ku rumaysatay, Ruuxa Quduuska ah wuxuu qalbigaaga ku dhex abuuray nolol cusub. Waxaadna noqonaysaa Ilmo xagga Ilaah laga dhalay, oo ka mid reerka Ilaah, wuxuuna kuu jecel yahay siduu Wiilkiisa u jecel yahay. Maadaamoo markan aad Ciise aqbashay, gadaal ha u laaban, hana ka dheeraanin isaga, laakiinse waxaad maalin kastaa tidhaahdaa, "Aniga waxaan ahay kan Masiixa; Waxaana isa siiyey isaga;" oo weydiiso inuu ku siiyo Ruuxiisa iyo inuu nimcadiisa kugu dhawro. Sida aad markaad Ilaah isa siisid, oo aad rumaysatid u noqonaysaa mid ka mid ah carruurta Ilaah, sidaas oo kale ayaa lagaa doonayaa inaad isaga ku sii noolaatid. Wuxuu Rasuul Bawlos leeyahay, "Haddaba sidaad u aqbasheen Rabbi Ciise Ma siix, ku socda." Kolosay 2:6.

Kuwa qaar ayaa waxay u maleeyaan inay ku khasbanyihiin inay marka hore wanaagsanaadaan, oo Ilaah u caddeeyaan inay yihiin kuwa toosnaaday, intaanay helin barkadiisa ka hor. Laakiin run ahaantii way sheegan karaan barakada Ilaah haddaba. Waa inay

leeyihiin nimcadiisa, iyo Ruuxa Masiixa, si ay uga adkaadaan dem-
[38] biyadooda, haddii kalese iskama celin karaan sharka. Ciise wuxuu jecel yahay inaan ugu nimaadno sida aan nahay, annagoo ah, kuwa dembiileyaal ah, oo gargaar la'aan ah, oo isaga keliya ku tiirsan. Inta aan la nimaadno daciifnimadeenna, iyo doqonnimadeenna, iyo dembiilenimadeenna oo dhan, ayaa waxaan cagihiisa hostooda ku dhici karnaa innagoo xumaatooyinkeenna oo dhan ka qoomamaysan. Waa ammaantiisa tan inagu hareereen karta gacmihiisa iyo jacaylkiisa, oo dhaawacyadeenna oo dhan inaga tirtiri karto, oo inaga nadiifin karto qudhukeenna oo dhan.

Halkan ayay kumannaan badan ku turunturroodaan; ma ay rumaystaan in Ciise dembiyadooda ku cafiyi karayo sida ay yihiin shaksi ahaantooda. Ilaah ereygiisana kuma kalsoonaadaan. Waa fursadda kuwa dhammaan shuruudaha fuliyaan kuwa ogaan karo in dembidhaafku ya-hay mid loogu talagalay dembi kastaa. Iska saar shakiga ah in ballamada Ilaah aan adiga laguugu talagelin. Waxaa loogu talagalay ku kasta oo Ilaah ku xadgudbay oo doonaya inuu toobadkeena. Xoog iyo nimco ayuu Ilaah ka ballanqaaday inuu siinayo naf kasta oo rumaysata ballamadiisa iyo inay malaa'igo u adeegi doonaan.

Ma jiraan kuwa aad uga dembi badan kuwa kale oo aan xoog, iyo daahirsanaan, iyo xaqnimo ka heli karayn xagga Masiixa oo ah kii u dhintay iyaga awgood. Wuxuu diyaar u yahay inuu ka saaro dharkooda la wasakhoobay oo la qudhmay dembiga, oo uu iyaga u xidho khamiisyada xaqnimada oo cad cad; Wuxuuna iyaga u sheegayaa inay noolaadaan oo aanay dhiman.

Ilaah inooma maalulo sida ay Aadanaha isu maamulaan oo kale. Fikirradiisu waa naxariis, jacayl, iyo dabacsanaan, wuxuuna leeyahay, "Ka sharka lihi jidkiisa ha ka tago, ninka aan xaqa ahaynuna fikirradiisa, oo Rabbiga ha u soo noqdo, oo isna wuu u naxariisan doonaa, oo ha u yimaado Ilaaheenna, waayo, aad buu u saamixi doonaa." "Sidii daruur qaro weyn ayaan xadgudubyadiinnii u tirtiray, oo sidii daruur oo kale ayaan dembiyadiinniina u tirtiray." Ishacyaah 55:7; 44:22.

"Anigu kii dhinta dhimashadiisa kuma farxo, haddaba soo noqda oo noolaada." Yexeqeel 18:32. Shaydaanku wuxuu diyaar u yahay inuu xado hubaasha barakaysan ee Ilaah. Wuxuuna jecel yahay inuu rajo kasto oo iftiin ah ka qaado nafta; laakiin waa inaanad

adiga u oggolaan inuu sidaas yeela. Dheg ha u dhigin kan wax jirrabayo, laakiinse waxaad tidhaahdaa, “Ciise wuxuu u dhintay [39]
inaan noolaado. Wuu I jecel yahay doonistiisana ma aha inaan lumo. Waxaan leeyahay Aabe aad ii jecel oo samada jooga; inkastoo aan si xun u isticmaalay jacaylkiisa, barakooyinkii uu I siiyeyna gacantayda laga dhufsaday, waan kacayaa oo waxaan u tegayaa Aabahay, oo waxaan odhanayaa, ‘Waan ku dembaabay samada, iyo hortaada, mudnaan ma lihi ah in laygu yeedho wiilkaaga: waxaad iga dhigtaa mid ka mid ah shaqaalahaaga.” Masaashan ayaa kuu sheegaysaa sida kan wareersan loo aqbali doona: “Laakiin intuu weli ka fogaa ayaa aabihiis arkay, waana u naxariistay, oo ku soo orday oo qortuu iskaga duubay, oo dhunkaday.” Luukos 15:18-20.

Xataa masaalkan in kastoo ay tahay mid aad inoo taabanaysa, haddana naxariista Aabaheenna janada siday tahay uma tilmaami karto. Wuxuu Rabbigu nebi Yeremyaah kaga dhex hadlay, “Waxaan kugu jeclaaday jacayl daa’im ah, oo sidaas daraadeed raxmad baan kugu soo jiitay.” Yeremyaah 31:3. Inta uu dembiiluhu weli ka fogyahay guriga Aabaha, oo uu xooggiisa iyo maalkiisa ku luminayo dal kale, qalbiga Aabaha wuu doondoonayaa; naftu inay kacdo oo Ilaah ku soo laabato ayaana ah waxa Ruuxa Ilaah doondoonayo, isagoo dembiilaha ku soo jiidaya xagga jaca-ylka qalbiga Ilaah.

Adigoo haysta ballamadan hodanka ah ee Kitaabka Quduuska ah, miyaad shakiyi kartaa? Miyaad rumaysan kartaa in marka dembiiluhu doondoona inuu soo laabto, oo uu doonayo inuu dembiyadiisa ka tago, Rabbigu inuu cagahiisa ka celinayo inay toobadkeenaan? Ka fogaada fikirrada noocaas ah! Mana jiro wax naftaada uga daran inaad Aabahaaga jannada ka aamintid fikirrada caynkaas ah. Ilaah wuu neceb yahay dem-biga laakiin wuu jecel yahay dembiilaha, wuxuuna xagga Masiixa isku bixiyey kuwa doonaya inay badbaadaan oo ay lahaadaan barakada boqortooyada weligeed ah ee amaanta. Maxaa kale buu isticmaali lahaa ee ka badan ee ka badan sida uu hadda inoola hadlay markuu yidhi, “Mi yaa naagu ilmaheeda nuuga illoobi kartaa inayan Wiilkii uurkeeda ka soo go’ay u naxariisan? Mindhaa kuwaasu way illoobi karaan, aniguse innaba ku illoobi maayo.” Ishacyaah 49:15.

Xagga sare eeg kaaga shakisanow oo naxsanow; waayo, Ciise wuxuu u noolyahay inuu dhexdhexaadiye inoo ahaado. Ilaah uga mahad celi sida uu Wiilkiisii uu jeclaa hadiyad ahaan ugu bixiyey

[40] waxaadna ku tukataa inuusan meel cidlo ah kuugu dhiman. Ruuxa maanta ayuu kuu yeedhayaa. Qalbigaaga oo dhan Ciise ula imaaw, waadna heli kartaa barakooyinkiisa.

Markaad akhrinaysid ballamada, xusuuso inay ka yimaadeen mid jacayl iyo naxariis badan leh. Qalbiga Ilaah eel eh jacaylka aan la qiyaasi karin, wuxuu dembiilaha u soo jiidaa xagga naxariista Ilaah. "Waxaynu dhiiggiisa ku leennahay madaxfurasho ah dembidhaafkiisa." Efesos 1:7. Haa waxaa keliya ood aamintaa in uu Gargaarahaaga yahay. Wuxuu doonayaa inuu dib ugu soo celiyo ekaantiisii xagga damiirka Aadanaha. Markaad isaga ugu soo dhowaanaysid qirasho iyo toobadkeenid, wuxuu kuugu soo dhowaanayaa naxariis iyo dembidhaaf.

# 7—Tijaabada Xernimada



"Sidaas daraadeed haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen, bal eega, wax waliba way cusboonaadeene." 2 Korintos 5:17.

Qofku waxaa laga yaabaa inuu xusuusan kari waayo saacaddii iyo meeshii, ama marxaladihii kala duduwanaa ee uu maray markuu badbaadayey; laakiin taas caddayn uma aha inuusan badbaadin. Masiixa wuxuu Nikodemos ku yidhi, "Dabayshu way u dhacdaa meeshay doonto, waxaadna maqashaa xiinkeeda, laakiin ma ogid meeshay ka ti-maado iyo meeshay u kacdo; waa sidaas oo kale qof kasta oo Ruuxa ka dhasho." Yooxanaa 3:8. Sida ay dabayshu u tahay waxaan muuqan, laakiinse ay waxyaabahay geysato ay u muuqdaan oo loo arko, waa sidaas oo kale Ruuxa Ilaah markuu qalbiga ka dhex shaqeynaya. Awoodaas wax cusboonaysiinaysa, oo il Aadanana aysan arki karin, ayaa waxay qalbiga ku dhex abuuraysaa nolol cusub; waxay abuuraysaa qof cusub oo ah ekaanta Ilaah. Maadaamoo aan shaqada Ruuxa la arki karin oo aamusan, haddana natiijooyinka waxay noqdaan kuwa muuqda. Haddii qalbiga laga cusboonaysiiyey xagga Ruuxa Ilaah, noloshaada midhaheeda ayay ka muuqanayaan. Maadaamoo aan samayn karin waxyaabo aan qalbiya-deenna ku cusboonaysiinno oo aan xidhiidhkii Ilaah dib ugu soo celinno; inta aan wanaageenna iyo dadaalkeenna tala saaranayn, nolosheenna waxay muujinaysaa in nimcada Ilaah inagu jirto iyo in kale. Beddelka sidiisuba wuxuu ka muuqdaa dhaqanka, dabeecadaha iyo sida aan wax u samayno. Sida uu is beddelku u dhacay way iska caddaanaysaa sidaad ahaan jirtay iyo hadda sidaad tahay. Waxaad tahay ayaa muuqanaysaa, ma aha xagga wanaagga aad samaysid ama aad samayn wayside, laakiin sida ay dhaqamadaadu iyo shuqulladaadu isu beddeleen.

Waxaa laga yaabaa in mararka qaar muuqaal ahaan iyo dhaqan ahaan ka wanaagsanaatid, adigoo xoogga Masiixa qalbigaaga cusboonay siinin. Jecaylka aad u qabtid inaad dad kale saamayn ku yeelatid, iyo in-aad kuwa kale sharaf badan la jeclaatid ayaa waxay

soo saari kartaa nolol qorshaysan. Qiimayn aan isu hayno ayaa
[42] waxay inaga celin kartaa inaan sharka iska dhawrno. Qalbi wax kasta isaga isla jecelna wuxuu mararka qaar sameeyaa waxyaabo wanaagsan. Laakiin sidee baan ku garan karnaa kan xaggiisa aan la jirno?

Ayaa qalbiga hayaa? Ayey fikirradeennu la jiraan? Ayaan jecel nahay inaan la sheekaysanno? Ayaan ka helnaa waxyaabahan aan jecel nahay iyo sheekooyin qosol leh/haddii aan Masiixa la jirno fikirradeennuna isaga ayaa hayaa, waxyaabaha aan ugu jecel nahayna waxay ka yimaadaan xaggiisa. Wax walboo aan haynona oo aan nahayba isaga ayaan siinnaa. Waxaan doondoonnaa inaan sidno ekaantiisa, Ruuxisana aan ku neefsanno, doonistiisana aan yeelno, oo wax walba aan kaga farxinno.

Kuwa xagga Ciise Masiix ku noqda abuur cusub, waxay soo saari doonaan midhaha Ruuxa, "jacayl, farxad, nabad, dulqaadasho, roonaan, wanaag, aaminnimo, qabownimo, iscelin." Galatiya 5:22, 23. Mar dambe kuma sii socon doonaan sidii hore ay ugu socon jireen oo kale, laakiin xagga rumaysadka Wiilka Ilaah waxay raaci doonaan tallaabooyinkiisa, waxayna soo bandhigi doonaan sida saxda ah uu Ilaah doonayo, waxayna isu daahirin doonaan oo isu nadiifin doonaan siduu isaguba nadiif u yahay. Waxay markii hore nebcaan jireen hadda way jeclaadaan, kuwii ay markii hore jeclaan jireenna hadda way nebcaadaan. Kii kibirka iyo faanka badnaan jiray, wuxuu xagga qalbiga ka noqdaa mid qabow. Kii faaruqa iyo caajiska ka buuxayna wuxuu imminka noqdaa mid si dhab ah wax u qabsado. Kii sakhraanka ahaana wuxuu noqdaa mid aan sakhraan ahayn, fataalkiina wuxuu noqdaa mid aan dib dambe wax ugu cayaarayn. Dhaqammadii xumaa ee dunida waxay noqdaan kuwa gees layska dhigay. Masiixiyiintu ma doonaan inay, "Qurxinta dibadda ah," laakiinse waxay doondoonaan, "Inta qalbiga ee qarsoon, taasoo leh wax aan baaba'ayn ee ah ruuxa qabow oo aamusan, kaasoo Ilaah hortiisa qiimo badan ku leh." 1 Butros 3:3, 4.

Toobadkeen sax ah ma jiro ilaa xagga dhaqanka laga beddelmo maahee. Hadduu qofku axdiga adkeeyo, oo celiyo wax alla wixii uu dhacay, oo uu dembiyadiisa qirto, oo uu Ilaah iyo dadkaba jeclaado, qofka dembiilaha ah wuxuu hubaal u lahaan karaa inuu ka soo gudbay dhima sha oo uu u soo gudbay xagga nolosha.

Marka annagoo kuwa khaladaad badan ah oo dembiileyaal ah,
aan u nimaadno Masiixa, oo aan kala qayb qaadanno nimcadiisa,
jacayl ayaa qalbiga ka soo durdurayaa. Culaab kastaana way fudu- [43]
daanaysaa, waayo, harqoodka Masiixa waa mid sahlan oo la sidi karo. Amarrada Ilaah oo la sameeyo waxay noqonayaan farxad, qurbaankana wax la jeclaysto. Waddadii marka hore u ekayd mid mugdi ka buuxo, waxay la dhalaalaysaa iftiinka ka soo baxaya qorraxda xaqnimada.

Sidii uu Masiixu ku noolaa waxay ka dhex muuqanaysaa kuwa isaga raacsan. Isagu wuxuu ku farxi jiray inuu sameeyo doonista Ilaah. Badbaadiyaheenna noloshiisa waxaa ka buuxday jaylka Ilaah, iyo qiirada amaantiisa. Wax kastoo uu sameeyo wuxuu ku samayn jiray jacayl. Jacaylku wuxuu ka yimid xagga Ilaah, isaga ayaana leh. Qalbiga aan Ilaah jeclayn jacayal ma soo saari karo. Waxaa keliya oo laga heli karaa qalbiga uu Ciise ka dhex talinayo. "Waannu jecel nahay, waayo, isaga ayaa marka hore ina jeclaaday." 1 Yooxanaa 4:19. Qalbiga uu Ilaah ku cusboonaysiiyey nimcadiisa, jacayl ayaa ahaanaya qaynuunka uu wax kastaa ku sameeyo. Wuxuu horumarinayaa dhaqanka, wuxuuna u talinayaa dareemaha, wuxuuna xukumayaa damaca, cadaawaddana wuu inaga saarayaa, inaan wax wanaagsan samaynona wuu ina karsiinayaa. Jacaylkan oo ku dhex qarsoon nafta, nolosha ayuu macaanaynayaa dhinac kastaa oo nolosheenna ahna saamayn ayuu ku yeelanayaa.

Waxaa jiraan laba khaladood oo ay tahay Carruurta Ilaah khaasatan kuwa nimcadiisa goor dhow rumaystay inay iska ilaaliyaan. Tan koowaad oo aan hore uga soo hadallay, waa inay tala saartaan wanaagga iyo shuqullada ay sameeyaan, si ay Ilaah ay ugu soo dhowaadaan. Qof kastaa oo doonaya inuu quduus ku noqda sharciga oo uu dhawra, wuxuu isku dayayaa waxaan aan suurta gal ahayn. Waxa dadka dhamaan ay ku samayn Masiixa la'aantiis waa wax qudhmay, oo ay ka buuxaan shar iyo dembi. Waa nimcada Masiixa oo keliya, taas oo ka timaada xagga rumaysadka oo keliya, tan quduus inaga dhigi karayso.

Khaladka kale ee aan ka yarayn kan aan soo sheegnay, waa in dadku u maleeyaan, rumaysadka Masiixa inuu dadka ka furanayo dhawridda sharciga; waxayna ku doodaan, maadaamoo xagga rumaysadka oo keliya aan kaga qeyb qaadanayno nimcada Rabbiga, in

shuqulladeennu aanan loo baahnayn ama ay door ka cayaari karaan furashadeenna.

Laakiin waxaad ogaataan in adeecidu ayan ahayn oo keliya wax xagga dibadda laga sameeyo, laakiin ay tahay xataa adeegga xagga
[44] jacaylka. Sharciga wuxuu tilmaamayaa waxa dhabta ay dabeecadda Ilaah tahay; waa sawirka qaynuunnnada jacaylka, waana aasaaska dowladdiisa samada iyo dhulka. Haddii ay qalbiyadeenna ku cusboonaadaan oo noqdaan ekaanta Ilaah, haddii jacaylka Rabbaaniga ah nafta ku dhex abuurma, miyaan sharciga Ilaah nolosha ka dhex muuqanayn? Marka qaynuunnada jacaylka ku dhex samaysmaan qalbiyadeenna, oo dadkuna ay lahaadaan ekaanta kan iyaga abuuray, ballankii axdiga cusub ayaa rumoobayaa, "Qaynuunnadayda waxaan gelin doonaa qalbigooda, Maankoodana waan ku qori doonaa." Cibraaniyada 10:16, Haddii qaynuunku uu ku qorma qalbiga, miyuusan nafta qaabaynayn? Adeecid ku shaqeysa jacayl ayaa astaanta saxda ee lagu garan karo xernimada. Wuxuu qoraalku leeyahay, "Waa kan jacaylka Ilaah, kaasoo ah inaynu qaynuunnadiisa xajinno." "Kan yidhaahdaa, waan aqaan isaga, oo aan qaynuunnadiisa adkayn, waa beenaaleh, oo runtuna kuma jirto isaga." 1 Yooxanaa 5:3; 2:4. Rumaysadku ma aha inuu adeecida inaga sii fogeynayo, laakiinse waa rumaysadka oo keliya kan adeecid buuxda qalbiyadeenna soo gelin kara. Badbaadada kuma heli karno adeeciddeenna; waayo, badbaadadu waa hadiyadda Ilaah ee bilaashka ah, oo lagu heli karo rumaysad oo keliya. Laakiin adeeciddu waa midhaha rumaysadka. "Oo idinku waad og tihiin in isagu u muuqday inuu dembiyadeenna inaga qaado, oo isagu dembi ma leh. Ku alla kii isaga ku sii jiraa, ma dembaabo; ku alla kii dembaabaa ma uu arkin isaga, oo weliba ma yaqaan isaga." 1 Yooxanaa 3:5, 6. Waa tan tijaabada dhabta ah. Haddii aan Masiixa ku sii jirno, oo jacaylka Ilaah inagu dhex jiro, dareemaheenna, fikirradeenna, ujeedooyinkeenna, falimaheenna, dhamaan waxay mid la noqonayaan doonista Ilaah, sida ay ugu cad yihiin qaynuunnadiisa sharciga quduuska ah. "Carruurtiiyey, yaan cidi idin khiyaanayn; kii xaqnimo falaa waa xaq siduu isaguba xaq u yahay." 1 Yooxanaa 3:7. Xaqnimadu waxaa lagu micneeyaa qiyaasta sharciyada Ilaah, sida loogu sheegay tobanka amar ee lagu bixiyey buur Siinaay.

Kuwa sheegaya in rumaysadka Masiixa dadka ka furanayo adeecidda sharciga, waa rumaysad aan sax ahayn, laakiin waa mid

ku salaysan malo. "Idinku waxaad ku badbaaddeen nimco xagga rumaysadka."

"Haddaba sidaas oo kale rumaysadku haddaanu shuqullo lahayn keli ahaantiisu waa meyd." Efesos 2:8; Yacquub 2:17. Ciise mar uu ka hadlayey intaanu dunida iman ka hor, wuxuu yidhi, "Ilaahow, [45]
waxaan jeclahay inaan sameeyo doonistaada, haah, oo sharcigaagu wuxuu ku dhex jiraa qalbigayga." Sabuurradii 40:8. In yar ka hor intaanu samada aadinna wuxuu yidh, "Sidaan qaynuunada Aabahay u xajiyey, oo aan jacaylkiisa ugu jiro." Yooxanaa 15:10. Waxay qoraalladu leeyihiin, "Oo taas ayaynu ku garanaynaa inaynu naqaan isaga, haddaynu qaynuunnadiisa adkeyno....... Kan yidhaahdaa, isagaan ku jiraa, waa inuu u socdaa siduu isaga u socday." 1 Yooxanaa 2:3, 6. "Maxaa yeelay, Masiix, baa idiin xanuunsaday, oo wuxuu idinkaga tegey masaal inaad tallaabooyinkiisa raacdaan." 1 Butros 2:21.

Shuruudaha nolosha weligeed ah waxay hadda yihiin siday weligood ahaan jireen, siday ay ku ahaan jireen jannada intaanu labadeenni waalid ee ugu horreeyay ayan dembaabin, in si dhamays tiran loo adeeca sharciga Ilaah, iyo xaqnimo dhamays tiran. Haddii nolosha weligeed lagu heli karayo shardi kan ka yar, haddaba farxadda caalamka waxay ku geli lahayd khatar. Waddada waxay u furmi lahayd dembi, isagoo wata belaayooyinkiisa oo dhan, oo ay noqdaan kuwa aan dhamaanayn.

Aadan way u fursad ayuu u lahaa intaanu dembaabin ka hor inuu noloshiisa ka dhigo mid xaqnimo ku salaysnayd, iyo inuu sharciga Ilaah si buuxda u adeeco. Laakiin wuu samayn waayey taas, dembigiisii aawadiisna dunida oo dhan way dembaabtay, mana iska dhigi karno kuwa xaq ah. Maadaamoo aan dembiileyaal nahay, iyo kuwa aan quduusiin ahayn, ma lihin xoog aan si dhamaystiran ugu adeecna sharciyada Ilaah. Ma lihin xaqnimo xaggeenna ah, oo aan ku gaadhi karno waxa sharciyada Ilaah ee quduuska ah ay inaga doonayaan. Laakiin Masiixa ayaa jid aan ku fakan karno inoo sameeyay. Wuxuu dhulka ugu noolaa isagoo ahaa mid la jirrabay oo la tijaabiyey sida innaga aan waxyaabahaas u marno oo kale. Wuxuu ku noolaa nolol aan dembi lahayn. Innaga aawadeen ayuuna u dhintay, imminkana wuxuu doonayaa inuu dembiyadeenna qaado, oo xaqnimadiisa ina siiyo. Haddii aad adiga oo dhan aad isaga isa siisid, oo aad u aqbashid inuu Badbaadiyahaaga yahay, si kastoo ay

noloshaada dembi u leedahay, isaga daraadiis waxaa lagugu tirinayaa mid xaq ah. Masiixa dabeecaddiisa ayaa istaagaysaa taada meeshi ay istaagi lahayd, Ilaah hortiisana waxaad ka noqonaysaa sida mid aan weligiis dembaabin oo kale.

[46] Intaas waxaa sii dheer Masiixa wuxuu beddelayaa qalbigaaga. Xagga rumaysadka ayuu qalbigaaga ugu jirayaa. Waa inaad xidhiidhkaaga Masiixa ku xajisid rumaysad, iyo doonistaada ood isaga gacanta u gelisid; markaad sidaas yeeshidna, wuxuu kaaga dhex shaqayn inaad doonistiisa iyo waxyaabaha uu jecel yahay oo keliya aad samaysid. Markaasaad waxaad odhanaysaa, "Oo nolosha aan haatan jidhka ku dhex noolahay waxaan ku noolahay rumaysadka xagga Wiilka Ilaah, kan I jeclaaday oo naftiisa u bixiyey daraaday." Galatiya 2:20. Masiixuna wuxuu xertiisii ku yidhi, "Ma aha, idinka kuwa hadlayaa laakiin waa Ruuxa Aabihiin kan idinka dhex hadlayaa." Matayos 10:20. Markaas adigoo Masiixu kaa dhex shaqaynayo, waxaad muujin doontaa isla ruuxa iyo isla shuqullada wanaagsan, oo ah shuqullada xaqnimada, iyo adeecidda.

Haddaba sidaas daraadeed ma lihin waxaan ku faanno. Meelna uma hayno inaan isa sarraysiinno. Rajada keliya ee aan leennahay waa in xaqnimada Masiixa laynagu dhex abuuro, taas oo xagga Ruuxiisa inooga dhex shaqaynayso.

Markaan rumaysad ka hadlayno, waxaa la doonayaa inaan sida ay waxyaabahan kala yihiin maanka ku hayno. Waxaa jirta aaminaad ka duwan rumaysadka. Jiritaanka iyo Awooda Ilaah, runta ereygiisa, waa xaqiiqo xataa shaydaanka iyo jinniyaddiisa ayan beenayn karin. Kitaabka Quduuska ah wuxuu leeyahay, "Xataa Jinniyaduna sidaas way rumaysan yihiin, wayna gariiraan." Laakiin tan rumaysad ma aha. Yacquub 2:19. Marka ereyga Ilaah oo keliya aan la aaminsanayn, oo doonista isaga loo hogaamiyey; marka qalbiga oo dhan isaga loo dhiibo, damacyadana isaga lagu xidho, meeshaas waxaa jiraa rumaysad, rumaysad jacayl ku shaqeeya oo nafta daahiriya. Xagga rumaysadkan qalbiga waxaa lagu cusboonaysiinayaa ekaanta Ilaah. Qalbiga marka aan la cusboonaysiininna uma hogaansami karo sharciga Ilaah, mana ahaan karo sida kan cusub, ee ku farxaya qaynuunnada quduuska ah, Daa'uud wuxuu leeyahay, "Aad baan sharcigaaga u jeclahay! Maalinta oo dhan isagaan u fiirsadaa." Sabuurradii 119:97. Xaqnimada sharcigana

waxay ku fulaysaa dhexdeenna, "Kuwa xagga aan ka socon xagga jidhka, laakiin ka socda xagga Ruuxa." Rooma 8:1.

Waxaa jiraan kuwa gartay jacaylka Masiixa, oo jecel inay ahaadaan carruurta Ilaah, welina garanaya in dhaqankoodu aanu dhamaystirnayn, noloshoodana mid dembi badan tahay, waxayna diyaar u yihiin inay ka shakiyaan in qalbiyadoodu uu cusboonaysiiyey Ruuxa Quduuska ah iyo in kale. Kuwaas waxaan ku odhan lahaa, ha rajo dhigina. Waa in marar badan aan ku sujuudno oon ku ilmeyna cagaha Ciise hoostooda khaladaadkeenna iyo daciifnimadeenna aawadeed, laakiin waa inaanan qalbi jebin. Xataa hadduu cadowgu inaga adkaado, weli laynama tuurin, Ilaahna nama uu dayrin oo inama nicin. Maya; Masiixu wuxuu joogaa dhinaca midig ee Ilaah ,isagoo dhexdhexaadiye inoo ah. Yoxanaa wuxuu leeyahay, "Waxaan waxyaalahan idiinku soo qorayaa si aydnaan u dembaabin; oo qof uun hadduu dembaabo, waxaynu xagga Aabaha ku leennahay Dhexdhexaadiye, waana Ciise Masiix kan xaqa ah." 1 Yooxanaa 2:1. Hana illobin ereyadii Masiixa, "Waayo, Aabaha qudhiisu wuu idin jecel yahay." Yooxanaa 16:27. Ilaah wuxuu jecel yahay inuu dib isugu kiin soo celiyo, oo uu idinka dhex arko daahirsanaantiisa iyo quduusnimadiisa. Haddii aydnaan wax kale doonin aan ka ahayn inaad isaga isu dhiibtaan oo keliya maahee, kii idinku dhex billaabay shuqul wuu wadi doonaa ilaa maalinta Ciise Masiix. Si joogta ah u tukada; si buuxdana u rumaysta. Markaan ku kalsoonaan kari wayno xoggeenna, waa inaan aaminno xoogga kan ina furtay, waana amaaani doonnaa, kan ah caafimaadka aan ku tiirsannahay. [47]

Intaad Masiixa u soo dhowaanaysid, waxaad si buuxda u sii arkaysaa sidaad adiga dembile u tahay; waayo, indhahaagu way furmayaan, daahirsanaan la'aantaaduna waxay daahirsanaantiisa horteeda ugu muuqanaysaa sida maalinta dharaarta oo kale. Tan waxay caddeyn in khiyaanooyinkii shaydaanka ay xoog la'aadeen; oo Ruuxa Ilaah uu ku qasayo ama kaa dhex shaqeynayo.

Jacayl kastaa oo Ciise loo qaado wuxuu si dhab ah inoo tusayaa dembiilenimadeenna. Nafta ay beddeshay nimcada Masiixa, waxay jeclaanaysaa inay isaga ku dayato; laakiin haddii aan arki wayno sida damiirkeenna u kharibmay, waxay caddeyn u tahay inaanan quruxda iyo kaamil ahaanshaha Masiixa.

Inta aan innaga is liidayno, ayaa ah inta aan arkayno daahirsanaanta iyo jacaylka Badbaadiyaheenna. Markaan dembiileni-

[48] madeenna si dhab ah u aragno waxay inoo dhoweynaysaa kan dembiyada cafiya; marka nafta oo dareemaysa sida ay isugu gargaari karin, Masiixa gargaar ka doontana, wuxuu isaga isu muujin si xoog badan. Inta ay baahideennu inagu dhowaynayso Ciise iyo ereyga Ilaah, waa inta aan isaga sarreyntiisa sii arkayno, waana inta ay ekaantiisa oo buuxda inaga sii dhex muuqan doonta.

# 8—Koridda Xagga Masiixa [49]

Cusboonaanta xagga qalbiga oo aan ku noqon karno carruurta Ilaah, wuxuu Kitaabka Quduuska ah ku tilmaamay dhalasho. Mar labaad waxaa lagu micneeyay inay tahay mirta wanaagsan ee uu beeray shaqaalaha beerta. Sidaas oo kale kuwa ku cusub rumaysadka Masiixa waxaa weeye, "Sida ilmo cusub oo la dhalay," inay "Ku barbaaraan" Masiixa iyagoo rag iyo dumarba. 1 Butros 2:2; Efesos 4:15. Ama sida mirta wanaagsan ee lagu beeray beerta, waa inay koraan oo midho badan dhalaan. Ishacyaah wuxuu leeyahay waa in, "Iyaga lagu magacaabo geedihii xaqnimada iyo beeriddii Rabbiga, si uu isagu u ammaanmo." Ishacyaah 61:3. Waxaa nolosha geedaha iyo waxyaabaha la midka ah, laga soo qaatay tusaale si ay inoogu noqdaan kuwa si wanaagsan inoo fahansiiyo waxyaabaha ruuxa. Xigmadda iyo aqoonta Aadanaha oo dhan, wax naf ah ma gelin karaan waxa ugu yar ee aduunka yaalla. Waa nafta Ilaah keliya uu geliyey waxa dhir iyo xoolaba ka dhigi karo inay noolaadaan. Sidaas oo kalena waa xagga nolosha oo keliya sida nolosha ruuxa ay ku geli karayso qalbiyada Aadanaha. Ilaa qofka "Xagga kore laga dhalo," Ma noqon karo mid ka qayb qaata noloshii uu Masiixu u yimid inuu bixiyo. Yooxanaa 3:3.

Sida ay noloshu tahay sidaas oo kale ayuu koritaankuna yahay. Waa Ilaah kan ubaxyada iyo geedaha soo saaraa. Waa xooggiisa iyo awoodiisa waxa ay midhuhu ku koraan, "Horta jiridda, dabadeed sabuulka, dabadeedna sabuulka midho ka buuxsama." Markos 4:28. Rasuul wuxuu reer Binu-Israa'iil ka sheegay in ay, "Noqon doonto sida sayaxa oo kale," "waxay u soo noolaan doonaan sida hadhuudhka oo kale, oo waxay u ubxin doonaan sida canabka oo kale." Hoosheeca 14: 5, 7. Ciisena wuxuu inagu dhiirragelinayaa, "fiiriya ubaxyada, siday u baxaan." Luukos 12:27. Geedaha iyo ubaxyada kuma karaan awood tooda ama dadaal kooda ah toona, laakiin waxay qaataan waxa iyaga Ilaah ugu talagalay inay ku koraan. Ilmuhu innaba awood tiisa ah isuguma kordhin karo itaalkiisa ama muuqaalkiisa. Adiguna sidaas oo kale, awood ama dadaal toona

[50] kuma heli kartid koridda ruuxa. Geeduhu, iyo ilmuhu, waxay ku koraan waxa ay ka helaan waxyaabaha ka ag dhow sida, hawada, iftiinka qorraxda, iyo cuntada. Sida ay waxyaabahan hadiyad ugu yihiin xoolaha iyo dhirta, sidaas oo kale ayuu Masiixu u yahay kuwa isaga tala saarta oo aamina. Wuxuu iyaga u yahay, "Iftiinka weligiis jira," "Qorrax iyo gaashaan." Ishacyaah 60:19; Sabuurradii 84:11. Wuxuu u ahaan doonaa, "Dadka Israa'iil sida sayaxa oo kale." "Isagu wuxuu u soo degi doonaa sida roob caws la jaray ku dul hooray." Hoosheeca 14:5; Sabuurradii 72:6. Isagu (Ciise), waa biyaha nool iyo, "....Kibista Ilaah kan samada ka soo degay oo dunida nolosha siiya." Yooxanaa 6:33.

Hadiyadii xagga Wiilkiisa, Ilaah dunida oo dhan wuxuu ku soo dejiyey oo ku hareereeyay nimco sida hawada ay dunida oo dhan u dhex joogta. Kuwa dhammaan doonay inay ku neefsadaan jawigan waxay Ma-siixa ugu kori doonaan inay noqdaan rag iyo dumar waaweyn.

Sida uu ubaxu ugu kora iftiinka qorraxda, innaguna sidaas oo kale ayaan ugu jeesanaynaa qorraxda xaqnimada, si iftiinka samadu inooga dhex iftiimo, oo dhaqankeennuna ugu beddelmo ekaanta Ciise Masiix. Ciise taas oo kale ayuu baray markuu yidhi, "Igu jira, anna aan idinku jiree. Sida laantu keligeed aanu midha u dhali karin haddaanay geedka canabka ah ku oolin; sidaas oo kale idinkuna ma dhali kartaan hadaydnan igu jirin...... la'aantay waxba ma samayn kartaan." Yooxanaa 15:4, 5.

Waxaad Masiixa ku tahay mid isaga keliya ku tiirsan, si aad ugu noolaatid nolol quduus ah, sida ay laantu geedka ku tahay, oo ayan midho u dhali karin la'aantiis. Isaga la'aantiis nolol ma lihid. Awood aad iskaga celisid jirrabaadda oo aad ugu kortid nimco iyo quduusnimona ma lahaanaysid. Haddii aad isaga ku jirtid waad sii koraysaa. Haddii aad noloshaada isaga ka qaadatidna, ma burbureysid midho la'aanna ma noqonaysid. Waxaad ahaanaysaa sida geed lagu beeray webiga jiinkiisa.

Kuwa badan ayaa waxay u haystaan in khasab ay tahay inay wax ka qabtaan shaqada Ilaah. Waxay Masiixa u talasaarteen inuu dembiyadooda cafiyo, laakiin hadda waxay dadaalkooda ku doondoonayaan inay noqdaan kuwa shuqullada ku wanaagsan. Laakiin dadaal kasta oo caynkaas ah, waa lagu guul darraysan doonaa. Ciise wuxuu leeyahay, "La'aan tay waxba ma samayn kartaan." Koritaankeenna

xagga nimcadiisa, farxaddeenna, qiimaheenna, waxay dhamaan ku tiiran yihiin la mid ahaanshaheenna Masiixa. Waa markaan xidhiidh [51]
gaar ahaanayd la yeelanno, maalin kasta, iyo saacad kasta, oo aan isaga ku jirno, goorta aan ku korayno nimcadiisa. Isagu ma aha oo keliya billaabaha rumaysadkeenna, laakiin xataa waa kan dhamaystiri doona rumaysadkeenna. Waa Masiixa billowga, iyo dhamaadka iyo weligiisba. Wuu inala jirayaa, ma aha oo keliya billowga iyo dhamaadka shuqulladeenna, laakiin tallaabo kasta oo aan qaadno. Daa'uud wuxuu leeyahay, "Had iyo jeerba Rabbigaan hortayda ku xusuustaa, oo anigu innaba dhaqdhaqaaqi maayo, maxaa yeelay, isagu wuxuu joogaa midigtayda." Sabuurradii 16:8.

Miyaad is weydiinaysaa, "Sidee bay tahay inaan Masiixa ugu jiro?" Isla sidii aad marki hore aad u aqbashay. "Haddaba sidaad u aqbasheen Rabbi Ciise Masiix, ku socda." "Laakiin kayga xaqa ahu rumaysad buu ku noolaan doonaa." Kolosay 2:6; Cibraaniyada 10:38. Ilaah ayaa si buuxda isu siinaysaa, si aad kiisa u noqotid, si aad ugu adeegtid oo u adeecdid, markaasna Masiixa wuxuu noqday Badbaadiyahaaga. Adigu qudhaada isuma aad noqon karin kafaarogud qalbigaagana ma aad beddeli karin; laakiin markaad Ilaah isa siisay, waxaad rumaysatay in Ilaah Masiixa daraadiis oo waxyaabahan oodhan adiga kuugu sameeyay. Rumaysad ayaa ku noqotay kan Masiixa, xagga rumaysadkana waa inaad ku kortid isaga, adigoo isa siinaysid oo ka dibna isaga q Aadanaysid. Waa inaad dhamaan isaga siisaa, qalbigaaga, doonistaada, shaqadaada, adiga oo dhammu isaga isa sii si aad u adeecdid amarradiisa; waana inaad qaadataa dhamaan Masiixa buuxnaantiisa, iyo buuxnaanta barakadiisa, si uu qalbigaagu ugu jiro, oo u ahaado xooggaada, xaqnimadaada, iyo gargaarahaaga weligiis jiro, si uu kuu siiyo awood aad isaga ku adeecdid.

Ilaah Allabari ahaan isu sii aroorti; Arrintan iyada ah caadeyso. Tukashadaadu ha ahaato, "Rabbiyow, ii qaado, sida mid kaada ah. Qorshooyinkayda oo dhan waxaan keenayaa lugahaaga hostooda. Maanta ii isticmaal inaan qabto shaqooyinkaaga. Igu jir, oo shuqulladayda adiga ha kuu ahaadeen." Tan waa mid maalin kastaa ay tahay in la sameeyo. Maalin kastaa Ilaah gaar isaga dhig ahaantaada. Qorshooyinkaaga oo dhan isaga gacanta u geli, si wax walba ay gacantiisa ugu jirto oo adiguna uu kuugu gargaaro. Markaad maalin kastaa noloshaada Ilaah siisid, oo gacantiisa isku aamintid,

noloshaada waxay sii noqonaysaa mid sii lahaato e-kaanta Masiixa. Nolosha Masiixa ku dhex jirtaa waa nolol nasiino ka buuxda Ma aha.

[52] Inaan dareemayno siyaaabo aan garanayn, laakiin waa inay jirtaa ammaan nabad ka buuxda. Rajadaadu adiga kuguma dhex jirta; waxay keliya oo ku jirtaa Masiixa. Daciifnimadaadu waxay ku kaamil noqotaa isaga, jaahilnimadaaduna xigmaddiisa, itaaldarradaaduna xooggiisa. Si-daas daraadeed waa inAadan adiga is tala saaran, oo qalbigaaguna yuusan ahaan mid kuu taliya, laakiin Masiixa oo keliya ku tiirsanow. Qalbigaagu jacaylkiisa ha ka buuxsamo, iyo qiimaha iyo quruxda oo isagu leeyahay. Waxay naftu tahay inay doondoonto, waa adigoo dhawra, amaba eeg, goortii Masiixa dafirayey, iyo goortii uu is-hooseysiinayey, Masiixa daahirsanaantiisa, iyo quduusnaantiisa, iyo Masiixa oo ka buuxa jacaylkiisa. Sidaad isaga ekaantiisa u lahaan karto waa markaad isaga jeclaatid, oo aad isaga ku dayatid, oo aad isaga ku tiirsanaatid.

Ciise wuxuu leeyahay, "Igu jira." Ereyadan waxay ka hadlayaan fikirka ah nasiino, degganaansho, iyo kalsoonaan. Mar labaad wuxuu yidhi, "Ii kaalaya kulligiin ....... oo anigu waan idin nasin doonaa." Matayos 11:28. Daa'uudna sidaas oo kale ayuu u hadlay: : "Rabbiga ku hor xasilloonow, oo isaga samir ku sug." Ishacyaahna wuxuu ina siiyey hubaasha ah, "oo xasilloonaan iyo kalsooni ayaad xoog ku yeelan doontaan." Sabuurradii 37:7; Ishacyaah 30:15. Xassillonaantan laguma helo si aan wax tar ama shuqul lahayn; Waayo, Ciise markuu dadka ugu yeeray nasiino, wuxuu kaloo u sheegay inay hawshoonayaan: "Harqoodkayga dushiinna ku qaata ......... oo naftiinna nasashaad u heli doontaan." Matayos 11:29. Qalbiga ku nasanayo Masiixa si buuxda ayaa ahaanayaa kan u hawl badnaanaya markay shaqo timaadona.

Markuu qofku isaga keliya isku kalsoonaado, wuu ka jeesanayaa Masiixa, oo ah isha xoogga iyo nolosha. Waana shaydaanka doonistiisa had iyo goorba inuu dadka ka leexiyo Masiixa, iyo inay naftu ku xidhnaato Masiixa oo keliya. Wuxuu doondoonaa inuu qalbiga ka buuxiyo jacaylka dunida, waxa ay nolosha jeceshahay, iyo naxdin iyo murugo, khaladaad kuwaada ah iyo kuwa dadka kaleba. Haddaba ka digtoonow dabinnadiisa. Kuwa badan oo digtoon, oo jecel inay Ilaah dartii u noolaadaan, wuxuu iyagana ku jirrabaa siyaabo kala du-duwan isagoo rajaynaya inuu iyaga ka fogeeya

Masiixa oo iyaga ka guulaysta. Waa inaanan keligeen had iyo goor iska fakarin, oo aanan ka cabsan inay naftayada badbaadi doonta iyo in kale. Waxyaabahan oo dhan waxay naftaa ka leexisaa oo ka [53] jeedisaa isha keliya ee xoog aan ka heli karayno. Naftaada Ilaah ku aamin, oo isaga ku kalsoonow. Had iyo goorba Ciise ka fikir oo ka sheekee. Shaki oo dhan iska saar; cabsidana iska dheeree. Dheh siduu Rasuul Bawlos yidhi oo kale, "Aniga ma aha kan nooli, laakiin Masiix ayaa igu dhex nool, oo nolosha aan haatan jidhka ku dhex noolahay waxaan ku noolahay rumaysadka xagga Wiilka Ilaah, kan i jeclaaday oo naftiisa u bixiyey daraadday." Galatiya. 2:20. Ilaah keliya ku naso. Isagu awood ayuu u leeyahay inuu dhawro oo ilaaliyo wixii aad isaga ku aamintay. Haddii aad isaga gacmihiisa isu dhiibtid, wuxuu kaa dhigayaa mid ku guulaysta kii xaggiisa uu isaga aad u jeclaa.

Markuu Masiixu soo qaatay jidhka Aadanaha oo kale, wuxuu Aadanaha kula midoobay guntin jacayl oo aan weligeed la furi karayn oo aan la diidi karayn waxaan ka ahayn inaan innaga jacaylkaas diidno maahee. Shaydaanku wuxuu mar walba isku dayi doonaa inuu furo guntintaas oo inaga fogeeya jacaylka Masiixa. Waa markan goortaan u baahannahay inaan feejignaanno, oo dadaalno, oo tukanno, si waxba ayan inooga dhigin inaan dooranno Sayid kale; waayo, had iyo goor xor ayaan u nahay inaan waxaan doonna samayno. Laakiin indhahayaga aan Masiixa ku eegno, isaguna wuu ina ilaalin doonaa. Markaan Masiixa oo keliya ku tiirsanaanno, waan badbaadaynaa waana nabadgelaynaa. Wax gacantiisa inaga dhufan karana ma jiro. Markaan si joogta ah isaga u dhawrno, dhamaanteen "oo isu ekaanta ayaa laynoo rogayaa, ammaan ilaa ammaan, sida tan xagga Rabbiga Ruuxa ah ka timaada. 2 Korintos 3:18.

Taas ayay ahayd wixi xertii ugu horreyay ay u lahaadeen ekaanta Badbaadiyahoodi ay jeclaayeen. Kuwan Xerta ahaa markay maqleen ereyadii Ciise, waxay dareemeen sida ay isaga ugu baahan yihiin. Way raadiyeen, wayna heleen, wayna raaceen. Isaga ayay la joogeen guriga, miiska, beerta iyo meel walbaba. Waxay isaga ula jireen oo u dhegaysan jireen sida arday macallinkooda ka wax baranayay, oo waxay faruurahiisa ka maqleen casharrada quduuska ah. Waxay isaga u fiirinayeen sida shaqaalahu ay u eegaan taliyahooda, si ay uga bartaan shaqada looga baahan yahay inay qabtaan. Kuwaas xerta ahaa "waxay ahaayeen niman dabiicaddeenna oo kale leh."

Yacquub 5:17. Dembigu iyaga qudhooda wuxuu ahaa mid ay la
[54] dagaallami jireen sideenna oo kale. Waxyna u baahnaayeen nimcada aan u baahannahay oo kale, si ay ugu noolaadaan nolol quduusa ah.

Xataa Yooxanaa, oo ahaa kii uu Ciise aadka u jeclaa, oo ahaa kii soo saaray oo soo bandhigay ekaantii Badbaadiyahiisa, ma lahayn nolol dhamaystiran. Ma ahayn oo keliya mid aad u jeclaa in la maamuuso, laakiin xataa wuxuu ahaa mid aad u dhibsan jiray dhibaatooyinka oo ka caroon jiray oo dul qaadku ku yaraa. Laakiin markii isaga si cad loo tusay sida ay tahay dabeecadda Ilaah, wuxuu arkay iinta uu lahaa, wuuna is hooseysiiyay aqoonta aawadeed. Xoogga iyo samirka, awooda iyo dabacsanaanta, weynaanta iyo qabownimada, ee uu maalin kastaa nolosha Wiilka Ilaah ka arki jiray, ayaa waxay naftiisa ka buuxisay damac badan oo uu ku sii jeclaado dhaqanka Masiixa iyo jacayl. Maalinba maalinta ka dambaysay qalbigiisa wuxuu u sii dhowaanayey Masiixa, ilaa uu jacaylkuu isagu isu qabay ka dhamaado kii uu Ciise u qabay awgiis. Dabeecaddiisii samir la'aanta waxaa beddeshay awoodii Masiixa markuu isu dhiibay Masiixa. Cusboonaanta Ruuxa Quduuskaa ayaa qalbigiisa dib u cusboonaysiisay. Awoodii jacaylka Masiixa ayaa dhaqankiisa oo dhan beddeshay. Taas waxay muujinaysay sidii dhabta ahayd uu ula midoobay Masiixa. Masiixu markuu qalbigu ku jiro nolosha oo dhan way beddelmaysaa. Ruuxa Masiixa, jacaylkiisa, waxay jilciayaan qalbiga, naftana way hogaamiyaan, fikirradeenna iyo damacyadeennana waxay u jeediyaan xagga Ilaah iyo jannada.

Masiixu markuu samada aaday, Xertiisii waxay weli dareemayeen la jooggiisa. La jooggiisii wuxuu ahaa mid jacayl iyo iftiin uu ka buuxo. Badbaadiyaheenna Ciise oo la socday, oo la tukaday lana hadlay iyaga, oo qalbiyadooda si qabownaan ah kula hadlay, isagoo weli kula hadlayay hadallo rajo ah ayaa indhahooda hortooda samada loo qaaday, markaasaa codkiisii dib ugu soo laabtay, markay malaa'igtii samada isaga ku soo dhowaynayeen, "oo bal eega had iyo goor ayaan idinla joogaa xataa ilaa wakhtigu dhammaado." Matayos 28:20. Wuxuu samada aaday isagoo la-haa isla jidhkiisii Aadanaha oo kale. Waxayna xertiisii garanayeen inuu tegayo carshiga Ilaah, isagoo weli ah saaxibkood iyo Badbaadiyahoodii; oo naxariistiisiina ay weligeed beddelmayn; oo isaga weli lala aqoonsan ayey Aadanaha dhibbaysan. Ilaah hortiisa wuxuu ku soo bandhigayey waxyaabihii dhiiggiisii qaaliga ahaa uu ku qabtay, isagoo tusayey

gacmi hiisii iyo lugahiisii la dhaawacay, iyagoo ah xusuustii qiimihii [55]
uu ku bixiyey kuwa uu badbaadiyey. Waxay xertu garanayeen inuu u tegay inuu iyaga meel u diyaariyo, oo uu mar labaad soo noqon doona oo iyaguna qaadi doona.

Markay tukanayaan oo kulmi jireen Ciise intuu samada aaday ka dib, waxay Aabaha ku baryi jireen Magaca Ciise. Iyagoo aad u khushuucsanna ayay Ilaah u tukan jireen, waxayna ku celcelin jireen hubaasha ahayd, "Haddii aad wax uun weydiisataan Aabbaha, magacayga ayuu idinku siin doonaa. Tan iyo imminka waxba magacayga kuma weydiisan. Weydiista, waanad heli doontaan, inay farxaddiinnu buuxsanto." Yooxanaa 16: 23, 24. Rumaysadkooda ayaa sii kordhayey iyagoo si dhab ah u aaminsanaa, "Waa Ciise Masiix kii dhintay, oo haddana kuwii dhintay ka sara kacay, oo Ilaah midigtiisa jooga, oo haddana inoo duceeya innaga." Rooma 8:34. Maalintii Beenteskostena waxay heleen Ruuxii uu Masiixu yidhi, Isagu "Wuu idinku jiri doonaa." Wuxuu kaloona isla Ruuxaas ka yidhi, "Waxaa idiin roon inaan tago. Haddaanan tegin, Gargaaruhu idiinma iman doono, laakiin haddaan tago waan idiin soo diri doonaa." Yooxanaa 14:17; 16:17.

Tan iyo maalintaas laga soo billaabo, Masiixu wuxuu si joogta ah ugu jirayay qalbiyada carruurtiisa. Sida ay isaga ula joogi lahaayeen, way kaga sii dhowaanaysay sidii uu ahaan jiray markuu iyaga shakhsi ahaan ula joogi jiray. Iftiinkii iyo jacaylkii, iyo awoodii Masiixa ee iyaga ku dhex jirtay, ayaa iyaga ka dul iftay, markaasaa dadkii iyaga arkay, "yaabeen; markaasay garteen inay Ciise la joogi jireen." Falimaha Rasuullada 4:13. Siduu xerta ku ahaan jiray Masiixa, wuxuu maantana sidaas oo kala la jecel yahay inuu sidaa oo kale u ahaado carruurtiisa; markuu u ducaynayey xertii yarayd ee isaga isugu soo ururay, wuxuu yidhi, "Kuwan oo keliya kuu baryi maayo, waxaanse weliba kuu baryayaa kuwa igu rumaysanaya hadalkooda aawadiis." Yooxanaa 17:20

Ciise innaga qudheenna ayuu inoo duceeyay, wuxuuna ku baryootamay inaan isaga mid la noqonno, sida uu isaguba mid ula yahay Aabaha. Waa midnimo aad u yaab badan tan! Badbaadiyuhu wuxuu isaga iska yidhi, "Wiilku keli ahaantiis waxba ma samayn karo." "Aabbahase igu jira ayaa shuqulladiisa sameeya." Yooxanaa 5:19; 14:10. Haddaba hadduu Masiixu qalbiyadeennu ku jiro, wuxuu
inooga dhex shaqayn doonaa, "waayo, waa Ilaah kan idinkaga [56]

dhex shaqeeya xagga doonista iyo xagga shuqulkaba farxaddiisa wanaagsan aawadeed." Filiboy 2:13. Waxaan u hawshoon doonnaa siduu isagu u hawshooday oo kale; waxaana soo bandhigi doonnaa isla Ruuxii uu isagu muujiyey. Markaan isaga jeclaanno, oo ku jirno, waa in "laakiinse innagoo si jacayl ah runta ugu hadlayna aynu wax walba ku korno xaggiisa, kan madaxa ah oo ah Masiixa." Efesos 4:15.

# 9—Shaqada Iyo Nolosha [57]

Ilaah waa isha nolosha iyo iftiinka iyo farxadda aduunyada. Sida iftiinka qorraxda ka soo baxa oo kale, sida biya ka soo durduraya il biyo ah, barako ayaa Ilaah ka soo daadataa iyadoo ku soo daadanayso abuurkiisa oo dhan. Meel kasto oo ay nolosha Ilaah ku jirto qalbiyada dadka, kuwa kale ayaa sii gaarsiinaysaa jacayl iyo barako.

Farxadda Badbaadiyaheenna waxay ahayd sare u qaadidda iyo furashada kuwa lumay. Sababtan aawadeed ayuu noloshiisa ugu tirin mid aad ula wanaagsan isaga, laakiin wuxuu u adkaystay iskutalaabta, isagoo aan ka cabsanayn ceeb iyo foolxumo. Sidaas oo kale Malaa'igaha aan dembiga lahaynna waxay ku hawshoo yihiin farxadda kuwa kale. Tan ayaa ah farxadooda. Taas oo ah tan ay qalbiyada iyaga keliya wax isla jecel ay u arkaan inay tahay dullinimo, inay u adeegaan kuwa culaabaysan oo siyaabo iyaga uga duwan, ayaa ah shaqada ay qabanayaan Malaa'igaha aan dembiga lahayn. Ruuxii Masiixa ee ka ahaaday xaggii kii isaga naftiisa u huray dadka, ayaa ah ruuxa samada ka jira oo ah carafkeeda. Waana isla Ruuxan ruuxa ay kuwa Ciise raaca lahaan doonaan, iyo shaqada ay qaban doonaan.

Marka jacaylka Masiixa ka buuxsamo qalbiga, sida cadar udgoon badan ma qarsoomi karo. Saameyntiisa quduuska ah waxay wada saameyn kuwa dhamaan inoo soo dhowaada. Ruuxa Masiixa ee qalbiga waa sida il biyo ah oo ku taalla meel lamadegaan ah, ishaas biyaha ah oo durduraysa inay gaarto dhamaan oo ka dhigaysa kuwa lumaya inay u diyaargaroowaan inay ka cabbaan biyaha nolosha.

Jacaylka Ciise wuxuu inagu dhiiragelinayaa inaan u hawshoonna isaga aawadii, siduu ugu hawshooday barakada iyo kor u qaadidda Aad-anaha. Wuxuu inagu hor seedayaa jacayl, dabacsanaan, aan u muujinno dhamaan waxa uu Ilaah abuuray oo idil.

Badbaadiyaha noloshiisii aduunyada ma ayan ahayn mid isaga keliya ku koobnayd, laakiin habeen iyo maalin wuxuu u hawshoonayey sida uu ku badbaadin lahaa Aadanaha lumay. Laga soo

billaabo xeradii uu ku dhashay ilaa dhakada wuxuu ahaa mid aad
[58] isu-hooseysiinayey, oo aan doonayn in laga dul qaado xanuun, iyo daal, iyo hawl badan. "sida Wiilka Aadanahu uusan ugu iman in loo adeego laakiin inuu adeego iyo inuu naftiisa dad badan furashadooda u bixiyo." Matayos 20:28. Tan ayaa ahayd waxa ugu weyn oo ay noloshiisa qiimayn jirtay. Wax alla wixi ka soo haray hortiisa qiimo weyn kuma lahayn. Jidhkiisa iyo dhiiggiisa ayay ahaayeen wixi qaban lahaa doonista Ilaah oo dhamaystiri lahaa hawshiisa. Shaqooyinkiisa wax isla weyni iyo kibir ah kuma ayan jirin.

Sidaas oo kale kuwa ka qayb qAadanaya nimcada Masiixa waxay diyaar u ahaanayaan inay naftooda huraan, si kuwa kale ee uu Ciise u dhintayna ay qayb uga qaataan hadiyada jannada. Way sameynayaan wax kasta oo ay karaan si ay dunida uga dhigaan meel wanaagsan oo ay joogi karaan. Taas waxay tusaysaa in qofku si dhab ah u badbaaday. Dadka Masiixa uma iman karaan ilaa ay kuwa badbaaday qalbiyadooda diyaar uga ahaadaan inay la qaybsadaan kuwa lunsan saaxibka wanaagsan oo ay leeyihiin; kan sida dhabta u badbaaday runta iyo badbaadada quduuska ah qalbigiisa kuma qarsoonaan karaan. Haddii aan huwanno xaqnimada Masiixa oo inagu buuxsanto farxadda ka timaada Ruuxiisa ? jiro, nabaddeenna ma ceshan karno oo ma aamusi karayno. Haddii aan dhadhaminnay oo aan aragnay in Rabbigu wanaagsan yahay waxaan lahaanaynaa waxaan dadka kale u sheegno. Sidi Filibos markuu helay Badbaadiyaha, kuwa kale ayaan ugu yeeraynaa inay badbaadada Rabbiga helaan. Waxaan doondoonaynaa inaan iyaga tusinno wanaagga uu Masiixa leeyahay iyo waxyaabaha qarsoon ee dunida imanaysa. Waxaan lahaanaynaa jacayl badan oo aan ku dooni doonna inaan ku soconno waddadi uu Ciise ku socon jiray. Waxaa laynaga doonayaa in aan si weyn injiilka ugu shaqeyno ilaa marka dambe kuwa inaga ag dhow "Arkaan Wanka llaah ee dembiga dunida qaadaya." Yooxanaa 1:29.

Dadaalka aan ku doonayna inaan ku barakadayno kuwa kalena wuxuu ahaanayaa mid innaga barako inoo noqda. Tan ayay ahayd ujeedada Ilaah markuu ina siinayey door aan ka cayaarno qorshihii furashada. Wuxuu dadka siiyey fursadda ah inay ka qayb qaataan dabiiciyadda Rabbaaninimada, markay walaalladooda kale ay gaadhsiiyaan barakada. Tan ayaa ah maamuuska ugu sarreeya, farxadda ugu weyn, in Ilaah uu suurta gal ka dhigay inuu dadka

barakadeeyo. Kuwa ka qayb qaata shaqada jacaylka waxay u sii dhowaanayaan abuurahooda.

Ilaah hadduu doono Injiilka iyo waxa kale uu doonayo oo kale oo [59]
dhan wuxuu u dhiibi karay malaa'igaha. Haduu doonayona wuxuu isticmaali karay siyaabo kale. Laakiin jacaylkiisa ayuu inooga dhigay inaan kala qayb qaadanno, isaga iyo malaa'igaha iyo Masiixa, si aan qayb uga qaadanno barakada, farxadda, sare u qaadidda, adeeggiisa.

Masiixa wuxuu inooga naxariisanayaa markaan la wadaagno Siliciisi. Si kasta oo aan iskugu hooseysiinno inaan kuwa kale u adeegno, kan adeegaya waxay qalbigiisa ku xoojisaa wanaag iyo jacayl, isagoo u sii dhowaanaya kii dunida oo dhan furtay, kaas, "isagoo hodan ah uu aawadiin miskiin u noqday, inaad miskiinnimadiisa hodan ku noqotaan." 2 Korintos 8:9. Waana marka keliya oo aan fulinno waxa Ilaah inaga doonayo markay nolosheenna barakoobayso.

Hadii aad u shaqaysid sida uu Ciise xertiisa ka doonayay oo kale, oo aad kuwa badan injiilka la qeybsatid, waxaad maalin walba sii jeclaynaysaa aqoonta Rabbiga, waxaadna u harraadi ood u gaajon doontaa xaqnimada. Ilaah ayaa doondooni, rumaysadkaagana wuu xoogoobayaa, naft Aadana waxay doontaa ceelka badbaadada. Markaad dhibaatooyin iyo tijaabo aad la kulantid waxaad ku carari doontaa Kitaabka Quduuska ah iyo salaad. Waxaad ku kori nimco iyo aqoonta Masiixa, waxaad heli doontaa waayoaragnimo.

Jacaylka inaan u adeegno kuwa kale wuxuu ina siinayaa xassiilooni gudaha ah, degganaansho iyo inaan lahaano Masiixa ekaantiisa, wuxuuna inoo keenayaa farxad iyo nabad. Damacyadeenna ayaa kor u kacayaa oo waxaan maalinba maalinta ka dambeysa sii jeclaanaynaa inaan ku barbaarno ekaatniisa. Meelna uma haynayno bakheelnimo.

Kuwa ku socda nimcada Masiixiyadda waxay ku xoogoobi doonaan shaqada Ilaah. Waxay lahaan doonaan fikir cad oo nolosha ruuxiyadda, Ruuxa Ilaah oo ruuxooda ku dul jira, ayaa nafta ka dhigayaa inay mid la ahaato tan Ruuxa Ilaah. Kuwa si daacad ah ugu adeega kuwa kale waxay ka shaqeynayaan badbaadadooda. Sida keliya ee aan ugu kori karayno nimcada waa markaan qalbiyadeenna u diyaarinno inaan u gargaarno kuwa gargaarka inooga baahan. Kuwa aqbala nimcada Masiixa oo keliya oo aan waxba u samayn

Rabbiga, waa sida iyagoo doonaya inay wax cunaan shaqo la'aan. Ruuxiyaddana sida nolosha caadiga ah oo kaleba, tan waxay ugu [60] dambeynta keenaysaa burbur iyo baaba'a. Ninka diida inuu lugahiisa ku socda wuxuu lumin doonaa awooda ku socodkooda. Sidaas oo kalena Masiixiga diida inuu isticmaalo awooda uu Ilaah siiyey, ma waynayo oo keliya inuu Masiixu ku kora, laakiinse xataa wuxuu luminayaa xooggii uu hore u lahaa.

Kiniisadda Ilaah waa wakiilka Ilaah ee badbaadada kuwa lumaya. Waa in doonisteedu ay ahaato oo keliya inay injiilka gaadhsiiso dunida oo dhan. Amarkaasna waxaa laga doonayaa Masiixiyiinta oo dhan. Qof kastaa inta uu karo uu fursad u lahaado, waa inay ku fuliyaan Badbaadiyaha amarkiisa. Jacaylka Masiixa, ee laynoo muujiyey ayaa inaga dhigayaa inaan ahaanno kuwa u qaamaysan kuwa aan isaga garanayn dhamaan. Ilaah wuxuu ina siiyey iftiin, innaga keliyana inooguma uusan tala gelin laakiin inaan gaadhsiinno kuwa kale.

Haddii ay kuwa Masiixa raacsan ku baraarugaan adeegga Rabbiga, waxaa jiri lahaayeen kumannaan injiilka ku wacdinaya meelaha uusan gaadhin weli. Kuwa shaqada qaban karina, waxay ku taageeri dhaqaale ahaan, iyo naxariis ahaan iyo inay u tukadaan kuwa ku hawshaysan shaqada adeegidda. Waxaana jiraysaa hawl badan oo Masiixa loo qabto dalalka Masiixiyiinta ay joogaan.

Ma aha keliya inaan aadno dalalaka aan Masiixa laga aqoon, ama aan guryaheenna ka tagno, haddii ay guryaheenna agtooda joogaan kuwa aan Masiixa rumaysan oo la gaadhsiin karo injiilka. Waxaan hawshaas ka qaban karnaa guryaheenna agtooda, iyo kiniisadaha, iyo waxaan gaadh-siin karnaa injiilka kuwa aan la shaqayno oon la macaamiloonno.

Intii cimrigiisa badnayd ee badbaadiyaheenna wuxuu ku qaatay gurigi Aabihiisii Yusuf kii fuundiga ahaa ee magaalada Naasarayd. Malaa'igo ayaa u iman jiray Rabbiga markuu dadka dhex joogi jiray, isagoo aan la aqoonsanayn oo aan la maamuusayn. Wuxuu adeeggiisa u qabanayey sidii markuu bogsiinayey kuwa buka oo uu biyaha badda ku dul soconayey ee Galili. Sidaas oo kale innagoo nolosheenna hooseysiinayno waxaan la socon oon la shaqayn karnaa Ciise.

Rasuul Bawlos wuxuu leeyahay, "Walaalayaalow, nin kastaa sidii loogu yeedhay ha sii ahaado. isagoo Ilaah la jira." 1 Korintos

7:24. Kan ganacsanayo waxaa laga doonayaa inuu ganacsigiisa u qabto si Rabbiga ku ammaanmayo socodkiisa daraadiis. Hadii uu yahay mid Masiixa si dhab ah u raacsan wuxuu hawlihiisa oo dhan ku qabanayaa si injiilka uu ku gaari karo qof kasta oo dadka ugu [61]
muujin karo Masiixa. Kan baabuurta iyo garaashyada ka shaqeeya wuxuu adeege wanaagsan u noqon karaa kii buurihii Galili isku hooseysiiyey. Ku kasta oo ku dhawaaqa magaca Masiixa waa inuu ka shaqeeyaa wanaagga kuwa kale, si kuwa kale markay arkaan shuqulladiisa wanaagsan ay u ammaanaan Rabbiga oo ah abuuraha iyo Badbaadiyaha.

Kuwa badan ayaa waxay ku andacoodaan inayan qaban karin shaqada Rabbiga waayo kuwa kale ayaa fursada wanaagsan haystaan. Waxay ku doodaan fikirka ah in kuwa aqoonta badan Rabbiga ku leh oo keliya laga doonayo inay Rabbiga u adeegaan. Waxaa dad badan ka dhaadhacsan in kuwa gaar ah oo keliya Ilaah siiyo aqoon oo kuwa kalena aan loogu yeedhin arriintaas iyada ah. Laakiin masaalkii Ciise sidaas lagama wadin. Markuu Sayidkii guriga u yeedhay shaqaalaha guriga, wuxuu ku kastaa siiyey qayb uu ka shaqeeyo.

Ruuxeenna oo jacayl ka buuxo oo is-hooseysiin leh ayaan "Rabbiga ugu adeegi karnaa." Kolosay 3:23. Haddii uu jacaylka Ilaah ka buuxo qalbiga, nolosheenna ayuu ka muuqanayaa. Badbaadada Rabbiga ee macaan ayaa ina hareeraynaysa, saameynteennana way horu-maraysaa wayna barakoobaysaa.

Waa inaadan sugin fursad weyn ama waxyaabo la yaab leh inay noloshaada ku dhacaan intaadan Rabbiga u adeegin ka hor. Waa inAadan ka fikirin waxay dunidu kaa malaysanaysa. Haddii ay noloshaada maalin kastaa ay markhaatfur u tahay kaamilnimada iyo daacadnimada rumaysadkaaga, oo dadka kalena ay og yihiin inaad diyaar u tahay wanaaggooda iyo horu-markooda, dadaalkaaga meel cidlo ah kuma dhacayo.

Kan ah midka ugu hooseeya oo ugu faqiirsan ee ka mid ah xerta Ciise, wuxuu kuwa kale u noqon karaa barako dadka kale. Waxaa laga yaabaa inay iyaga garan waayaan inay wax wanaagsan Rabbiga u qabanayaan iyo in kale, laakiin saameyntooda ayan dareensanayn ayay ku keeni karaan barako aad u qota dheer oo abaalmarinteedu ay arki doonaan oo keliya maalinta abaalmarinta ugu dambeysa. Iyagu hadda ma dareensano mana garanayaan inay shaqo weyn

Rabbiga u qabanayaan. Ma aha inay iyaga culaab iskaga dhigaan inay guulaystaan. Waa inay si hoos ahaan ah hore ugu socdaan, iyagoo Ilaah doonistiisa iyo wuxuu siiya ku shaqeynayaan, nolos-
[62] hoodana ma ahaanaysa mid baaba'ada. Naftooda ayaa waxay ku sii kori doontaa e-kaanta Masiixa; waa kuwa Rabbiga kula haw-shoonaya noloshoodan, waxayna ahaan doonaan kuwa mutaysta farxadda nolosha imanaysa.

# 10—Aqoonta Ilaah

[63]

Siyaabo badan ayuu Ilaah doonayaa inuu isugu kaayo muujiya oo inoola xidhiido. Dabiiciyadda ayaa dareemaheenna ula hadlaysaa si joogsi lahayn. Qalbiga furan wuxuu la yaabi jacaylka iyo ammaanta Ilaah iyo sida uu abuurkiisa yahay Dhegta diyaarka u ah inay dhegaysato waxay wax ka maqli kartaa oo ka fahmi kartaa sida uu Ilaah ugu hadlo uunkiisa. Dhirta cagaarka ah, geedaha waaweyn, ubaxyada iyo waxyaabaha isha u qurxoon, daruuraha muuqanaya, roobka soo da'aya, ammaanta samooyinka, waxay dhamaan la wada hadlayaan qalbiyadeenna, waxayna inoogu yeedhayaan inaan aqoonsanno kii sameeyay.

Badbaadiyaheenni wuxuu casharradiisa ku salaysiinayey waxyaa-baha dabiiciyadda. Geedaha, haadda hawada, ubaxyada, kuraha, lagaha, iyo samooyinka quruxda badan iyo dhacdooyinka maalin kasta, waxaa dhamaantood lagu xidhiidhin jiray runta, si casharradiisa lagu xusuusan karay, xataa iyadoo uu Ciise daallanaa.

Ilaah wuxuu carruurtiisa ka doonayaa inay uga mahad celiyaan oo ku farxaan abuurkiisa, iyo quruxda uu ku mannaystay dhulkeenna. Ilaah wuxuu jecel yahay waxa quruxsan oo wanaagsan, wuxuu ka sii jecel yahay dabeecaddenna oo quruxsanaato; wuxuu inaga doonayaa inaan daahirsanaan iyo is-hooseysiin ku dhaqanno, iyo nimcada ubaxyada.

Haddii aan dhegaysanno Ilaah abuurkiisa waxa ay inagula had-layaan waxay inagu barayaan inaan Ilaah adeecno oon aaminno. Laga soo billaabo xiddigaha samada ka dhalaalaya oo wadooyinkooda ku soconaya qarni ka qarni, iyo waxa abuurka ugu yar sida dhuuryo casada oo kale, dhamaan waxay wada adeecaan kii abuuray doonistiisa. Ilaahna wuu ilaaliyaa oo dhawraa wax kasta oo uu abuuray. Kan gacantiisa ku haya duniyooyinka aan la koobi karin, wuxuu kaloo ilaalinayaa shimbirka ugu yar markuu codkiisa ku qaylinayo. Markay dadku u baxaan danahooda nolol maalmeed, iyo markay tukanayaanba; markay habeenka seexan ayaan, iyo markay aroorta hore soo toosaanba; markuu ninka hodanka ah qasrigiisa

ku dhex cunteynaya, iyo markuu ninka faqiirka ah carruurtiisa ku soo ururiya saxanka faaruqa ah dushiisa, dhamaan Aabaha jannada
[64] jooga wuu la socdaa. Illin daadataa ma jirtoo oo Ilaah uusan garanyn ama la socon. Farxad iyo doollacadees uusan arkaynna ma jiraan.

Haddii aan si buuxda u rumaysanna waxyaabahaas oo dhan, damacyadeenna iyo hamigeenna oo dhan waa la daboolayaa. Nolosheen-na cadho kama buuxaysa sida ay hadda tahay oo kale; waayo, wax kastaa yar iyo weynba waxay ku jjiraan gacanta Ilaah, kaas oo ayan ka yaabin ama culaysan waxyaabaha dunida oo dhan. Goortaas ayaan waxaan nafteenna u helaynaa nasiino ay mudo dheer kuwa badan doonayeen.

Markay noloshaada ku faraxda quruxda dhulka, waxaad ka fikirtaa aakhiro, meeshaas oo ayan jiri doonin dembi iyo dhimasho toona; oo abuurkuna uusan xidhan doonin hooska habaarka. Qiyaastaadu iyo fikirkaadu ha cabbireen sawirka guriga kuwa badbaaday, waxaadna xusuusataa in ay meehaas ka wanaag badnaan doonta qiyaas kasta oo ay naftaada qiyaasi karto. Hadiyadaha Ilaah waxaa keliya oon ka aragnaa wax yar oo ammaantiisa kamid ah. Sida qoran, "Waxyaalo aanay ishu arkin, oo aanay dhegtu maqlin. Oo aan qalbiga dadka gelin, Wax kastoo ay yihiinba, Ilaah baa u diyaariyey kuwa isaga jecel." 1 Korintos 2:9.

Kuwa gabya kuwa abuurka ku takhasusay waxyaabo badan ayay ka sheegi karaan abuurka, laakiin qofka Masiixiga ayaa ah kan keliya oo dareemi karo fahmi karona quruxda abuurka, waayo, wuxuu aqoonsan yahay Aabaha abuurkiisa wuxuuna jacaylkiisa ka dhex arkayaa ubaxyada iyo dhirta iyo geedaha oo dhan. Ma jiro qof si dhab ah u fahmi karo oo u dareemi karo quruxda iyo muhiimadda uu abuurku leeyahay iyo buuraha, iyo webiyada iyo badda, haddii ayan dadka waxyaabahaas ku eegin jacaylka uu Ilaah Aadanaha u qabo.

Ilaah wuxuu inagula hadlaa shuqullada gacmihiisa iyo xagga Ruuxiisa qalbiyadeenna. Daruufaheenna iyo hareeraheenna, iyo waxyaa-baha ku dhacaya nolosheenna maalin kasta, waxaan arkaynaa casharro wax tar u leh nolosheenna haddii aan qalbiyadeenna u furno inaan ku kala garanno. Daa'uud mar uu ka hadlayey sida Ilaah wax kastaa inoo siiya oo inoogu wax bara wuxuu yidhi, "Dhulka waxaa ka buuxda Rabbiga raxmaddiisa." "Ku alla kii caqli lahu

wuu dhawri doonaa waxyaalahan, Oo iyana way ka fiirsan doonaan Rabbiga naxariistiisa." Sabuurrada 33:5; 107:43.

Ilaah wuxuu kaloo inagula hadlaa ereygiisa. Halkan waxaa ku cad muujinta saxda ah ee dabeecaddiisa, iyo sida uu dadka ula dhaqmo, iyo hawshii weynayd ee furashada. Halkan waxaa horteenna si bayaan ah loogu furay taariikhdii Nebi Ibraahim, iyo nebiyadii kale, iyo kuwii kale ee quduusiinta ahaa. Waxay ahaayeen niman "dabiicaddeenna oo kale leh." Yacquub 5:17. Waxaan marar badan aragnaa siday ugu dhibtoodeen xaaladaha nolosha sideenna oo kale, iyo siday jirrabaadyo ugu dhaceen sideenna oo kale, welina qalbiyadooda uga xoogeysteen oo ugu guulaysteen xagga nimcada Ilaah; markaan iyaga eegnona waxaan ku xoogoobeynaa xagga dadaalka aan ugu jirno xaqnimada. Markaan akhrinno waayoaragnimadoodii, iyo iftiinka iyo jacaylka iyo barakada ay haysteen, iyo waxyaabaha ay ku qoreen nimcada la siiyey awgeed, ruuxii iyaga dhiirragelinayey ayaa inagana ina dhiirragelinayaa, oo qalbiyadeennana ka dhigayaa kuwooda oo kale, siday iyaga Ilaah ula socon jireen oo kale. [65]

Ciise mar uu ka hadlayey qoraallada Axdigii Hore iyo sida ay ugu rumoobeen Axdiga Cusub wuxuu yidhi, "waana iyaga kuwa ii marag furayaa." Waa Badbaadiyaha kan rajadeenna nolosha weligeed ah aan ka rajaynayno. Yoox 5:39. Haa run ahaantii Kitaabka Quduuska ah wuxuu inta badan ka hadlaa Masiixa. Laga soo billaabo abuurki, waayo, "oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis." Ilaa ballanka ugu dambeeya, "Oo bal eeg. anigu dhaqsaan u imanayaa" Waxaan ku arkaynaa shuqulladiisa oo waxaan ku dhegaysanaynaa codkiisa. Yoox 1:3; Muuj 22:12. Haddii aad doonaysid inaad Badbaadiyaha la kulantid, baro oo akhriso Qoraallada Quduuska ah.

Qalbiga oo dhan waxaad ka buuxisaa ereyada Ilaah. Waayo ereyadiisa waa biyaha noole, kuwaas oo harraadka ku haya kaa saari kara. Waa kibista nool ee samada ka soo degay. Ciise wuxuu yidhi, "Haddaydnaan jidhkii Wiilka Aadanaha cunin oo dhiiggiisa cabbin nolosha kuma lihidin gudihiinna." Isaguna wuxuu isu-faahfaahiyey mar uu yidhi, "Erayadii aan idinkula hadlayna waxay yihiin ruux iyo nololba." Yooxanaa 6:53, 63. Jidhkeenna wuxuu ku koraa waxaan cabno oo cunno; sida ay dabiicayadda caadiga ah tahay, sidaas oo

kale ayaa ruuxiyaddana tahay: Waa wixi aan ku khalweyno oo baranno waxa nolosheenna ruuxiyadda ah wax tarayo.

[66] Qodobka furashada waa mid ay Malaa'igaha doonayaan inay ogaadaan; wuxuuna ahaan doonaa aqoonta iyo heesta kuwa badbaaday ilaa weligeed iyo weligeed. Miyaanay ahayn inaan imminka baranno oo fahanno? Naxariista iyo jacaylka Ciise oo aan la qiyaasi karin, qurbaankii innaga beddelkeenna loo sameeyay, waxay waxyaabahaas dhammaan inoogu waacayaan inaan aad uga fikirno Ilaah iyo ereyadiisa. Waa inaan ku dayanno oo lahaanno dhaqanki kii ina furtay ahaana dhexdhexaadiyaheenna. Waa inaan aad uga fikirno oo ka shaqeyno sidii uu u shaqeynayey kii u yimid inuu dadkiisa dembiyadooda ka badbaadiyo oo kale. Markaan eegno waxyaabaha sare, rumaysadkeenna iyo jcaylkeenna way sii xoogoobayaan, tukashadeennana Ilaah wuu aqbalayaa, waayo, waxaa tukashadeenna ka buuxsameysaa rumaysad iyo jacayl. Salaadaheenna waxay ahaanayaan kuwa macquul ah, oo Ilaah jacal ku jiro. Markaas waxaa sii jiraysaa kalsooni buuxdo oo Ciise aannu ku sii qabayno, iyo inaan sii jeclaanno badbaadada kuwa lumay.

Markaan eegno daahirsanaantii iyo kaamilnimadii Badbaadiyaheenna, waxaan sii jeclaanaynaa inaan ku beddelmanno e-kaantiisa oo kale. Naftu waxay u gaajoonaysaa oo u harraadaysaa inay noqoto sidiisa oo kale. Inta uu fikirkeennu Ciise yahay, ayaa ah intaan inta badan isaga magaciisa sheegayno oo kuwa kalena la qeybsanayno.

Kitaabka Quduuska ah looma qorin oo keliya kuwa aqoonta leh oo keliya; laakiin waxaa loogu talagalay dadka caadiga ah. Runta Badbaadada ku saabsan waxay u caddahay sida qorraxda duhurka oo kale; kuwa aan arki doonina ma jiraan oo aan ka ahayn kuwa doonaya inay xukunkooda iyo hawadooda raacaan halki ay ka raaci lahaayeen doonista Ilaah. Waa inaanan qaadan markhaarifuridda dadka innagoo wax baridda Kitaabka Quduuska ah haysanno, laakiin waa inaan barannaa ereyga Ilaah. Haddii aan hawada kuwa kale raacnaa, waxaan daciifinaynaa xooggeenna iyo waxtarkeenna. Awooda maanka uu leeyahay way yaraan karaan haddii aan maanka lagu tababarin sida uu ku fahmi lahaa micnaha dhabta ah ee ereyga Ilaah. Dhinaca kalena maanka iyo maskaxda way sii weynaanayaan haddii lagu tarbiyeeya inay barbardhigaan qoraallada Kitaabka Quduuska ah, oo ay isu badhbadhigaan qoraallada Kitaabka Quduuska ah.

[67] Wax ka weyn ma jiro oo maanka ku kori karo oo aan ka ahayn

barashada Kitaabka Quduuska ah. Ma jiro buug kale uu sare u qaadi karo fikirka, oo iftiin siin karayo xubnaha jidhka sida cadceedda duhureed, oo ina fahansiin karayo Kitaabka Quduuska ah. Haddii ereyga Ilaah loo barto sida uu yahay in loo barto, dadku waxay lahaan lahaayeen maskax ballaadhan, iyo dhaqan wanaagsan, iyo ujeedo cabbiran kuwaas oo maanta inta badan aan la arag.

Laakiin waxba lagama faa'idayo Kitaabka oo si degdeg ah lagu akhriyo. Waxaa laga yaabaa mid inuu Kitaabka Quduuska ah wada akhriyo haddana uu arki waayo quruxda uu Kitaabka Quduuska ah wada leeyahay oo fahmi kari waayo micnaha gudaha ah. Haddii hal qeyb ah la akhriyo ilaa micnihiisa dhabta ah iyo xidhiidhkiisa badbaadada dhab inoo dhaco, ayaa ka qiimo badan in cutubyo badan oo waxba ina tarin ama micnahooda ina dhicin la akhriyo. Kitaabka Quduuska ah maalin walba hayso. Markaad fursad u heshid akhriso; qoraallada xusuustaada ku qabo. Xataa adigoo waddada socotid waxaad akhrin aayada Kitaabka Quduuska ah kamid ah, adigoo xusuustaada ku qabanaysid.

Xigmad ma heli karayno haddii aan ereyga Ilaah si gudaha ah u baranin. Qeybo ka mid ah Kitaabka ayaa laga yaabaa in si khaldan loo fahmo, laakiin waxaa jiraan kuwa kale oo micnahoodu lagu garan karin aragtida hore. Qoraalladu waa laysu barbardhigaa. Waa in si xad dhaaf ah loo baadhbaadhaa lana tukadaa. Barashada noocaas ahna run ahaantii abaal marin bay lahaan doontaa. Sida kan macdanta qodayaa uu macdanta dhulka hoostiisa uga soo saaro, sidaas oo kalena kan ereyada Ilaah baadhbaadhaa oo si guda ahaan ah u bartaa u fahmi doonaa micnahiisa gudaha ah, kuwaas oo kuwa runta indhaha iska tiraan ayan arki karayn. Ereyada waxyiga haddii qalbiga lagu dhex suga, waxay ahaanayaan sida webi ka soo durduraya durdurka nolosha.

Waa inaan Kitaabka Quduuska ah loo akhriyin tukasho la'aan. Inta aan baalashiisa furin waa inaan weyddiisannaa fahanka Ruuxa Quduuskaa, waana la siin doonaa ku kastaa oo weydiisto Ruuxaas. Markuu ninkii la odhan jiray Nataana'eel Ciise u yimid, Badbaadiyuhu wuxuu yidhi, "Bal eeg. kanu waa mid reer Israa iil oo run ah oo aan khiyaano lahayn." Nataana'eel ayaa ugu jawaabay, "Xaggee baad igu tiqiin?" Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, "Intaan Filibos kuu yeedhin, markaad geed kii berdaha hoostiisa joogtay, [68]
ayaan ku arkay." Yooxanaa 1:47, 48. Sidaas oo kale Ciise wuu inagu

arkayaa meelaha qarsoon ee salaadda haddii aan iftiinkiisa doondoonna, oo aan jeclaanno inaan runtiisa garanno. Malaa'igo xagga sare ka yimid ayaa la jiraya kuwa iyagoo qalbiyadooda hooseeyaa doondoona Ilaah iyo wanaaggiisa.

Ruuxa Quduuska ah wuxuu sarreysiiyaa oo amaanaa Badbaadiyaha. Waa shaqadiisa inuu Masiixa soo bandhigo, iyo daahirsanaanta xaqnimadiisa, iyo Badbaadada weyn ee aan isaga xaggiisa ku leennahay. Ciise wuxuu leeyahay, "waxayguu qaadi doonaa, wuuna idiin sheegi doonaa." Yooxanaa 16:14. Ruuxa runta ayaa ah macallinka keliya ee saxda ah ee dadka runta bari karaya. Intee ka badan ayuu Ilaah dadka jeclaan lahaa hadduu Wiilkiisa u bixiyey inuu iyaga u dhinto, oo Ruuxiisuna uu ka dhigay inuu ahaado macallinka iyo hagaha dadka.

## 11—Faa'idooyinka Tukashada



Xagga dabiicadda iyo muujinta, iyo xagga wax baridda, iyo xagga Ruuxiisa Quduuska ah ayuu Ilaah inagula hadlaa. Laakiin kuwaas keliya inaguma filno; waxaa laynaga doonayaa inaan qalbiyadeenna isaga u furno. Si aan u lahaanno nolol iyo xoog xagga ruuxiyadda, waa inaan maalin walba Aabaheenna samada xidhiidh la lahaannaa. Maankeenna wuxuu u sii dhowaanayaa isaga; waxaana sii fahmaynaa shuqulladiisa, naxariistiisa iyo barakooyinkiisa; laakiin taas micnaheeda maaha in aan si dhab ah xidhiidh ula yeelannay. Si aan Ilaah xidhiidh gaar ahaanayd ula yeelanno waa inaan leennahay wax aan isaga ku odhan karno, ee xagga nolosha.

Tukashadu waxay qalbiga u furtaa Ilaah sida saaxib oo kale. Tukashadu muhiimddeedu maaha inaan Ilaah is garansiinayno, laakiin waa inaan isaga isa siinayno oo u guddoomayno. Tukashadu Ilaah ma soo hooseysiinayso, laakiin innaga ayay sare inoo qaadaysaa innagoo Ilaah u dhowaanayno. Ciise markuu dhulka joogay, wuxuu xertiisa baray sida loo tukado. Wuxuu iyaga faray inay waxyaabaha ay maalin kastaa u baahan yihiin ay Ilaah horgeeyaan, oo waxyaabaha ay ka fikirayaan oo dhan isaga dusha kaga tuuraan. Hubaasha uu siiyey oo ahayd in salaadahooda la aqbali doona isla hubaashaas ayuu inaguna ina siiyey.

Ciise markuu dunida joogay, had iyo goor wuu tukan jiray. Badbaadiyaheenna wuu aqoonsan yahay dhibaatooyinkeenna iyo waxa aan u baahannahay oo dhan, sidaas aawadeed wuxuu inoo noqday mid wax walba ina siiya oo inoo dooda, isagoo Aabahiis mar walba weyddiisanaya xoog hor leh, si uu uga guulaysto tijaabo kasta oo ku timaadda. Waa tusaalaheenna wanaagsan ee wax kasta. Waa walaalkeen xagga dhibaatada, "isagoo ah mid si walba loo jirrabay;" laakiin isagoo ah mid aan dembi lahayn dabiicaddiisa way ka soo duubmatay xumaanta; wuxuu u adkaystay dhibaatooyin iyo Silic, ee dunida dembiga leh. Ciise Binu-aadmi ni madiisii waxay inoo sahashay salaadda inay inoo ahaato fursad. Wuxuu Aabahiis ka helay qaboownaan iyo farxad. Haddaba haddii Badbaadiyihii adu-

unka, Wiilka Ilaah, uu tukaday, intee in ka badan ayaa innagoo
[70] Aadana dembiileyaal ah laynooga baahan yahay inaan tukanno oo Ilaah barinno?.

Aabaheenna samada jooga wuxuu doonayaa inuu barakooyinkiisa buuxnaantooda ina siiya. Waa fursadeenna inaan durdurka biyaha uga cabno si jacayl badan. la yaab ma lahan inaan inteenna badan mudo yar tukanaa, Ilaah wuxuu doonayaa baryadeenna aqbalo oo maqlo markaan ahaanno carruur is-hooseysiinayso, laakiin inta badan innaga ayaa ka caga jiidaynaa inaan Ilaah ogeeysiinno waxa aan u baahannahay. Malaa'igaha maxay ka malaysan karaan Aadanaha dhulka jooga, kuwaas oo ah kuwa jirrabaadyo ku dhaca, marka qalbiga Ilaah ee uu jacaylku ka buuxa iyaga doondoona, isagoo diyaar u ah inuu siiyo wax walbo oo ay weydiistaan, laakiin weli Aadanaha Ilaah sida la doonayo uma tuugaan oo uguma tukadaan. Malaa'igaha waxay ku sujuudaan Ilaah hortiisa; waxayna jecel yihiin inay isaga u dhowaadaan. Xidhiidhka Ilaah ayay u arkaan inuu yahay farxaddooda ugu weyn; maxaad u malaynaysaa innagoo ah kuwa dhulka jooga, oo u baahan gargaarka Ilaah had iyo goorba, haddii aan iska soconno iftiinka Ruuxa Quduuska ah la'aatniis, iyo inaan isaga xidhiidh gaar ahaanayd la yeelanno.

Gudcurka kan sharka leh wuxuu daboola kuwa diida inay tukadaan. Jirrabaadaha iyo dhega ku hadalkiisa waxay kuwa xumaanta je-cel u horseeddaan dembi; waxaas oo dhanna waxay u dhacaan sababtoo ah ma doonayaan inay ka faa'idaystaan fursdaha uu Ilaah ku siiyey xagga tukashada. Maxay gabdhaha iyo wiilasha Ilaah uga caga jiidaan inay tu-kadaan, markay iyagoo of in salaaddu tahay furaha ku jira gacanta rumaysadka leh ee lagu furan karo khasnadaha samada, halkaas oo ay ku keydsan yihiin waxyaabo aan la qiyaasi Karin? Haddii aan si joogis la;aan u tukan weyno oo aan soo jeedi wayno waxaan khatar ugu jirnaa inaan ka lunno waddada saxda ah. Sheydaanku wuxuu had iyo goor doondoonaa inuu dadka ka fogeeya oo ka xidho waddada jannada loo maro, si uu xoogga aan jirrabaadda kaga adkaanayno inooga daciifo.

Waxaa jiraan xaalada qaar ah oo Ilaah uu salaaddenna aqbali karayo. Tan koowaad waa markaan dareenno sidaan ugu baahannahay gargaarkiisa. Ilaah wuxuu inoo ballanqaadayd, "kii oomman biyaan ku shubi doonaa. Ruuxayga ayaan farcankiinna ku daadin doonaa" Ishacyaah 44:3. kuwa u gaajooda oo u harraada xaqnimada

aawadeed, oo Ilaah doondoona, waxay hubaal u lahaan karaan in [71]
la buuxin doona. Qalbiga waa in loo furo saameynta Ruuxa, haddii kale barakooyinka Ilaah lama heli doona.

Waxa aan aadka ugu baahannahay waxay ahaan lahayd inaan doondoonna mid innaga beddelkeen dhexdhexaadiye inoo ahaada. Laakiin taas waa in Rabbiga aan weydiisanno, wuxuu inagu leeyahay, "Weydiista oo waa laydin siin doonaa." Haddana "Kii aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyey, sidee buusan wax walbana inoola siin doonin isaga?" Matayos 7:7 Rooma 8:32.

Haddii aan qalbiyadeenna xadgudubyo ku hayno, oo aan ku dhegnaanno dembi aan og nahay oo aan qiran weyno dembiyadeenna Rabbiga baryootankeenna ma maqli doona; laakiin salaadda qalbiga is-hooseysiiya oo si joogsi la'aan u tukado waa la maqlaa. Xumaan kastaa oo hore loo sameeyay markan dib u saxno, waxaan ku kalsoonaan karnaa in Ilaah aqbali doona baryadeenna. Wax aan innaga sameynay Ilaah lama hor tagi karayno ama mudnaan aan Ilaah hortiisa ka leennahay ma jiro; waa mudnaanta Ciise tan ina badbaadin karaysa, waana dhiggiisa kan ina nadiifin karaya; laakiin waxaa laynaga doonayaa inaan shuruudaha Ilaah ka soo baxno.

Shuruudda kale oo salaadda lagu aqbali karayo waa rumaysad. "Oo rumaysad la'aantiis ma suurtowdo in isaga laga farxiyo, taas aawadeed kan Ilaah u yimaadaa waa inuu rumaysto inuu jiro oo uu yahay kan u abaalguda kuwa isaga doondoona." Cibraaniyada 11:6. Ciise wuxuu xertiisa ku yidhi, "Sidaa darteed, waxaan idinku leeyahay, wax kasta oo aad tukasho ku baridaan, rumaysta inaad hesheen oo way idiin ahaan doontaa." Markos 11:24. Soo maaha inaan ereyga Ilaah aaminno?

Hubaashu way weyntahay xadna ma laha, kii ballanqaadayna waa caadil iyo aamin. Markaan intaan tukanno aan bayadeenna la maqlin oo aan jawaab heli wayno, waa inaan rumaynaa inaan Ilaah weli aqbali doo-na baryadeenna oo inooga soo jawaabi doona. Waxaan nahay dad aad daciif u ah oo mararka qaar waxaan Ilaah ka barinnaa wax aan u maleynayna inuu khayr inoo yahay, Aabaheenna jannada joogana jacayl uu inoo qaba dartiis ayuu wuxuu inoogu beddelaa wax taas inooga khayr badan, oo haddii aan si ruuxiyan ah ku eegno aan u arki lahayn sida ay inoogu wanaagsan yihiin.
Markaan u malayno in baryootankeenna aan la maqlin, waa inaan ku [72]

dhegnaa ballanka; waayo, wakhtiga jawaabtu run ahaantii wuu iman doonaa, waxaana heli doonna barakooyinka aan aadka ugu baahannahay. Laakiin haddii aan mar walba u malayno in baryadeenna loo aqbali doona sidii aan u weyddiisannay, waa fikir khaldan. Ilaah waa mid xigmad badan oo aan khaldamin, wuuna ka nasahan yahay inuu ka reebto kuwa xaqa ah wax ay weyddiisteen. Haddaba ha ka cabsan inaad isaga tala saaratid, maadaamoo mararka qaar Aadan helayn jawaabta si deg deg ah. Ku kalsoonoow ballamadiisa la hubo. "weyddiista oo waa laydin siin doonaa."

Haddii aan shakinno, oo aan cabsanno, ama aan isku dayno inaan xalinno wax aanan garan Karin xalkiisa dhabta ah, innagoo aan rumaysad lahayn cabsi badan iyo shaki uun baan ka sii qaadaynaa. Laakin haddii aan Ilaah u nimaadno, innagoo gargaarkiisa doonayna oo u baahan isaga, innagoo isaga ugu imanayna sida dhabta ee aan nahay, oo weliba is-hooseysiinayna, rumaysadkeenna kalsoonaanta leh wuxuu waxyaabaha aan doonayna ogeeysiiyaa kan aqoontiisa aan la kooni Karin kaas oo u jeeda wax kastaa oo uu abuuray kuna maamula doonistiisa iyo ereygiisa, isagu wuu karaa inuu maqlo oohinteenna oo qalbiyadeenna uu iftin ka shido. Markaan qalbi daacad ah Ilaah ku barinno maanka Ilaah ayaan xidhiidh la yeelanaynaa. Waxaa laga yaabaa inuu si cad wejiga Badbaadiyaheenna inoogu muuqan waayo goorta uu jacaylkiisa iyo dabacsanaantiisa inoo muujinayo, laakiin dhab ahaantii jacaylkiisa iyo dabacsanaantiisa way inoo muuqanaysaa. Waxaa suurta gal ah inaanan dareemin taabashadiisa, laakiin gacantiisa run ahaantii way ina dul joogtaa iyadoo inoo naxariisanayso.

Markaan Ilaah weydiisanayno waa inaan qalbiyadeenna ka buuxinnaa jacayl iyo dembi dhaaf. Sidee baan ugu tukan karnaa, "Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan." Haddana qalbiyadeenna aan ugu hayn karnaa kuwa aan dembiyada ay inaga galeen u cafin? Matayos 6:12. Haddii aan doonayno in baryadeenna uu Ilaah maqlo oo aqbalo, waa inaan kuwa kale u cafinna sida aan doonayno in laynoo cafiyo.

Tukashada oo lagu samro waa shuruud ka mid ah sida uu Ilaah u aqbali doona. Waa inaan had iyo goorba tukannaa haddii aan doonayno inaan rumaysadka ku barbaarno. Waa inaan "tukashada
[73] wadiddeeda ku sii adkaysannaa," oo aan "Haddaba baryada ku sii

adkaada, idinkoo ku soo jeeda oo mahad naqaya." Rooma 12:12; Kolosay 4:2.

Butros wuxuu rumaystayaasha ku dhiirragelinayaa, "inay digtoonaadaan, oo tukashada ku feejignaadaan." 1 Butros 4:7. Bawloosna wuxuu ina farayaa, "Waxba ha ka welwelina, laakiinse wax kastaba baryadiinna Ilaah ku ogeysiiya tukasho iyo duco mahadnaqid la jirto." Filoboy 4:6. Yuudaasna wuxuu leeyahay, "laakiinse, gacaliyayaalow, nafsaddiinna ku dul dhisa rumaysadkiinna aad quduuska u ah, oo Ruuxa Quduuska ah ku tukada." Yuudaas 20. Tukashada aan joogsiga lahayn waa sida xidhiidh aan go'ayn loola lahaan karo, si nolosha Ilaah ay inooga soo daadato; Nolosheennana aan quduusnimo iyo daahirsanaan Ilaah ugu muujinno. Waa lama huraan in tukashada la joogteeyo; waa inayan waxba tukashada idinka hor joogsan. Waa inaad dadaal kasta aad sameysaa si aad xidhiidhka naftaad iyo Ciise u dhisdid. Fursad kastaa oo aad tukashada u heli kartaa waa inaad ka faa'idaysataa. Kuwa doonayaan inay xidhiidh gaar ahaanayd Ilaah la yeeshaan waxaa had iyo goor laga helaa meelaha tukashada, iyagoo daacad u ah inay qaynuunnada fuliyaan diyaarna u ah midhaha ay ka helaan inay gurtaan. Fursad kastaa oo ay ku heli karaan iftiinka samada ka imanaya way ka faa'idaystaan.

Waa inaan qoysaskeenna la tukanna innagoo aan illaawayn tukashada qofka keligiis ah, waayo, tan ayaa ah nolosha nafta. Nafta ma kori karayso haddii tukashada la inkiro. Inaan qoysaskeenna ama dad badan oo kale la tukanno keliya inaguma fillo. Waa in mararka qaar nafta iyada keligeed ah la hor geeya indhaha Ilaah. Tukashada qarsoon waxaa keliya oo maqli doonaa ama karayaa Ilaaha barayada iyo salaadaha aqbala. Dheg kale oo inay wax maqasho doonaysa waa inayan maqlin baryadaas qarsoon. Tukashada qarsoon naftu waxay ka fogaanaysaa waxyaabaha ku hareeraysan, naxdin iyo waxyaaba indhaha u roonna way ka xoroobaysaa. Si deggan oo feejignaan ku jirto ayay Ilaah u doondoonaysaa. Wax aad u macaan oo aad u raagaya ayaa ka imanaya kan waxa qarsoon oo dhan u jeeda, oo dhegtiisana ay diyaarka u tahay inay maqasho tukashada qalbiga ka imanaysa. Si degganaansho ah oo rumaysad ku jiro ayay naftu Ilaah xidhiidh ula yeelanaysaa, iyadoo uruursanaysa iftiin rabbaani ah si ay ugu sii xoogoowda oo uga adkaato colaadda shaydaanka. Ilaah ayaa ah dhismaheenna xoogga.

[74] Si qarasoon u tuko, markaad maalita hawlahaaga aadaysidna qalbigaaga Ilaah sare ugu qaad. Sidaas ayay ahayd siduu Eenoog Ilaah ula socday. Tukashooyinkan qarsoon waxay Ilaah carshigiisa u gaadhayaan sida iyagoo ah cadar udgoon. Shayddaanka kama adkaan karayo kuwa qalbiyadooda Ilaah ku xidhan yahay Ma jiro waqti ama meel Ilaah aan lagu baryi Karin. Mana jiraan waxyaabo inaga reebi karo inaan qalbi-yadeenna innagoo Ilaah ku baryeyna sare ugu qaadno. Haddii aan dad badan dhex joogno, haddii aan meel ganacsi joogno, Ilaah waan baryi karnaa innagoo ka baryayno inuu ina hago, siduu Nexemyaah sameeyay markuu wax ka codsanayey Boqor Arteksaases. Xidhiidh aad u gaar ah ayaan Ilaah la yeelan karnaa meel kastoo aan joogno. Waa inaan mar walba albaabka qalbiga furnaa oo Ilaah aan baryadeenna aan isaga hor geynaa si Ciise uu inoogu yimaado isagoo inoo ah sida boqorka samada xagga samada.

Inkastoo ay hareeraheenna joogaan kuwa kharriban oo wasakhaysan, waa inaan xaggooda wax ka qAadan balse aan qAadanno hawada nadiifka ah ee jannada. Waa inaan qalbiyadeenna ka xidhnaa wax kasta oo aan quduus ahayn, innagoo nafteenna Ilaah hor geynayna si tukasho leh. Kuwa qalbiyadooda ay u furan yihiin inay helaan barakada Ilaah waxay ku socon doonaan jawi quduus ah iyagoo ka duwan kuwa dhulka jawiga ay ku socdaan waxayna xidhiidh joogta ah la yeelan doonaan samada. Waa inaan fiiro gaar ahaanayd u leennahay Ciise oo garasho dheeraad ah u leennahay waxyaabaha iyo qiimaha jannada. Waxaan Ilaah ugu dhowaan karnaa si xataa marka dhibaato yar la kulanno aan isaga ugu cararno sida ubaxa ugu cararo oo ugu jeesta xagga qorraxda.

Rabitaankaaga, farxaddaada, murugadaada, danahaaga, iyo cabsidaada oo dhan waxaad hor geeysaa Ilaah. Isaga ma culaabin kartid; mana ka daalin kartid. Kan ay u tirsan yihiin timaha madaxaaga waxyaabaha ay carruurtiisa u baahan yihiinna wuu garanayaa. “Rabbigu waa raxmad badan yahay, naxariisna wuu leeyahay.” Yacquub 5:11. Qalbigiisa jacaylka ka buuxo wuxuu dareemaa murugooyinkeenna iyo markaan isaga u sheeganno. Wax kasta oo maankaaga ka adkaado isaga hor gee. Isaga wax ka weyn oo uusan xallin Karin ma jiro, maxaa yeelay duniyooyinka oo dhan gacantiisa ayuu ku hayaa, wuxuuna ka taliyaa caalamka oo dhan. Wax innaga nagu saabsan oo
[75] uusan garanayn ma jiro. Mana jiro cutub nolosheenna ka mid ah uu

isaga mugdi ku ah oo uusan akhrin karayn; wax ku adagna ma jiraan. Ma jirto masiibo carruurtiisa ku timaado, ma jirto kacdoon nafta wel wel geliya, ma jirto farxad lala qoslo, ma jirto tukasho daacad ah oo faruuraha dadka soo marto, oo uusan Aabaheenna jannada u jeedin, ama uusan wax dan ah ka lahayn. "Isagaa bogsiiya kuwa qalbi jabay, Oo nabarradoodana wuu duubaa." Sabuurradii 147:3.

Sida uu qof kastaa Ilaah ugu jeedo waa sida iyadoo aan qof kale oo Ilaah dan ka leeyahay dunida ku noolayn, oo ayan jirin naf kale oo ka mid kuwa uu Wiilkiisa uu jeclaa u bixiyey.

Ciise wuxuu yidhi, "Maalintaas waxaad ku weydiisan doontaan magacayga. Idinkuma lihi inaan Aabbaha baryayo daraaddiin. Waayo, Aabbaha qudhiisu wuu idin jecel yahay." "Idinku ima aydnaan dooran: in wax alla waxaad Aabbaha magacayga ku weydiisataanuu idin siiyo." Yooxanaa 16:26, 27; 15:16. Laakiin ku tukashada magaca Ciise ma aha oo keliya in magaciisa uun la sheego billowga salaadda iyo dhamaadka salaadda. Waa in maanka iyo ruuxa Ciise aad ugu tukato, innagoo rumaysan ballamadiisa, oo ku kalsoon nimcadiisa, innagoo qabanayna shaqadiisa.

Ilaah ma doonayo inaan aduunyada ka cararno oo aan iska dhigno kuwa Ilaah u jeeda. Noloshu waa inay ahaataa tan Masiixa oo kale ee uu dhaxeysa buuraha iyo dadka. Kii tukashada badiyaa goor dhow wuu daan doonaa ama tukashadiisa waxay u noqon doontaa mid habeen iyo maalin uu oogayo. Dadku markay dadka ka dhex baxaan, iyo Masiixiyiinta dhexdooda; markay joojiyaan inay shaqada Sayidka, kii iyaga daraadood u silcay, waxay gaarayaan heer ay garan waayaan micnaha ay tukashada iyo cibaadada leedahay. Tukashooyinkooda waxay noqonayaan kuwa iyaga ku khaas ah oo si khaldan loo tukanayo. Uma tukan karaan sababta wax doonidda Aadanaha iyo dhisidda boqortooyada Masiixa, iyagoo xoog weydiisanaya.

Waxaan ku sigannahay khasaaro markaan diidno inaan cibaadada Ilaah kula midowno Masiixiyiinta kale. Ereyadiisa xaqnimadooda maankeenna way ku micna beelayaan. Qalbiyadeennana wuu qallalayaa oo saameynta qAadan kari mayo, xagga ruuxana waan ka guul darray sanaynaa. Xidhiidhkeenna aan Masiixiyiinta kale aan la leennahay haddii aan tukashada badin weyno dabacsanaan isuma lahaanayno. Kii dadka iska dhex saaraa oo meel cidlo ah keligiis tagaa [76]
ma fulinayo wixi uu Ilaah ka doonayey. Sida saxda ee dabeecad-

deenna ina farayso ayaaba inaan isu naxariisanno oo sidaas aan ugu barbaarno shaqada Ilaah.

Haddi ay Masiixiyiinta wada xidhiidhi lahaayeen, iyagoo is faraya jacaylka Ilaah iyo xaqiiqooyinka qaaliga ah ee furashada, qalbiyadooda ayaa dib u soo noolaan lahaa iyaguna waxay sii noolayn lahaayeen kuwa kale. Waxaa laga yaabaa in maalin walba aan Aabaheenna jannada wax ka sii fahmeyna, innagoo sii helayna waaya aragnimo cusub; markaas ayaan waxaan jeclaanaynaa inaan ka hadalno jacaylkiisa; markaan sidaas sameynona, qalbiyadeenna way kacayaan wayna dhiirragelismayaan. Haddii aan Ciise ka hadalno oo aan isaga qudhiisa ku fikirno had iyo goorba, in yarna aan innaga danaheenna eegno, waxaan sii helaynaa inaan lahaanno isaga ahaantiisa.

Haddii aan Ilaah ka fikirno had iyo goorba oo aan nimcadiisa caddeymaheeda ka hadalno waa inaan ku faraxnaa isaga ka hadalkiisa. Markaan ka hadlayno waxyaabaha aduunyada waxay muujinaysaa inaan iyaga danayno. Waxaan had iyo goor ka hadalnaa saaxibbadeen sababtoo ah waan jecel nahay; farxaddeenna iyo murugadeenna ayaa la xidhiidha iyaga. Laakiin run ahaantii sabab weyn ayaan u heysannaa inaan Ilaah jeclaanno in ka badan inta aan jecel nahay saaxibbadeenna dhulka; waa inaa Ilaah wax walba ka hor marinnaa, oo aan wanaaggiisa dadka u sheegnaa iyo awoodiisa. Hadiyadaha qaaliga ah ee uu Ilaah inagu manneystay uguma uusan tala gelin inay fikirradeenna la wareegaan ilaa ugu dambeynta aan iska illowna wixi uu Ilaah inaga doonayey; Ilaah wuxuu nimcada uu na siiyey ugu talagalay inay isaga ina xusuusiyaan oo jacaylkiisa inagu xidhaan. Aduunyada ayaan aad ugu mashquulsannahay. Indhaheenna aan sare ugu qaadno albaabka macbudka samada ee furan, halkaas oo iftiinka ammaanta Ilaah ka dhalaalayo wejiga Masiixa, kaasoo "dhammaan u badbaadin karaa kuwa Ilaah ugu dhowaada isaga" Cibraaniyada 7:25. Waa inaan had iyo goorba Rabbiga ku ammaannaa "wanaaggiisa, Iyo shuqulladiisa yaabka badan oo uu binu-aadmiga u sameeyo." Sab 107:8. Cibaadadeenna waa inay ku soo urursan tahay oo keliya wax weydiis iyo inaan helno wixi aan weydiisannay. Waa inaan mar walbo ka fikirin rabitaankeenna oo keliya innagoo u jeedin faa'idooyinka aan helayno. Aad uma tukanno, laakiin aad ayaan uga caga jiidnaa inaan Ilaah wanaaggiisa
[77] ugu mahad celino. Had iyo goorba Ilaah naxariistiisa ayaa ina dul

ah, haddana wax yar ayaan isaga u mahad celinnaa, wax yar isaga waan ku ammaannaa waxyaabaha uu inaga aawdeen u sameeyay.

Waagii hore Rabbiga wuxuu reer binu-israa'iil ku yidhi markay cibaadadiisa isugu yimaadeen, "Oo waxyaalahaas waa inaad halkaas ku cuntaan Rabbiga Ilaahiinna ah hortiisa, oo wax alla wixii aad gacanta ku qabataan oo uu Rabbiga Ilaahiinna ahu idinku barakadeeyey waa inaad ku faraxdaan idinka iyo reerihiinnuba." Sharciga kunoqoshadiisa 12:7. Wax walba oo Ilaah ammaantiisa aawadeed loo sameeya waa in farxad lagu sameeyo, innagoo isugu ku ammaanayna gabay iyo heeso oo u ma-had celinayna, maaha inay murugo iyo naxdin inaga muuqato markaan Ilaah u mahad celinayno oon amaanayno.

Ilaaheenna waa Ilaah naxariis iyo nimco badan. Markaan haw-shiisa qabanayno waa inaan si murugo leh u qabanin, innagoo caga jiidayno. Waa inay farxad inoo ahaato cibaadada Rabbiga iyo shaqadiisa oon ka qeyb qaadanno. Ilaah kama doonayo carruuti-isa kuwaas oo uu siiyey badbaadada weynideeda, inay u dhaqmaan si adayg iyo cabsi ku jirto, waa inayan Ilaah u qaadan inuu yahay mid amar taagleeya. Ilaah waa saaxibkooda ugu wanaagsan; markay caabudayaanna, iyaga wuu la joogaa, wuuna barakadaynayaa oo u qalbi qaboojinayaa, isagoo qalbiyadooda ka buuxinaya farxad iyo jacayl. Rabbiga wuxuu carruurtiisa ka doonayaa inay ku farxaan cibaadadiisa, oo ay farxad ka helaan adeeggiisa. Wuxuu iyaga ka doonayaa inay ogaadaan kuwa isaga adeeggiisa u imanaya inay la-haadaan niyo wanaagsan oo ah inuu iyaga ilaalin doona, oo ay ku farxayaan maalin walba Rabbiga, oo ay leeyihiin nimco iyo naxariis iyo daacadnimo.

Waa inay ku wareegsanaadaan isku-talaabta. Cibaadadooda waa in Masiixa iyo dhimashadiisa ay sal u ahaadaan, iyo wax walbo oo ay sameynayaan. Waa in qalbiyadeenna ay ka buuxaan barako kastaa oo aan Ilaah ka helnay, markaan dareenno jacaylkiisana waa inaan diyaar u ahaanno inaan kii innaga aawadeen gacmihiisa loo qodbay wax kastaa ku aaminno.

Nafta waa inay samada u dhowaataa markay Ilaah amaanayso. Ilaah samada waxaa looga caabudaa oo looga amaanaa hees iyo amaan, markaan isaga u mahadcelinaynona waxaan la mid noqon-aynaa sida kuwa samada isaga ku caabudayo. "Ku alla kii allabariga [78]
mahadnaqidda bixiyaa waa i ammaanaa." Sab 50:23. Aan Rab-

biga u hornimaadna inna-goo farxad iyo jacayl inaga buuxo, iyo "mahadnaqid iyo cod heeseed." Ishacyaah 51:3.

# 12—Sida shakiga looga bixi karo



Kuwa badan oo ah kuwa ku cusub diinta masiixiyadda, waxay mararka qaar la dhibtoodaan su'aasha shakiga. Kitaabka gudihiisa waxay ku arkaan waxyaabo oo ayan ka jawaabi Karin, ama ayan xataa fahmi Karin, shayddaankuna waxyaabahaas ayuu u isticmaalaa inuu iyaga iimaankooda ku daciifiyo oo shaki ka geliyo inuu qoraallada ay yihiin kuwa Ilaah soo dejiey. Waxay is weydiiyaan, “Sideen ku garan karaa jidka saxda ah? Haddii uu Kitaabka Quduuska ah yahay ereyga Ilaah, sideen uga xoroobi karaa shakigan iyo welwelkan?

Ilaah inaga doonayo inaan uun iska rumaysanno isagoo aan ina siinin caddeymo aan rumaysadkeenna sal uga dhigi karno. Jiritaankiisa, dabeecadihiisa, xaqnimada ereygiisa, waxaa dhamaan dhisay marag fur macquul gal ah; maragfurkaasna waa mid dhamaystiran. Laakiin Ilaah weli waa og yahay inaan skhakinayno. Rumaysadkeenna waa inuu cad-deymo haysto sababta aan u rumaysannahay, maaha inuu leeyahay waxy-aabo la soo bandhigayo. Kuwa shakisan waxay lahaan doonaan fursado; kuwa doonayo inay xaqa ogaadaanna waxay heli doonaan caddeymo oo rumaysadkooda ay sal uga dhigi karaan.

Suurta gal maaha ina maankeenna daciifka ah ay ogaadaan shuqullada iyo dabeecadda Ilaah. Kan ugu caqliga badan oo ugu aqoonta xataa weligiis Ilaah si dhab ah uma garan doona. “War miyaad baadhi kartaa Ilaah axwaalkiisa moolka dheer? Miyaadse Ilaaha Qaadirka ah si kaamil ah u garan kartaa? Xigmaddiisu way u sarraysaa sida samada, ee bal maxaad samayn kartaa? Oo She'oolna way ka sii mool dheer tahay, ee maxaad garan kartaa?” Ayuub 11:7, 8.

Rasuul Bawlos wuxuu leeyahay, “Mool dheeraa hodantinimada iyo xigmadda iyo aqoonta Ilaah! Xukummadiisa lama baadhi karo, jidadkiisana lama raadin karo.” Rooma 11:33. Laakiin inkastoo, “Isaga wax aa ku wareegsan daruuro iyo gudcur, Oo carshigiisana waxaa aasaas u ah xaqnimo iyo garsoorid.” Sab 97:2. Waxaan wax

yar ka fahmi karnaa sida uu Ilaah inoola dhaqmo, iyo waxyaabaha
uu inala doonayo, si aan u garanno jacaylkiisa iyo naxariistiisa.
[80] Waxaan fahmi oon garan karnaa in ujeedooyinkiisa ay yihiin kuwa
uu wanaag inagula doonayo; wixi intaas ka badanna waa inaan ku
kalsoonaanno gacanta kan awoodda badan, iyo qalbiga uu jacaylka
ka buuxo.

Ereyga Ilaah sida dabiicaddiisaba, waxaa weeye mid maanka caadiga ah uusan fahmi Karin. Soo geliddii dembiga ee dunideennan, siduu Masiixu u noqday Aadane, qalbi cusboonaanshaha, sarakicii, iyo waxyaabo kale oo Kitaabka Quduuska ah lagu soo sheegay, waa waxyaabo aan qalbiga caadiga ah ee Aadanaha uusan fahmi Karin. Laakiin sabab inooma noqonaysa inaan ka shakinno ereyga Ilaah maadaamoo aan fahmi kari waynay ereyga Ilaah. Xagga aduunyada caadiga ah waxaa inagu wareegsan waxyaabo uusan qalbigeenna caadiga ah fahmi Karin. Qeybaha nolosha ee ugu hooseeya xataa way ku adag tahay inuu fahmi kan ugu aqoonta badan. Dhinac kastaa waxaa inaga jira mucjisooyin aan fahmi Karin. Miyay tahay inaan la yaabno xagga ruuxan inay jiraan waxyaabo ayan maankeenna fahmi Karin? Sababtuna waxaa weeye maanka Aad-anaha daciifnimadiisa. Ilaah wuxuu ina siiyey caddeymo ah xagga dabiicaddiisa, mana aha inaan ka shakinno ereygiisa maadaamoo aan fahmi kari wayno. Rasuul Butros wuxuu sheegayaa in qoraalladu ay ku jiraan, "Kuwaas waxaa ku jira wax in la gartaa ay dhib tahay, oo jaahiliinta iyo kuwaan adkayn ayaa qalloociya, siday Qorniinka kaleba u qalloociyaan oo ay u halligmaan." 2 Butros 3:16. Dadka Kitaabka Quduuska ah ka soo horjeeda waxay ku doodaan in adeegga Kitaabka uu yahay sababta aan loo fahmi Karin; laakiin dhab ahaantii adeeggaas wuxuu tusayaa sababta uu Kitaabka Quduuska ah ah u yahay mid xagga Rabbiga ka yimid. Haddii uu Kitaabka ahaan lahaa mid aan si fudud u fahmi karayno; oo Ilaahna ay dadka caadiga ah fahmi lahaayeen, haddaba Kitaabka ma uu-san kari lahayn inuu wax ka qora Ilaah iyo dabeecadihiisa. Mucjisooyinka iyo adeegga Kitaabka waaba inay inagu boorriyaan inaan u ogaanno inuu yahay mid xagga Ilaah ka yimid.

Kitaabka Quduuska ah wuxuu wax inagu fahansiiyaa si qalbiga baahida hayso uu wax ku fahmi karo, kuwaas oo ka yaabiyey qalbiyada ugucaqliga badan, kuwa is-hooseysiiyana wuxuu u fahansiiyaa Ilaah. Cutubyada Kitaabka Quduuska ah waxaa ku xusan

waxyaabo aan caadi ahayn oo qalbiga si fudud ku fahmi Karin, kuwaas oo maanka Aadanaha ayan is sahlan u fahmi Karin, waana inaan oggolaanno waayo Ilaah ayaa yidhi. Oo qorshihii badbaadada [81] waa ku furan yahay horteenna, si qof kastaa uu u arko tallaabooyinka ay tahay inuu qaado xagga Ilaah iyo rumaysadka Masiixeenna, si ay ugu badbaadaan jidka Ilaah; haddana xaqiiqooyinkan hoostooda oo sida fudud loo fahmi karo, waxaa ah yaabab oo ah qarsoonta ammaantiisayaababkaas oo maanka ka badanaya xagga fahanka, oo laakiin isla yaababkaas ayaa kuwa daacadda runta u doonaya waxay siisaa rumaysad iyo sharaf. Qofka daacadda ah intuu Kitaabka sii baadhbaadho, ayaa ah inta uu sii fahmayo inuu yahay ereyga Ilaah, maanka Aadanahana markaas ayuu ku hor dhacayaa awooda Ilaah. In la aqoonsado inaanan fahmi Karin runta Kitaabka Quduuska ah, waa in innagoo nidhaahnay oo kale maanka caadiga ma gaadhi karo inuu fahmo maanka Ilaah; oo Aadanaha daciifnimada aqoontiisa aawadeed ma fahmo karo ujeedooyinka kan wax walba og.

Kuwa aan fahmi Karin ujeedooyinka Ilaah way inkiraan ereyga Ilaah; xataa kuwa badan oo sheeganaya inay Masiixiyiin yihiin ayaa arriintan khatar ugu jiraan. Wuxuu rasuulku leeyahay, "Iska jira, walaalayaalow. Yaanu qalbi shar leh oo aan rumaysad lahayni midkiinna ku jirin, idinkoo Ilaaha nool ka dheeraanaya." Cibraaniyada 3:12. Waa sax in la barto Kitaabka Quduuska ah oo la baadhbaadho "waxyaabaha qarsoon ee Ilaah" inta lagu dhex muujiyey Kitaabka Quduuska ah. 1 Korintos 2:10. Maadaamoo Ilaah yihdi, "Waxyaalaha qarsoon waxaa iska leh Rabbiga Ilaaheenna ah, laakiinse waxyaalaha la muujiyey waxaa iska leh innaga." Sharciga kunoqoshadiisa 29:29. laakiin shayddaanka ayaa dadka maankooda duufsadaa. Qeyb ka mid ah Kitaabka Quduuska ah ayaa maakeenna doonayaa inuu fasirto haddii ay inagu adkaatona waxaynu bilooowaynaa inaan nidhaahno Kitaabka Quduuska ah waa mid waxba kama jiraan ah. dadka inay qirtaan inayan fahmi Karin Kitaabka Quduuska ah way iskala weyn yihiin. Mana doonayaan inay si samir leh ku sugaan ilaa goorta uu Ilaah xaqiisa iyaga u muujinaya.

Waxay u maleeyaan xigmaddooda Aadane oo aan dhamaystirnayn inay qorraallada Ilaah wada fahmi karto, markay fahmi waayoona waxay eedeeyaan inuu ereyga Ilaah midaan la fahmi Karin. Waxaa dhab ah inay qoraallo iyo wax barid badan ayan Kitaabka Quduuska ah ka iman, oo ay si toos ah uga soo horjeedaan wax

baridda Kitaabka Quduus-ka ah. waxyaabahaas ayaa ahaa waxa
[82] kuwa badan u keenayey inay shakiyaan. Laakiin dhab ahaantii waxyaabahaas waa waxay Aadana qoreen ee ma aha wax ka yimid ereyga Ilaah.

Haddii ay suurta gal u haan lahayd inay dadka ogaadaan Ilaah, iyo shuqulladiisa haddiiba meeshaas ay gaadhaan, iyaga wax run inay sii raadiyaan iyo ma jirayso wax aqoon ah oo la sii doon-doona, maanka iyo qalbigana ma korayaan. Ilaah ma sii ahaanayo mid sarreeyo; haddii ay dadka si buuxda u gartaan isaga, dadkuna aqoontoodana way joogsanaysaa maadaamoo ay gaadheen meesha aqoonta ugu dambeysa. Waa inaan Ilaah ugu mahadinaa maadaamo uu inaga xidhay inaan sidaas u aqoonsanno isaga. Ilaah waa mid aan si buuxda loo garan Karin oo xigmad badan; isagau, "waxaa ku wada qarsoon waxyaalaha qaaliga ah oo dhan oo ah xigmadda iyo aqoonta." Kolosay 2:3. Weligeedna Aadanaha way sii doondooni doonaan, weligoodna wax bay sii baran doonaan, mana ka daali doonaan xigmaddiisa, aqoontiisa iyo awoodiisa.

Ilaah wuxuu ugu talagalay xataa aduunyadan runta ereyadiisa waa inay isu furfuran addoomadiisa. Waxaa jirta hal jid oo lagu garan karo aqoonta Ilaah. Sida keliya ee ku fahmi karno Ilaah waa in Ruuxiisa aan ku soconna, kaas oo ah kii xagga ereyga laynaga siiyey. "ninna garan maayo waxyaalaha Ilaah, Ruuxa Ilaah mooyaane.;" "Ruuxu wuxuu baadhaa wax kasta, xataa waxyaalaha hoos u dhaadheer oo Ilaah." 1 Korintos 2:11, 10. Ballanqaadkii Badbaadiyaha uu xertiisa u ballanqaadayna wuxuu ahaa, "laakiin markuu kan Ruuxa runta ahu yimaado, wuxuu idinku wadi doonaa runta oo dhan...... waayo, waxayguu qaadi doonaa, wuuna idiin sheegi doonaa." Yooxanaa 16:13, 14.

Ilaah wuxuu dadka ka doonayaa inay isticmaalaan awooda maankooda; barashada Kitaabka Quduuska ahna wuxuu masakaxda u dhisaa si ay kuwa kale oo dhan u dhisi karayn. Laakiin waa inaan iska ilaalinaa waxyaabaha maanka kharibaya, taas oo ka imanaysa xagga daciifnimada maanka Aadanaha. Haddii aan maankeenna ka buuxin wayno barashada Kitaabka Quduuska ah, oo aan garan wayno waxyaabaha ku qoran Kita-abka, waa inaan ahaanno sida Ilmaha oo kale, oo aan diyaar u ahaanno inaan wax baranno oo isu dhiibno Ruuxa Quduuskaa. Markaan ogaanno inta in la'egtahay weynaanta Ilaah iyo xigmaaddiisa iyo daciifnimadeenna waa inaan

Ilaah hortiisa isku hooseeysiinno, oo waa inaan Kitaabkiisa furnaa innagoo isaga u sii dhowaanayno. Markaan Kitaabka Quduuska ah akhirnayno, waa inaan ogaanno maankeenna iyo maskexdeenna [83] ay aad daciif u tahay marka loo barbardhigo Kitaabka, qalbiga iyo maankana waa inaan Ilaah hortiisa ku sujuudaan.

Waxaa jiraan waxyaabo badan oo adag ama qarsoon, oo Ilaah u furi doona ama fahansiin doona kuwa doonaya inay fahmaan. Laakiin haddii uusan Ruuxa Quduuska inagu jirin waa inaan iska ilaalinno inaan Kitaabka si khaldan u fasirno. Waxaa jiraan qeybo badan oo Kitaabka Quduuska ah ka mid ah oo si gaar ahaanayd aan wax tar inoo lahayn haddana aan dembi inooga imanayn haddii aan akhrino. Marka ereyga Ilaah lagu akhriyo tukasho la'aan; oo fikirradeenna aan Ilaah lagu qottomin, ama doonistiisa aan doon-doonin, maanka waxaa ka buuxsamayaa shaki; ilaa xataa marka dambe inagoo Kitaabka akhrinayno aan ka sii shakinno. Kan cadowga ah oo shayddaanka ah wuxuu ku dadaalaa inuu maankeenna maamula, wuxuuna ina tusaa fasiraad aan sax ahayn. Marka dadka camalkooda iyo hadalkooda ayan Ilaah doonistiisa ku salaysnayn, si kastoo ay aqoon u leeyihiin waxay ku dhacaan inay si khaldan Kitaabka u turjumaan, waxyaabaha ay ina baraanna laguma kalsoonaan karo. Kuwa Kitaabka u akhriya inay waxyaabo iskhilaaf ah ka helaan xagga Ruuxa wax aqoon kuma laha. Iyago si khaldan wax u fasiranaya ayay waxay ka indha beelaan runta iska cad oo hortooda taalla.

Si kastaa oo looga leexda waxyaabaha dhabta ee shakiga keenaa waa dembi jacayl. Kan kibirka badan ma jeclaado waxyaabaha Ilaah, iyo dembigajecel, iyo kuwa aan doonayn inay adeecaan ereyga Ilaah. Si aan runta dhabta u garanno waa inaan qalbiyadeenna si dhab ah ugu doondoonna inaan fahanno oo aan adeecno markaan fahanno ka dib.

Kuwa dhammaan ku yimaada fikirkaas oo kalena oo si ruuxiyan ah Kita-abka Quduuska ah u akhriyaanna waxay heli doonaan caddeymo wax ka ool ah oo caddeynaya inuu yahay ereyga Ilaah, waxayna helayaan fahanka xaqa iyagoo kuwa xigmad leh sii noqonaya.

Masiixu wuxuu yidhi, "Haddii nin doonayo inuu doonistii Ilaah sameeyo, wuu garan doonaa waxbaridda." Yooxanaa 7:17. Inti aad ka shakin lahayn oo aad su'aallo iska weydiin lahayd wax Aadan

fahmayn, waxaad dhug u yeelataa iftiinka uu Ilaah ku siiyey uu korkaada ka baxaya, waxaadna heli doontaa iftiin ka sii badan. Adigoo cuskanaya nimcada Masiixa, wax kasta oo uu Ilaah kaa doonayo samee, Ilaahna wuxuu ku sii fahansiin doonaa waxa hadda kaa qarsoon.

[84] Waxaa jira caddeymo dadka oo dhan indhahooda ku wada cad, dhamaan kuwa aqoonta leh iyo kuwa aan aqoonta lahayn, waana waayaaragnimada. Ilaah wuxuu inaga doonayaa inaan xaqnimada ereygiisa innaga isu caddeyno, iyo ballamadiisa xaqnimadooda. Wuxuu inaga doonayaa inaan, "Bal dhadhamiya oo arka in Rabbigu wanaagsan yahay, Waxaa barakadaysan ninkii isaga isku halleeya." Sabuurradii 34:8. Meeshi aan mid kale hadalkiisa ku kalsoonaan lahayn ama aamin lahayn, waxaa laynaga doonayaa inaan innaga qudheenna isu dhadhamino. Masiixu wuxuu yidhi, "Weydiista, waanad heli doontaan." Yooxanaa 16:24. Bal-lamadiisa way inoo rumoobi doonaan. Ilaah weligiis ballamadiisa been kama uusan sheegin oo kuma guuldarraysan; haddana kuma guuldarraysan doona. Markaan Masiixa u soo dhowaanayna, oo aan ku farxayno jacaylkiisa, shakigeenna iyo gudcurka aan ku jirno way lumayaan.

Rasuul Bawlos wuxuu inoo sheegayaa in Ilaah, "Isagu waa inaga samata bixiyey xoogga gudcurka, oo wuxuu inoo beddelay boqortooyadii Wiilka jacaylkiisa." Kolosay 1:13. Oo ku kastaa oo ka soo gudbay dhimashada oo u soo gudbay xagga nolosha wuxuu, "Xaqiiaysan doonaa in Ilaah run yahay" Yooxanaa 3:33 Wuxuuna ku marag furi doonaa, "Waxaan u baahnaa gargaar, oo waxaan ka helay xagga Masiixa. Wax kastaa oo aan doonayey waa helay, gaajadii ay nafteyda qabteyna waa la dhergiyey; imminkana Kitaabka Quduuska ah wuxuu aniga ii yahay muujin xagga Ciise Masiix ka timid. Miyaad I weydiinaysaa sababta aan u rumaysanahay Ciise Masiix? Waayo isagu wuxuu aniga ii yahay Badbaadiyahayga xagga Rabbiga. Sababta aan Kitaabka Quduuska ah u rumaysanahay? Waayo waxaan u arkay inuu yahay codka Ilaah ee la hadlayo naftayda." Innaga qudheenna ayaa isu markhaat furi doonna inuu Kitaabka Quduuska ah yahay ereyga xaqa ee Ilaah, oo Masiixuna yahay Wiilka Ilaah. Waxaan og nahay inaan si indha la'aan ah aan iskaga raacayn Kitaabka Quduuska ah. Butros wuxuu walaaladiis inay, "ku koraan nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix." 2 Butros 3:18. Markay dadka Ilaah ku koraan

nimcadiisa, waxay si joogta ah u helayaan inay fahmaan doonista ereygiisa. Qoraallada Kitaabka Quduuska ahna waxay ka dhex helayaan iftiin wanaag aad u tira badan. Sidaas ayay ahaan jirtay taariikhda kiniisadda oo dhan, sidaas ayayna sii ahaan doontaa ilaa dhamaadka. "Laakiinse waddada kuwa xaqa ahu waa sida iftiinka
waaberiga oo kale, Kaas oo hadba soo kordha ilaa uu noqdo maalin [85]
cad." Maahmaahyadii 4:18.

Rumaysad ayaan ku eegi karnaa aakhiro markaasaan fahmi karnaa ballamada Eebbe si caqligeenna ugu kora, fikirrada Aadanaha oo la midoobaya tan Rabbiga, oo xoog kastaa oo nafta ka mid ah xidhiidh gaar ahaanayd ula yeesha kan iftiinka ka soo durdura. Waa inaan ku faraxnaa in wax kasta oo imminka innaga qarsoon layna hor keeni iyagoo qaawan, wixi innagu adkaa inaan fahannona waa layna fahansiin doonaa; waxyaabihi maankeenna wareer iyo la yaab ku ahaan jirayna, waxaa layna tusi doonaa iyagoo iska cad fahankooda. "Haatan si aan caddaan ahayn ayaynu muraayad wax ugu aragnaa, laakiin markaas ka fool ka fool ayaynu wax u arki doonnaa. Hadda si qabyo ahaan ah ayaan wax u garanayaa, laakiin markaas waxaan u garan doonaa sidii la ii gartay." 1 Korintos 13:12.

[86]

# 13—Farxadda xagga Rabbiga

Carruurta Ilaah waxaa loogu yeedhay inay isaga Masiixa wakiillo u ahaadaan, iyagoo muujinaya wanaagga iyo naxariista Rabbiga.

Sida uu Ciise inoogu muujiyey dabeecadda dhabta ah ee Masiixa, sidaas oo kale ayaa laynooga doonayaa inaan Ciise ugu muujinna adu-unyada aan garanayn dabacsanaantiisa iyo jacaylkiisa. Ciise wuxuu yidhi, " Sidaad dunida iigu soo dirtay ayaan anna iyaga dunida ugu diray."

"Iyagaan ku jiraa, adna anigaad igu jirtaa....... in dunidu garato inaad I soo dirtay, iyo inaad iyaga u jeclaatay sidaad ii jeclaatay." Yooxanaa 17:18, 23. Rasuul Bawlos wuxuu xerta Ciise ku yidhi, "idinkoo muuqanaya inaad tihiin warqadda Masiixa." "tan ay dadka oo dhammu garanayaan oo akhriyaan." 2 Korintos 3:3, 2. Mid kastaa oo carruutiisa ka mid ah Ciise wuxuu ka dhigayaa inay dunida u ahaadaan warqad farriin sidda. Haddii aad tahay mid Ciise raac-san, wuxuu adiga gudahaada ku dirayaa waqad ku socota reerkaaga, xaafaddaada iyo meesha aad deggantahay. Ciise oo adiga kugu dhex nool wuxuu doonayaa inuu la hadlo qalbiyada kuwa isaga aan garanayn. Waxaa laga yaabaa inay weligood akhriyin Ki-taabka Quduuska ah ama ayan si tukasho ku jirto ku akhriyin haddii ay akhriyaan xataa, ama maba ka arkaan jacaylka Ilaah xagga shuqul-ladiisa. Laakiin haddii aad tahay mid si dhab ah Ciise u aamin-san, waxaa laga yaabaa inuu Ilaah kuu isticmaalo inuu iyaga qal-biyadooda ku soo duma, oo ay wax ka fahmaan wanaaggiisa oo ay isaga jeclaadaan oo isaga u adeegaan.

Masiixiyiinta waxaa laga doonayaa inay iftiin u ahaadaan jidka jannada. Waa inay aduunyada u muujiyaan iftiinka Masiixa uga yimid oo iyaga ku dul ifayo. Noloshooda iyo dhaqankooda waa inuu kuwa kale oo aan Masiixiyiinta ahayn tusiyaa Masiixa iyo wanaaggiisa.

Haddii aan Masiixa wakiillo u nahay waa inaan dadka kale ugu muujinnaa sida uu isaga u qurux badan yahay. Kuwa Masiixiyiinta shee gta oo haddana gunuunaca waxay dadka Masiixa u tusaan inuu

yahay mid khaldan. Waxay muujiyaan in Ilaah uusan ku faraxsanayn inay carruurtiisa faraxsanaadaan, taas oo ahaanaysa markhaatifur been ah xagga Aabahayaga samada. [87]

Shayddaanku aad ayuu isku sarreysiiyaa markuu ogaado inuu carruurta Ilaah lumiyey. Aad ayuu u farxaa markuu arko innagoo Ilaah aan ku kalsoonayn, oo aan ka shakinno inuu xoog uu innagu badbaadiyo leeyahay.

Wuxuu jecel yahay inaan u maleyno inuu Ilaah ina xumaynayo. Waaba shaqada shayddaanka inuu Ilaah inoo tusa mid aan naxariis iyo nimco toona aan lahayn. Runta Ilaah uu sheegay ayuu si been dadka uga dhaadhicayaa. Dadka fikirradooduna wuxuu ka buuxiyaa fikirro khaldan. Intaan innaga runta Ilaah sida ay tahay u qAadan lahayn, waxaan raacraacnaa khiyaanooyinka shayddaanka innagoo had iyo goorba Ilaah ka gunuunaceyna. Shayddaanku wuxuu weligiisba doonayey inuu diinta inooga dhigo mid aan qiimo lahayn. Wuxuu jecel yahay inay u muuqato mid aad u foolxun; goortuu kan Masiixiga sheeganaya uu fikirradaas qaatona, wuxuu si toos ah ugu dhacay beenta shayddaanka.

Kuwa badan oo nool ayaa been ku dhex soconaya imminka, qalbiyadoodana waxaa ka buuxsama murugo iyo qalbijab. Mar aan Yurub joogay gabadh xaaladdan ku sugnayd oo aad u walbahaarsannayd, ayaa warqad ii soo qortay iyadoo I weydiisanayso ereyo dhiirragelin ah. habeenka aan warqaddeeda akhriyey ka dib waxaan ku riyooday anigoo beer dhex jooga, mid u ekaa inuu beerta leeyahay ayaa beerta I dhex marinayey oo I tusayey. Anigoo ubaxyada taabanaya oo udgoonka beertaa ku raaxeysanaya, ayaa gabadhi walaashay ahayd oo dhinacayga socotay ayaa waxay waxyaabo jidkooda xidhayey. Goortay ii yeedhaysay way ooyaysay. Mana ay ku socon jidadka beerta dhexdeeda loogu talagalay in lagu socda, oo waxay dhex socotay qodxan iyo yamaarug. Waxay tidhi, “ma wanaagsana in beertan quruxda badan ay qodxan iyo yamaarug ka buuxaan?” kii gabadha iyada ah jidka tusayey ayaa wuxuu ku yidhi, “qodxaanta iska daa, waayo, way ku xanuunjinayaan oo keliya. Waxaad uruurisaa ubaxyada beerta iyo waxa wanaagsan oo beerta ku dhex yaalla.”

Miyaanay jirin xaalado iftiimayo oo noloshaada soo maray? MiyAadan soo marin xilliyo qaali ah oo qalbigaadu farxadda Ilaah la rey reeyay? Markaad dib u eegta noloshaada miyAadan arakayn

wakhtiyo aad kuugu wanaag badan? Miyaanay ballamada Ilaah sida ubaxyada quruxda badan dhinacyadaada ka baxayn? MiyAadan
[88] u oggoolaanayn in qurux dooda iyo udgoonkooda ay qalbigaaga farxad ka buuxinayn?

Qodxaanta iyo yamaarugga way xanuunjinayaan oo keliya; haddii aad waxyaabahaas oo keliya aad eegtona, oo aad dadka kalena kuwaas oo keliya tusisaa, miyAadan wanaagga Ilaah ee noloshaada Aadan yaraysanayn, adigoo ka hor joogsnaya kuwa dhinacyadaada ah inay ku socdaan jidka nolosha?

Ma ah in la fiiriyo dhinacyada nolosha ee xanuunka badan oo ke-liya, waxay keliya oo naga dhigayaan inaan qalbijabno oo xanuun inaga sii bato. Naftu haddii ay qalbijabto waxaa ka buuxsamayaa gudcur, isagoo qofku iftiinka Ilaah ka sii fogaanayo oo jidka wanaagsanna gudcur kuwa kale uga sii dhigayo.

Ilaah uga mahad celi sawirrada quruxda badan oo horteenna dhigay. Aan haddaba isku uruurinna hubaallada jacaylka ee horteenna dhigay, si aan si joogta ah ugu sii eegno: Wiilka Ilaah isagoo ka tagay carshiga Aabihiis, oo soo qaatay suurad Aadane, si uu inooga badbaadiyo xoogga shayddaanka; guushiisa uu gaadhay innaga aawadeen, siduu inoogu furay albaabka jannada, iyo siduu inoogu muujiey meelaha qarsoon ee uu Ilaah keliya ku nool yahay, dadkii dembiga lahaana uga saaray qudhunki ay ku dhex jireen, oo uu dib iyaga Ilaah ugu soo celiyey, innaguna markaas aad u adkaysannay tijaabada Rabbaaniga ah xagga rumaysad aan ka helnay badbaadiyaheenna, innagoo huwan xaqnimada Masiixa, oo sare u eegayna carshigiisa, sawirradan ayaa ah kuwa uu Ilaah inaga doonaya.

Markaan Ilaah jacaylkiisa ka shakinno oo aan ku kalsoonaan wayno ballamadiisa isaga ayaan maamuus jebinaynaa oo waxaan murjinaynaa Ruuxa Quduuskaa.

Hooyo sidee bay dareemi lahayd haddii had iyo goorba carruurteeda ay ka dacwoonayaan, sida iyadoo aan iyaga si wanaagsan u samayn, iyadoo nolosheeda dhan ay wanaaggooda ka shaqayn jirtay? Bal kaba soo qaad inay jacaylka ay iyaga u qabta ka shakiyeen; iyadu qalbigeeda wuu jebiyaa. Waalid sidee buu dareemi lahaa haddii ay carrurtooda sidaas ula dhaqmaan? Haddaba Aabaheenna jannada ku jira sidee buu dareemayaa markaan jacaylkiisa ka shakinno, kaas oo u bixiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay si aan nolol u helno? Rasuul Bawlos wuxuu qoray, “Kii aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laaki-

inse innaga dhammaanteen u bixiyey, sidee buusan wax walbana inoola siin doonin isaga?" Rooma 8:32. Haddaba intee kuwa badan [89] hadal ahaan haddanay ficil ahaan o dhanayn leh, "Rabbiga aniga tan iiguma talagelin. Waxaa laga yaabaa inuu kuwa kale jecel yahay, laakiin aniga ima jecla."

Waxyaabahaas oo dhan naftaada ayay dhib weyn u keenayaan; waayo, erey kastaa oo shaki ah oo ku hadashaa jirrabaadaha shayddaanka ayuu u yeedhayaa, wuxuuna adiga kugu sii xoojinayaa inaad sii shakidid, malaa'gaha ku dul saaranna wuu welwel gelinayaa. Shayddaanku markuu ku jirrabo, erey shaki ama gudcur ah ha ku hadlin. Haddii aad albaabbada u furtid shakiyadiisa, maankaada waxaa ka buuxsamayaa kalsooni darro iyo su'aallo khaldan. Haddii aad ka hadashid dareenkaaga, shaki kastaa oo aad ka hadashid adiga keliya kuuguma soo noqonaya, laakiin waa midh ka dhex dhalanaysa oo midho ka sii dhalaysa kuwa kale naftooda, waxaana laga yaabaa inay suurta geli wayso inaad ka adkaatid saameynta ereyadaada. Adiga qudhaada waad ka soo kabsan xilliyo jirrabaad iyo dabinno oo shayddaanka kuu dhigay, laakiin waxaa laga yaabaa kuwa badan oo aad saameysay inay ka soo laaban waayaan rumaysaddarrada aad ku dhex tuurtay. Intee in la'eg ayay muhiim u tahay inaan kuwa kale kula hadalno waxyaabaha ruuxa oo nafta xoogeynaya.

Malaa'igaha waxay dhegaysanayaan war bixinta aad Sayidkaaga samada ka gudbinaysid. Sheekooyinkooda oo dhan ha ahaadeen kuwa aad kaga hadashid kan Aabaha xaggiisa adgia aawadaa dhexdhexaadiye kuu ah. Markaad qof saaxib ah la hadlaysid, ammaanta Rabbiga ha ahaato faruurahaaga iyo qalbigaaagaba. Waayo, fikirradiisa ayaa Ciise u sii dhowaanayaan.

Ku kastaa wuu dhibtoonayaa; oo wuxuu marayaa wakhtiyo aad u adag, oo wuxuu la dagaallamayaa jirrabaado ay adag tahay in laga adkaado. Dhibaatooyinkaaga ha u sheeganin Aadanha kale, laakiin wax kasta Ilaah tukasho ula hor tag. Waxaad sharci ka dhigataa inAadan ku hadlin hal erey ah oo shaki ama qalbijab ah. waxaad samayn kartaa dadaal badan oo aad kuwa kale ku xoojisid, adigoo la qeybsanaya ereyo rajo leh oo quduus ah.

Waxaa jiraan kuwa badan oo geesiyiin ah oo la jirrbayo, kuwaas oo ku dhow inay la suuxaan dagaalka ay nafta iyo shayddaan ay kula ji-raan. Kuwaas oo kale markaad la kulantid ha qalbijebin. Waxaad ku tidhaahdaa ereyo dhiirragelin ah oo rajo leh oo adiga kaa

[90] soo dhex iftiimaya. “ Midkeenna naftiisa uma noola, midkeenna naftiisa uma dhinto.” Rooma 14:7. Saameynteenna ayaa waxaa laga yaabaa in kuwa badan oo kale ay ku dhiirragelismaan, ama ay ku qalbijebaan, oo ay Masiixa iyo xaqiisa ka cararaan.

Waxaa jiraan kuwa badan oo fikir xun noloshi iyo dhaqanka Ma-siixa ka qaba. Waxay u maleeyaan inuu ahaa mid aan naxariis lahayn oo dabacsanaan aan lahayn, oo wax farxad ah uusan lahayn. Kuwa badan ayaa Ciise ka aaminsan fikirrada caynkaas ah.

Marar badan ayaa waxaa la yidhaahdaa Ciise wuu ilmeeyay, oo weligiis ma qoslin. Badbaadiyaheenna xaqiiqadii wuxuu ahaa nin murugo, oo xanuun badan maray, waayo, wuxuu qalbigiisa u furay xanuunnada Aadanaha oo dhan. Laakiin inkastoo naftiisa ay xanuun iyo murugo badnayad, Ruuxiisa ma uusan burburin. Sharaftiisa ma aysan huwan murugo, laakiin run ahaantii naftiisa waxay ahayd mid nabad ka buuxda. Qalbigiisa wuxuu ahaa durdurka nolosha, oo meel kastaa oo uu tegayna wuxuu waday nasiino iyo nabad, farxad iyo reyrayn.

Badbaadiyaheenna wuxuu ahaa mid ay ka go’nayd inuu wax qabto, laakiin run ahaantii weligiis ma uusan ahayn mid murugo iyo cagajiid wax ku qabanayey. Nolosha kuwa isaga ku dayanayana waa inay sidaas oo kale ahaato; waa inay si buuxda naftooda masuuliyad isku saaraan. Waa inaan faanin oo iskibirin, laakiin dhab ahaantii diinta Masiixa waxay nabadda u keentaa sida durdurka webiga oo kale. Ma harraad jebinaysa iftiinka farxadda, mana reebaysa inaan farxad ku noolaanno, oo weji farxad leh aan muujinno. Masiixa uma uusan iman in loo adeego laakiinse wuxuu u yimid inuu isaga inoo adeego; markuu jacaylkiisa ka dhex taliyaa qalbigeenna, waa inaan raacnaa tusaalahiisa.

Haddii aan kuwa kale si xun ka maleysanno marka dambe waxaan gaadhaynaa heer ay inagu adkaato inaan u jeclaanno siduu Masiixa inoo jeclaaday; laakiin haddii maankeenna uu ku shaqeeya jacaylka Masiixa, jacaylkaas wuxuu gaadhayaa kuwa kale oo walaalladeen ah. waa inaan is jeclaanaa oo dadka kale xushmadeynaa, innagoo aan xumaan uga dhigayn khaladaadkooda ama aan ku eedaynin. Is-hooseysiin iyo jacayl waa inuu inaga buuxaa, oo kuwa kale xumaatooyinkoodana aan u dul qAadanaa. Markaan sidaas sameyno waxay inaga baabi’inaysaa bakheelnimada oo qalbiyadeennana wuu
[91] sii xoogoobayaa oo waxaan noqonaynaa kuwa deeq badan.

Daa'uud wuxuu leeyahay, "Rabbiga isku hallee oo wanaag samee, Oo sidaasaad dalka ku degganaan doontaa, oo ammaan baad ku daaqi doontaa" Sabuurradii 37:3. "Rabbiga isku hallee." Maalin kastaa waxay wadataa sharkeeda, iyo dhibaatooyinkeedaoo markuu dhib ina qabsadona waa inaan sidaan u wajih lahayn aan garanayna. Dhibaatooyin badan oo innaga isu keennay ayaa ina soo weeraraan, aad ayaan u cabsannaa mararka qaar, aad ayaanna u argagaxnaa, ilaa kuwa kale oo aan rumaystayaasha ahayn inoo maleeyaan inaan lahayn Badbaadiye naxariis badan, kaas oo diyaar u ah inuu maqlo baryootankeenna oo mar kastaa oo aan gargaar u baahannay inala soo gaadho.

Kuwa qaar waxay had iyo goorba ku noolyihiin baqdin iyo inay dhibaato ku timaado. Maalin kastaa waxaa iyaga ku wareegsan nimcooyinka Ilaah iyo jacaylkiisa; maalin kastaa waxay ku raaxeystaan barakooyinkiisa iyo irsaaqaddiisa; laakiin innaba dhug uma yeeshaan barakooyinkaas. Maankooda wuxuu had iyo goorba ka welwelayaa dhibaatooyin ku imanaya; ama waxayba isku odhanayaan wax aan qabsan karo ma lahan, iyagoo iska indhatiraya barakooyinka Ilaah oo ay tahay inay uga mahad celiyaan. Dhibaatooyinka u yimaadaa meeshii ay Ilaah u soo dhowayn lahaayeen, oo ah kan keliya ee u gargaari kara, waxayba iyaga sii noqdaan kuwa Ilaah ka sii fogaado waayo waxaa iyaga ku dhaca cabsi iyo walbahaar.

Miyay inoo wanaagsantahay inaan sidaas u ahaanno kuwa aan rumaysadka lahayn? Maxaan u noqonnaa kuwa aan mahadcelinayn oo aan Ilaah ku kalsoonayn? Ciise waa saaxibkeenna khaaska ah; jannada oo dhan waxaa laga doonayaa inaan ahaanno kuwa wanaagsan. Waa inaan nafteenna u oggolaan inay ka welwesho waxyaabaha maalin inagu imanayo oo maankeenna cabburinayo. Haddii aan sidaas sameyno waa inaan had iyo goorba diyaar u nahay in aan ku noolaanayno cadho iyo cabsi. Waa inaan waxyaabaha nolosheenna burburinayo oo baabi'inayo, oo aan waxba inoo tarayn iska ilaalinno.

Waxaa laga yaabaa in ganacsigaada uu wareer kuu keeno, oo ganacsigaagu u sii ekaado mid sii baaba'ayo, oo aad u maleysid inaad khasaaraysid; laakiin waxaan kuugu leeyahay waa inAadan qalbijebin; dhibaatooyinkaaga oo dhan Ilaah hor gee, isagana ka war sug adigoo faraxsan. Ku ducayso inaad heshid xigmad aad ku [92]
maamushid oo ku kala garatid wax kastaa, adigoo iska ilaalinayo

masiibo iyo khasaaro. Xaggaaga samee dadaal kastaa sida aad kula iman lahayd natiijooyin wax ku ool ah. Ciise wuxuu inoo ballanqaaday gargaarkiisa, laakiin waa in aan innagana dhankeenna ka dadaalnaa. Markaan Gargaaraheenna ku kalsoonnahay, wixi tabarteenna ah waan sameynay waa inaan si farxad leh ku aqbalnaa wax kastaa oo natiijadu noqota.

Ma aha doonista Ilaah in dadkiisu ay culays iska saaraan waxyaabaha nolosha. Laakiin Rabbigeennu inaga khiyaamayn mayo. Isagu inaguma odhanayo, " Ha cabsanina; wax khatar ah lama kulmaysaan." Isagu wuu og yahay in horteenna ay jiraan dhibaatooyin iyo tijaabooyin, isaguna wuxuu inoo maamulaa si cad. Isagu weligiis ma ballanqaadin inuu dadkiisa ka qaadi doona aduunyada dembiga iyo sharka ka buuxa, laakiin wuxuu dadkiisa u sheegay inay leeyihiin meel ay ku carari karaan. Ducaduu Sayidkeenna u duceeyay xertiisa waxay ahayd, "Kaa baryi maayo inaad iyaga dunida ka qaaddid, waxaanse kaa baryayaa inaad ka dhawrtid kan sharka leh." Wuxuu kaloo yidhi, "Dunida ayaad dhib kala kulantaan, laakiinse kalsoonaada, anaa ka adkaaday dunida e." Yooxanaa 17:15, 16:33.

Wacdigiisii buurta, Masiixu wuxuu xertiisa baray casharro ku aaddan muhiimadda ay leedahay isku halleynta Ilaah. Casharradaas wax-ay ahaayeen kuwa loogu talagalay inay dhirragelin u ahaadaan carruurta Ilaah xilli kasto oo ay joogaan, xilligeenana way soo gaadheen iyagoo ina amraya oo inoo qalbiqaboojinaya. Badbaadiyuhu wuxuu xertiisa u tilmaamay sida ay shimbiraha cirka u amaanaan Ilaah, iyagoo aan ka welwelayn waxa ay cuni lahaayeen, waayo, "Shimbirraha cirka eega, waayo, waxba ma beeraan, waxna ma gurtaan, maqsinnona waxba kuma urursadaan. oo Aabbihiinna jannada ku jira ayaa cunto siiya." Markaasuu weydiiyey iyaga, "Idinku miyaydnaan ka roonayn?" Matayos 6:26. Kan wax kastaa siiya xayawaanka iyo Aadanaha oo dhan wuxuu fidinayaa gacantiisa isagoo diyaar u ah inuu irsaaqo mid kasta oo abuurkiisa ka mid ah. shimbiraha cirka ma aha inuu moogan yahay. Afkooda cuntada uguma soo rido, laakiin waxa ay u baahanyihiin wuxuu u siiyaa si isaga xigmaddiisa ku jirto. Waa inay urursadaan abuuka uu iyaga ugu talagaly inay cunaan. Waa inay buulalkooda dhistaan. Waa inay
[93] ilmahooda yar yar ay quudiyaan. Markay sidaas sameeyaan waxay dibadda u baxaan iyagoo heesaya, waayo, "Aabbihiinna jannada

ku jira ayaa cunto siiya." Oo "Idinku miyaydnaan ka roonayn?" Miyaydnaan idinka ahayn kuwa shimbiraha ka caqli badan, oo ah kuwa Ilaah si ruuxiyan ah ku caabudi karo, oo aad uga qiimo badan shimbiraha cirka? Miyuusan kii nolosheenna aasaasay, oo ah kan nolosheenna ilaaliya, kii inaga abuuray xagga araggiisa Rabbaaniga ah, ina siinayn waxa aan u baahannahay haddii isaga oo keliya aan ku kalsoonaanno?

Masiixu wuxuu kaloo xertiisa u tilmaamay ubaxyada beerta ka baxa, kuwaas oo si la yaab leh u baxaya oo quruxda badan, taas oo Aabaha jannada iyaga siiyey, taas oo muujinaysa jacaylka uu isaga u qaba Aadanaha. Wuxuu yidhi, "Fiiriya ubaxyada duurka siday u baxaan." Quruxda ubaxyadan daciifka ah xataa Sulaymaan sida kuwan dhar uma uu gashan jirin. Mid kastaa oo dadka ka mid ah si walba hadduu wax u sawiro ama u sameeya looma barbardhigo karo quruxda iyo nimcada uu Ilaah ku sameeyay ubaxyadan. Ciise wuxuu ina weydiinayaa, "laakiin haddii Ilaah sidaa u huwiyo cawska maanta duurka ku yaal oo berrito moofada lagu ridayo, sidee ka badan ayuu idiin huwinayaa, rumaysad-yarayaalow?" Matayos 6:28, 30. Haddii Ilaah ee kan wax kastaa abuuray, uu siiyey ubaxyada goor dhow baaba'aya quruxdaas, intee in la eg ayuu ka dadaalayaa kuwa uu ka abuuray isaga araggiisa? Wacdigan uu Masiixa ku dhiibay korkeeda wuxuu fikir kastaa oo damac badan ku yahay canaan, iyo qalbi kastaa oo shaki ka buuxa.

Rabbigu wuxuu doonayaa in gabdhihiisa iyo wiilashiisa oo dhan ay faraxsanaadaan, oo nabad ku noolaadaan, oo ay ahaadaan kuwa isaga adeeca. Ciise wuxuu leeyahay, "nabaddaydana waan idin siinayaa, sida dunidu u siiso anigu idiin siin maayo. Qalbigiinnu yuusan murugoon, yuusanna biqin." "Waxaan waxyaalahaas idiinkula hadlay in farxaddaydu idinku jirto, iyo inay farxaddiinnu buuxsanto." Yooxanaa 14:27; 15:11.

Farxadda ka timaada qofka qabkiisa oo aan ku iman amarrada Ilaah oo la adeecay, waa mid fikir xun ka timid oo aan meel dheer gaadhi doonin; goor dhow ayay dhamaanaysaa, naftana waxaa ka buuxsamaysaa cidlonimo iyo murugo; laakiin Ilaah adeeggiisa waxaa laga helaa farxad iyo kalsooni; Masiixiga loogama tegayo inuu ku socda wado uusan hubin halka ay ku dhamaanayso; mana looga tegayo inuu ahaado mid shallaayo oo dib ka cadhooda. Haddii aan [94]

dunidan wax badan ku haysan waxaa laga yaabaa inuu doonayo inaan si farxad leh ku sugno aakhirada imanayso.

Laakiin xataa waxaa suurta gal ah in Masiixiyiinta dunidan ay ku helaan farxadda ay iyaga dhexdooda isla qeybsadaan; waxay heli karaan iftiinka jacaylka Masiixa, iyo qalbiqaboojin joogta ah oo ka yimaada la jiritaankiisa. Tallaabo kasta oo aan qaadno waxay inoo sii dhoweenaysaa Ciise, oo waxay ina siinaysaa inaan si buuxda u dareenno jacaylkiisa, oo waxaan ku sii dhowaanaynaa gurigeenna jannada ee barakaysan. Haddaba yaanan kalsoonideenna iska lumen, laakiinse aan lahaanno hubaal lagu kalsoonaan karo, oo aan ka sii kalsoonaanno sidaan hore u ahayn. "Ilaa haatan Rabbigu waa ina caawiyey," Wuuna ina caawin doonaa ilaa dhamaadka. 1 Samuu'eel 7:12. Aan fiirinno tiirarka aan la dhaqaajin Kar-in, kuwaas oo ina xusuusinaya wixii uu Rabbiga inoo sameeyay inuu ina qalbiqaboojiya oo inaga badbaadiyo gacanta kan wax burburinaya. Xusuusteenna aan ka buuxinna naxariista uu Ilaah inoo sameeyay oo dhan, illinta isaga ka daadatay, xanuunki uu u adkeystay, damacyada oo inaga qaaday, cabsida sida uu inooga saaray, sida uu inoo siiya wax kasta oo aan u baahannahay, barakooyinka uu inagu manneystay, innagoo ku xoogoobeyna waxa inaga horreeya inta safarkeenna ka hadhay.

Waxaa laga yaabaa inaan fiirinno dhibaatooyinka inagu iman doona, laakiin waa inaan eegno waxa la soo dhaafay iyo waxa iman doonaba, oo waxaan odhan karaa, "ilaa haatan Rabbigu waa ina caawiyey." "Oo intay maalmahaagu yihiin xooggaaguna ha ahaado." Sharciga kunoqoshadiisa 33:25. Dhibaatooyinka ka badan maayan xoogga laynoo siiyey inaan kaga adkaanno. Haddaba aan ka sii wadno shaqadeenna meesha aan ka sii wado karno, innagoo rumaysan wax kasta oo inagu yimaado in Ilaah ina siin doona xoog aan kaga adkaanno.

Markaas ayaa albaabbada jannada waxaa loo furi doonaa Carruurta Ilaah, markaasaa boqorka amaantana ku odhan doonaa iyaga sidatan, "Kaalaya, kuwa Aabbahay barakadeeyeyow, oo dhaxla boqortooyada tan iyo aasaaskii dunida laydiin diyaargareeyey." Matayos 25:34.

Markaasaa kuwa la madax furtay waxaa lagu soo dhowayn doonaa guriga uu Ciise iyaga u diyaaryey. Halkaas saaxibbadood ma ahaan doonaan kuwa dhulki kharribi jiray, iyo beenaalayaashii,

sanamcaabudayaashii, kuwii aan daahirsanayn, iyo kuwa aan rumaysadka lahayn; laakiin waxay la saaxibi doonaan kuwii Shayd- [95]
daanka ka adkaaday oo xaggii nimcadii Rabbiga dhaqan daahirsan la yimid. Dembi kastaa, iyo daahirsanaan la'aan kastaa, kuwaas oo iyaga dhib ku hayn jiray, halkan waxaa lagu qaaday dhiigga Masiixa, oo waxay iyaga heleen dhalaalka amaantiisa oo ka sii dhalaal badan iftiinka qorraxda. Dhaqankii wanaagsanaa ee Masiixana iyo quruxdiisii ayaa iyaga ku dul ifaysaa, kuwaas oo ka dhalaal badan dhalaal kasta oo aan maanta u jeedno. Waxay carshiga Ilaah hor joogsan doonaan iyagoo aan wax iin ah lahayn, iyagoo helaya sharaf iyo fursad kastaa ay malaa'igaha helayaan.

Marka loo eega amaanta uu Aadanaha dhaxli doona, "nin maxay u taraysaa hadduu dunida oo dhan helo oo uu naftiisa lumiyo?" Matayos 16:26. Dadku waxaa laga yaabaa inay xagga muuqaalka masaakiin ka yihiin, laakiin Ilaah iyaga kuwa rumaysta dhamaan u ballanqaaday hanti ay dunida oo dhan haddii ay isu timaado ayan siin karayn. Nafta la madax furtay oo laga nadiifiyey dembi kastaa, oo Ilaahna si daacad ah ugu adeegtay, waxay lahaan doontaa qiimo iyo mudnaan weyn; marka hal qof ah uu badbaadana waxaa samada ka jiraysaa farxad Ilaah iyo malaa'igaha , farxaddaas oo lagu muujiyo heeso guul quduus ah.